Syracuse City School District

2025-2026

# Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada



# WARQAD KA SOCOTA KORMEERAHA GUUD

## *Qoysaska Qaaliga ah ee Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse,*

Qoysaska Qaaliga ah ee Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse,

Waxaan rajaynaynaa inaad dhammaan taqaaniin Xeerkayaga Anshaxa, Dabeecadda, iyo Taageerada (CoC). Dukumeentigan muhiimka ah waa la cusboonaysiiyaa sannad kasta si uu uga tarjumo baahiyaha ardaydeena iyo deegaanka dugsiyadeena.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad akhrido Xeerka Anshaxa sannad kasta si aad u fahamto isbeddel kasta iyo wixii cusub, aad u hesho ilo waxtar leh, oo aad u hesho taageerada qoyskaagu u baahan karo.

Sannadkan, waxaa jira dhowr isbeddel oo muhiim ah oo ku yimid Xeerka Anshaxa. Marka hore, waxaanu ku darnay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Cadaalada Soo celinta. Waxaan diirada saareynaa dhaqamada soo celinta si aan uga caawino ardayda inay dhistaan xiriir adag oo dhexmara bulshada dugsiga iyo xalinta khilaafaadka. Cadaalada soo celinta waxay caawisaa abuurista dhaqan dugsi oo wanaagsan waxayna wax ka qabataa baahiyaha bulshada dugsiga markay soo ifbaxaan.

Waxaan sidoo kale ka dhignay xeerarka hab-dhaqanka kuwo fudud si ay qoysasku u fahmaan. Waanu dhegaysanay ra'yi-celintaada waxaanan rabnaa inaan hubinno in qof kasta oo bulshadeena ka mid ahi uu si fudud u fahmi karo Xeerka Anshaxa, Dabeecadda, iyo Taageerada.

Ugu dambayntii, waxaanu ku darnay tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan dhaqamada iyo xeerarka ay qoyska iyo xubnaha bulshadu u baahan yihiin inay raacaan marka ay booqanayaan dugsiyadeena. In aan ilaalino ardaydeena iyo shaqaalaheena waa mudnaantayada ugu sareysa!

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay taageero, Xafiiskayaga Adeegyada Taageerada Ardayga ayaa halkan u jooga inuu ku caawiyo. Waxaad ka wici kartaa (315) 435-4131. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Sarkaalkayaga Dhexdhexaadinta ombuds@scsd.us.

Waad ku mahadsan tahay inaad qayb muhiim ah ka tahay bulshadayada SCSD. Si wadajir ah, waxaan si adag uga shaqeyneynaa si aan u caawino ardaydeena inay guuleystaan!

Daacadnimo,

Anthony Q. Davis
Kormeeraha Guud

**Tamica Barnett**
***Madaxwaynaha***

**Gwendolyn Raeford**
***Gudoomiye ku Xigeenka***

**Twiggy Billue**

**Nyatwa Bullock**

**Karen Cordano**

**Mary Habib**

**Ranette Releford**

**OGAYSIISKA TAKOOR LA'AANTA**

Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse (Syracuse City School District) halkan waxay kula talinaysaa ardayda, waalidka, shaqaalaha iyo dadwaynaha guud ee ay ka go'antahay bixinta helitaan loo simanyahay dhammaan qaybaha shaqada, barnaamijka iyo fursadaha waxbarasho, ay ka mid tahay shaqada iyo fursadaha waxbarashada farsamada, iyaddoon loo eegin ta dhabta ah ama lagu kala saarin sinjiga, midab, asalka wadanka, tafiirta dadka ka soo jeeda Maraykanka,/isirka, caqiidada ama diinta, heerka guurka, sinjiga, qaabka galmo, da'da, aqoonsiga sinjiga ama weedha, naafanimada ama qayb kale oo sharci ahaan lagu dhowro hoosta sharciga federaaliga, gobol ama maxali.

Su'aalaha ku saabsan xeerarka takoor la'aanta degmadda waa in lagu hagaajiyaa:

Sarkaalka U hogaansanaanta Xuquuqda Madaniga ah
Syracuse City School District
725 Harrison Street • Syracuse, NY 13210
(315) 435-4131

Iimayl: CivilRightsCompliance@scsd.us




# TUSMADA QORAALADA


**Hordhaca** ... 2

Barashada waxa ku saabsan ***Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*** ... 5

**Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha Saamileeyda Dugsiga** ... 6

Ardeyda ... 6

Waalidiinta ... 8

Shaqaalaha iyo Madaxa Dugsiga ... 9

Maamulaha Degmada ... 9

Guddiga Waxbarashada ... 10

Soo-booqdayaasha Dugsiyada ... 10

**Helitaanka Caawimada Dhibaatada** ... 11

Xoog-sheegashada, Xoog-sheegashada-internetka,Baqdin-gelinta, Hadoodilida, & Dhaqanka Eexda ah ... 11

Xeerka Sharafta Dhammaan Ardayda ... 11

Shaqaalaha Ku-Taageeraya Ardayda Dhamaan Dhismayaasha Dugsiyada...13

Dhibaatooyinka Dugsiga ... 14

Dhibaatooyinka Shakhsi ahaaneed ... 14

Dhibaatooyinka Tacliimeed ... 14

Hawlaha Manhajka-ka-baxsan ... 14

Dhibaatooyinka Kooxda ... 14

Hanaanka Racfaanada ... 15

Hanaanka Cabashada loo Sameeyo ... 15

**Walaacyada Dhaqanka, Xad-gudubyada iyo Jawaabaha: Waxqabadyada iyo Isla-xisaabtanka** ... 16

Meesha iyo wakhtiga xeerku ku shaqaynayo ... 16

Xanaanada-Caruurta - Fasalka 2aad: Wax-ka-qabadka Walaacyada Dhaqanka ... 17

Fasallada 3-12: Walaacyada Dhaqanka, Xad-gudubyada iyo Jawaabaha ... 18

**Heerarka Waxqabadyada iyo Isla-Xisaabtanka Suurtogalka ah** ... 20

**Xadgudubyada Dhaqanka iyo Heerarka ka Jawaabista** ... 22

Muuqaalka Cadaalad Soo Celinta ... 31

Xarunta Taageerada Ardayga ... 32

Kooxda Waxqabadka Ardayga ... 32

**Xeerarka** ... 33

Edaabta Ardayda Naafada ah ... 35

Qodobada Ka-saarida iyo Ka-burinta ... 39

**Hakinta** ... 41

Jadwalka Habraacyada Hakinta ... 43

Barnaamijyada Badelka ah ... 44

**Khaamuuska Ereyada** ... 48

# HORDHAC



## Waa maxay sababta aan u leenahay *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada?*

Hadafka *Xeerka Dhaqanka, Dabeecadda iyo Taageerada* ee Syracuse waa in la xaqiijiyo xaqa ay dhammaan ardaydu u leeyihiin inay in waxbarashada ku helaan bay'ad ammaan ah, madani ah, oo daryeelan. **Waxay ku salaysan tahay sharciyadda, qawaaniinta, iyo xeerarka abuura helitaan waxbarasho ee dhammaan iyada oo la ilaalinayo xuquuqda nidaamka cadaaladeed ee shakhsiga.** Xeerku waxa uu aqoonsan yahay in dugsiyadu ay yihiin goobo dadwayne oo ay waajib tahay in ay isku dheelitiraato xuquuqaha shaqsiga iyo waajibaadka madaniga ah iyo mas'uuliyadaha suuro galka ka dhigaya in lagu noolaado bulsho xor ah, furfuran oo dimuqraadi ah. *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* ee Syracuse waxay u adeegtaa sidii hagaha muwaadinka wanaagsan oo waxa uu bixiyaa agabka lagu caawinayo ardayda inay fahmaan oo ay qadariyaan caadooyinka habdhaqanka ee dhaqanka dugsiga dhexdiisa.

Xeerku waxa uu hubinayaa in dugsiyadu ay si siman u helaan taageerooyin iyo faragelin balaadhan oo kala duwan kuwaas oo kor u qaadaya dhaqanka suuban, ka caawiya ardayda horumarinta is-edbinta iyo waxtarka bulsho iyo shucuureed, oo u suurtageliya ardayda in ay horumariyaan oo ay saxaan dhaqamada aan wax ku biirin jawiga soo dhawaynta dugsiga .

***Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*** **iyo reerarka iyo qawaaniinta ay tixraacayaan waxay khuseeyaan dhammaan ardayda wakhti kasta ee dhammaan hantida Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse, oo ay ku jiraan dhismayaasha dugsiga iyo banaanka dugsiga; dhammaan gawaadhida dugsiga; iyo dhammaan dugsiga, waxa dugsiga la xidhiidha, ama hawlaha ay degmadu kafaalo qaado, ay ka mid yihiin, laakiin aanay ku xadidnayn, safarada dibadda ee dugsiga iyo munaasabadaha ciyaaraha dugsiga, haddii hawlaha noocan oo kale lagu qabto hantida dugsiga ama goobo ka baxsan hantida dugsiga, oo ay ku jiraan ganacsiyada gaarka loo leeyahay ama goobaha ganacsiga.**

## Waxyaabaha laga aaminsan yahay Caruurta, Waxbarashada, iyo Edebta

Waxyaabaha soo socda ee laga aaminsan yahay carruurta, waxbarashada, iyo anshaxa lagu sheegay dhammaan xeerka hadafyada iyo fulinta. Dhamaan caruurta iyo dadka yaryar waa in la hubiyaa in ay wax ku bartaan bay'ad aan dhib ka jirin loolana dhaqmaa si siman, joogto ah ahna xaalad aan takoor lahayn.

1. Dhammaan carruurta iyo dadka yaryar waxay awood u leeyihiin guul gaadhida waxa ay rabaan shakhsiyan ee u wanaagsan, iyo marka ay lama huraanka tahay, horumarinta dhaqanka hagitaanka eh, taageerada waxbarashada, iyo tababarida. Falgalladani waxay noqonayaan kuwo sii socda kana jawaabaya dhammaan awoodaha carruurta.
2. Ardaydu waxay u baahan yihiin noocyo iyo waqtiyo kala duwan, fiiro gaar ah, hawlo, iyo taageerooyin si ay u daboolaan filashooyinka akhlaaqda, ugu guulaystaan tacliin ahaan, oo ay u gaadhaan heerar sare.
3. Isticmaalida eryidda dugsiga bannaankiisa ee saamaynta dhaqanka ma hagaajinayso jawiga dugsiga ama natiijadda ardeyda. Ardaydu waxay u badan tahay inay guulaystaan markay...
    - fahmayaan dhaqanada wanaagsan ee laga filayo iyaga
    - dareemayaan in xubnaha shaqaaluhu daryeelayaan iyaga kana caawinayaan barashadooda iyo korriinkooda
    - dhammaan shaqaalaha dugsigu waxay iskumid u isticmaalaan wadaagidda luuqad iyo dhaqan galin
    - dhammaan shaqaaluhu waxay bixiyaan rasmiyayn iyo jawaab celin dhinaca dabeecadda sida ugu habboon, iyagoo samaynaya dadaadlkooda ugu fiican, dhammaystirayana shaqo tayo sare leh

4. Asalka ereyga edebta waa “wax barida.” Edebta wax ku oolka ah waxay ka caawisaa ardayda inay horumariyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan oo ay gacan uga geystaan badbaadada iyo dhaqanka dugsiga ee soo dhawaynta leh. Dib u habaynta dhaqan galintu waxay keenaysaa istaraatiijiyadaha iyo faro-gallinada si ardeyda loo awoodsiiyo inay sameeyaan shakhsi sixid, xallinta dhibaato, sameeyaan dhayidda waxyeello, bartaan dhaqanada cusub, ayna dib u hagaajiyaan joogitaankooda fiican.

## Mabaadi’da Hagidda ee *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*

Mabaadi’da soo socda waxay muujinayaan aasaaska si loo abuuro ammaan, caafimaad qab, iyo deegaano wax lagu barto oo taageerid leh. Mabaadi’yadani waxay hagi doonaan saaxiibadda jaaliyadda, ardayda iyo qoysaska, shaqaalaha degmada dugsiga magaalada Syracuse shaqada ay wadaagayaan ee ah hubinta bai’ado fiican ee dugsiga iyo natiijooyinka ardeyga ee soo roonaanayo.

### Xeerku wuxuu ku salaysan yahay mabaadi’dan muhiimka ah:

1. Dadka waaweyn – macalimiinta, Madaxda-Dugsiyada, Maamulayaasha, shaqaalaha dugsiga, waalidiinta iyo bulsho weynta waxa ku waajib ah inay caawiyaan ardayda horumarinta xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan muwaadiniin firfircoon oo horumarsan iyagoo:
    - U suurtagelinayo inay fahmaan oo ay ka soo baxaan waxyaabaha laga filayo.
    - Ku Korinaayo rabitaanka ah inay wax ku biiriyaan bulshadooda.
    - Ku dhiirigelinaayo inay qaataan mas’uuliyadda oo ay fahmaan saameynta hadalladooda iyo ficilladooda.
    - Qaabaynahayo jawaabaha togan, falalka, iyo luqadda laga filayo dhammaan xubnaha bulshada dugsiga.
2. **Edebta ardayga iyo xeerarka taageerada iyo dhaqamada waa in loo fuliyaa siyaalo IXTIRAAM LEH. Xidhiidhada ka dhexeeya degmada iyo shaqaalaha dugsiga, ardeyda, iyo waalidiinta ayaa laga filayaa inay ilaaliyaan sharafta qof kasta, hubiyaanna hab-dhaqanka wanaagsan.**
3. Hagaajinta natiijooyinka waxbarasho ee dhammaan ardeyda u baahan in dugsiyadu bixiyaan taageero saddex heer ah daryeelidda iyo tilmaamidda gabi ahaanba dugsiga. Habka waxbarashada SCSD iyo taageeridda dhaqanku ujeedaddoodu waxay tahay in ardeyda loo muujiyo gaabab ay ku bartaan waxbarasho iyo waxyaabaha keena dhaqan xumada. Istaraatiijiyadaha xakamaynta iyo farogalinta waxaa ku jira shaqsi wax tilmaamid badan oo dhanka waxabarashada ah iyo taageero, addeega taageeradda ardeyga, iyo barnaamijyo muujinaya marxaladaha shaqsiga iyo qoyska, barashada bulshada, sida xallinta khilaafaadka, dhex dhexaadinta, maareynta cadhada, dhisidda xirafdda xidhiidhka, istaraatiijiyadaha dhaqan badallida, iyo kuwo kale oo ah dib uhagaajinta faro-galinta ay kamidka tahay wareega anshaxa iyo shirarka koox qoys.
4. Heerarka Walaacyada dhaqanka, Xad-gudubyada iyo Jawaabaha: Waxqabadyada iyo Iska-xisaabtanka
    - **Heerka 1: HORUMARINTA IYO XIRFAD DHISIDDA:** Shaqaalaha dugsigu waxay kobciyaan wanaagga bulsho iyo shucuureed ee dhammaan ardayda iyaga oo u marayo dadaallada dugsiga oo dhan si ay wax u baraan, ugu celceliyaan, aqoonsadaan oo ay u qiimeeyaan dabeecadaha togan iyo horumarinta bulshada iyo jawiga barashada.




**Marka la taageero ardeya, ardeydu waxay si nool uga qayb qaadanayaan dib u hagaajinta faragalinta muujinaysa arrimo cad iyo dabeecaddo ogolaanaya cawaaqib. Wax ka qabadka waa qayb habka ah halkaas oo ardaygu shaqada qabto si uu u toosiyo naftiisa ama teeda, u hagaajiyo meeqaamkiisa wanaagsan ama keeda, wax u wanaajiyo, wax u barto oo ku celceliyo dhaqan ka duwan, u hagaajiyo waxyeelada, ama uu u saxo.**

**KA-HORTAGGA:** Shaqaalaha dugsigu waxay diyaar u yihiin inay ka hortagaan, yareeyaan, oo ay dimaan inta badan dhibaatooyinka edbinta faragelinta hore marka ardaydu la kulmaan caqabado dabeecadeed oo joogto ah.

- **Heerka 2: WAXQABADYADA:** Dugsiyadu waxay bixinayaan daryeel la kormeeray iyo farogalin ku beeggan, baahiyaha ardeyga ee bulshonimada, dareenka, iyo caafimaadka maskaxda oo ah taageero diyaarsan oo lagu xalinaayo asalka dhibaatada keenaysa in ardaygu lahaan waayo xirfada ama cilada xirfada si loo aqoonsado, loo maareeyo loona xaliyo xaaladaha bulshada qaab amaan ah, oo ku haboon da’da. Garo gelinnada ayaa badanaa lala socdaa hormarka laga sameeyo ayadoo isbadello lagu samaynaayo mudada ama xawaaraha taageerada.
- **Heerarka 3 iyo 4: WAXQABADYADA:** Faro galin habboon ayaa lagu samaynayaa marka ardeydu ku sugan yihiin khatarta ugu sarreysa.



5. Taageerada iyo edebta ardaydu waxay leedahay wajiyo badan. Taageerida horumarinta ardaydeena iyo abuurista bulsho dugsi oo caafimaad qabta waxaa ka mid ah in la helo **HABAB DIB U SOO CELINEED**. Muuqaalka dib u soo celinta ayaa jawaab u noqon doona isku dhacyada gudaha iyo dibadda: facooda dhexdooda, inta u dhaxaysa shaqaalaha iyo ardayda, iyo ardayda laftooda. Marka ay dhacaan dabeecado keenaya anshax, hadafka soo celinta soo celinta ayaa ah in la kobciyo horumarinta fikirka iyo dareenka si loo caawiyo ardayga barashada dhacdada. Muuqaalka muuqaalka dib-u-soo-celinta ardaydu waxay ka milicsan karaan saamaynta hab-dhaqankoodu ku leeyahay naftooda, kuwa kale iyo bulshada dugsiga. La xisaabtanka macne leh waxa uu salka ku hayaa wacyiga cusub ee la helay ee saamaynta xubin kasta oo ka mid ah bulshada dugsigu ku leeyahay kan kale.

6. Anshaxa ardayga iyo hannaanada taageerada iyo dhaqamada waa in loo fuliyaa siyaabo **CADAALAD AH, LOO SIMAN YAHAY, OO LAGU KALA DUWANAAN KARO**. Ardaydu waxay u baahan yihiin muddooyin wakhti kala duwan, feejignaan, shaqooyin, iyo taageero inay u dhaqmaan xilkasnimo soona hooyaan heerar sare. Jawaab bixinta kala duwan waa inay noqotaa mid ku salaysan caadi, iyo sinnaan dhaqan galin oo dhammaan ardayda loola dhaqmay si caadi ah ayna lahayna wax liddi ku ah mid kamid ah ardeyda heerkooda, da'dooda, jinsiyadooda, horumarkooda iyo naafaddooda, sinji ama qabiil, xaalada dhaqaale ee bulsho, diin ahaan ama wacyigalinta ruuxiga ah, asalka qaran iyo afka hooyo, wacyigelinta galmada ah, iyo dhaqamadooda.

7. Anshaxa iyo hadafyadda taageero iyo dhaqangalinta ardeygu waa in loo fuliyaa wadiiqooyin **KU DHIIRI GELIN KARA IYO LA FALGELID LEH.**Degmadu waxay ku dadaali doontaa sharciyada, siyaasadaha, faragelinta iyo la xisaabtanka kuwaas oo la fulin karo, la fulin karo, oo waxtar leh. Si kale haddii loo dhigo, degmadu waxay niyad jabisaa xeerarka dugsiga ee aad u adag in si joogto ah loo fuliyo; xeerar aan dhalin doonin heshiis lagu dhaqangeliyo; siyaasadaha iyo cabbiraadaha isla xisaabtanka ee u baahan waqti ka badan maamul iyo shaqaale oo ka badan intii suurtagal ah si loo dhaqan geliyo loona habeeyo; iyo siyaasadaha iyo cabbiraadaha isla xisaabtanka ee muujiyay waxtarka yar.

8. Xeerku waxa uu taageeraa **HEERARKA JAWAABAHA** (eeg boggaga 20-21) marka laga hadlayo dabeecadaha aan habboonayn, aan la aqbali karin, iyo kuwa xirfadda leh iyada oo ujeeddada ugu dambaysa ee ah in la baro dabeecadaha togan iyo xoojinta waxtarka shakhsi ahaaneed ee ardayda, bulsho, iyo tacliin. Anshaxa ardey iyo habka taageeradda ardey oo ku salaysan heer hannaanka badallida dhaqanada. Ahmiyaddu waa in la xakameeyo dabeecadda aan la aqbali Karin iyadoo la caawinayo ardeyda si ay:

- wax ugu qaataan khaladaadkooda
- u fahmaan sababta dhaqanku u tahay mid aan la aqbali karin
- ogsoonoodaan waxyeelladda ay iyagu sababeen ama ficilladooda xun
- fahmaan waxa ay iyagu si kale duwan u sameeyaan gudaha xaaladda
- qaadaan masuuliyadda ficilladooda
- la siiyo fursad ay ku bartaan istaraatiijiyadaha bulshanimo iyo xirfaddaha ay isticmaalayaan mustaqbalka
- Fahmo in isla xisaabtan iyo faragelin dheeraad ah ay dhici doonto haddii dhaqamada aan la aqbali karin ay sii jiraan

9. Dadaal kasta oo macquul ah ayaa loo samayn si loo saxo dhaqanka xun ee ardeyga iyadoo loo marayo tilmaamo faragalin ah taas

oo dib u hagaajin ah. Faragalintu waxay aasaas u tahay marka dhaqan aan habboonayn ama xadgudubyada xeerka ay yihiin dhibaatooyin aad halis ugu ah ardeyda marxaladdooda. Sidaas darted waxaa muhiim ah in shakhsiyadda dugsigu ay halis u tahay arrimaha la falgallaya dabeecadda ardeyda iyo jawaab bixinta ah in aad looga taageero baahiyahooda. Jawaabaha anshaxa habboon waa xakamayn iyo la falgalid faraglin, xakamaynta in ardeydu isku dhex daadato dhinaca waxbarasho, iyo horumarinta dhaqanka wanaagsan ee dugsiga.

10. **Dugsiyada wax ku oolka ahi waxay horumariyaan oo qaabeeyaan ixtiraam la is dhaafsado, Xirfad yaqaano tayo sare leh, iyo la xisaabtan aan waxba qarsoonayn oo ku salaysan aaminaada u dhaxaysa maamulka, shaqaalaha ardayda iyo qooysaska.**
11. Dhaqanka degaanka oo ku salaysan rajooyin sare, ixtiraam, iyo isla xisaabtan. Xudunta dhaqanka caafimaad qaba ee dugsigu waa in dhammaan shaqaaluhu ka qayb qaataan masuuliyadda horumarinta caafimaad qabka ardeyda iyo xirfadaha casriyaysan, dhaqanada, iyo maskax furnaanshaha in ay simaan carruurta iyo dadka da'da yar. Middan dhammaadkeeda, shaqaalaha dugsiga, macallimiinta iyo maamulayaasha ayaaa lagu boorrinayaa inay siiyaan ardeyda himilooyin sare oo guul u ah ardeyga, dhisidda xidhiidh wanaagsan ee ardeyga iyo barida iyo hannaanka ardeyda in ay ku guulaystaan dhammaan goobaha dugsiga (fasallada, maqaaxidda, wadooyinka hoolka, qolalka qubaysa).

## Sidee Ayay Dadku u Bartaan *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada ee Syracuse*?

Si waafaqsan Sharciga Waxbarashadda §2801(4) iyo 8 NYCRR §100.2(I)(2)(iii)(b), Degmadu waxay xaqiijin doontaa in bulshadu ka warqabto *Xeerkan Dhaqanka, Dabeecadda iyo Taageerada* iyadoo:

1. Bixinta maqalka dadweynaha ee uu guddigu ansixinayo.
2. Bixinta koobiyo xogta xeerka dhammaan ardeydu leedaahy, si da'ahaan ugu habaysan, luuqad saafi ahna ku dhigan, oo lagu soo gudbin doono shirka guud ee la qabto bilawga sanad dugsiyadeedka.
3. Koobiyada xeerka ee loogu talo galay dhammaan waalidiinta waxay diyaar yihiin bilawga sanad dugsiyadeedka.
4. U gudbinta macluumaadka teeramka loo gudbiyo waalidka.
5. Bixinta in kooban oo *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* loogu qoray luqad fudud dhammaan waalidka ardayda Degmadda ka hor bilowga sanad dugsiyeedka iyos amaynta tan kooban in ka dib lagu heli karo codsi.
6. In dhammaan macallimiinta iyo xubnaha shaqaalaha kale la siiyo koobi ah xeerka iyo koobi ah wixii badalaad ah ee lagu sameeyay xeerka kaddib marka uu dhaqan galo.
7. Siinaya dhammaan shaqaalaha nuqul hadda ah *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* marka ugu horaysa ee la shaqaaleeyo.
8. Waxaa la diyaar garaynayaa koobiyo xeerka ah si ay dib ugu eegaan ardeyda, waalidiinta iyo xubnaha kale ee kamidka ah jaaliyadda iyo fidinta fursado ay dib ugu eegaan kuna falanqeeyaan habboonaan shaqsinimo.
9. EHubinta in dugsi kastaa hirgeliyo qorshe sanadeed wada hadal ah oo la macaamila *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* muddada hanuunita sanad dugsiyeedka cusub iyo dhexda gudbinta ugu yaraan saddex casharada fasalka ah ee la xidhiidha Xeerka muddada labbada wiig ee u horeeya sanad dugsiyeed kasta. Dagmadu waxay soo gudbin doontaa qalab loo isticmaalo hawlahan.

**Ogsoonoow:** Degmaddu waxay samayn doonta dedaal kasta si ay u bixiso mid qoran iyo qaabab maqal ah oo kan *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada,* luqaddaha badan.

***Dhammaan degmooyinka iyo xubnaha shaqaalaha dugsiga iyo xubnaha guddiga waxbarashada waa inay saxiixaan risiit caddaynaya inay qabteen xeerka anshaxa, dabeecadda iyo taageeradda qabtaana shirar bilawga sanad dugsiyadeedka.***

***Koobi ah ogeysiinta dib u eegista xeerka wuxuu ku qoran yaahy badhtamaha buuggan yar. Fadlan la bax, saxiix kadibna ku celi dugsiga ilmahaaga.***



# XUQUUQAHA IYO MASUULIYADAHA SAAMILEEYDA DUGSIGA

## Xuquuqaha Ardayga

### Ardeydu waxay xaq u leeyihiin

1. Inay galaan dugsiga ku dhexyaala degmada uu waalidkooda sharciga ah daggan yahay ayna helaan waxbarasho habboon ooo xor ah laga billaabo da'da 5 jir illaa 21 jir, sida uu dhigayo sharcigu.
2. In la awood mid wanaagsan, oo waxbarasho tayo leh ah oo laha bixiyo Dugsiga barbaarinta ilaa fasalka 12 deegaan dugsi badbaado ah, habaysan oo horumariya waxbarashada.
3. In la ixtiraamo shaqsi kasta la dhaqankiisa iyo sharaftiisa ardeyda iyo shaqaalaha dugsiga.




4. In qof aksta sharraxo fikraddihiisa ama qoro ama laga caawiyo.
5. In la muujiyo in wadiiqada sidan ah lagu sharraxo shaqsiyadda qof illaa inta ayna isku dhexdaadinaynin deegaanka barashada. (Bogga 33)
6. In laga wada qayb qaato hawlaha dugsiga iyadoo loo siman yahay sinji ahaan, midab ahaan, shaqo ahaan, diin ahaan, jinsi ahaan, wacyi galinta galmada, lab iyo dhaddig siman, asalka qaran, qabiil kooxeed, siyaasad ahaan, da'ahaan, guur ahaan, ama naafo ahaanba.
7. In la helo macluumaad khuseeya daroogada iyo aalkoola, iyo in la helo shakhsiyaadka ama wakaaladaha tooska uga caawinaya ardeyda dhibaatooyin xasaasi ku shaqsinimada.
8. **In laga ilaaliyo handadaad, handadaad, ama takoorid ku salaysan isir dhab ah ama la dareemayo, midabka, caqiidada, diinta, dhaqamada diinta, jinsiga, nooca galmoodka, jinsiga/ aqoonsiga lab iyo dhedig/muujinta lab iyo dhedig, asal qaran, koox qowmiyadeed, siyaasad, da, xaalada guurka, ama naafanimada, ama fasal kasta oo kale oo si sharci ah loo ilaaliyo, hantida dugsiga ama dhacdo dugsigu kafaalo qaado, hawl ama waxqabad. Sharafta ardeyda oo dhan ficilladooda waxaa ka reeban ficillada xaraasidda ah, takooridda ay sameynayaan shaqaaluhu ama ardeydu dugsiga dhexdiisa ama shaqo dugsiga lagu qabanayo, oo ay ku jirto, laakiin kuma koobna, dhaqanka sidan ah eek u salaysan midabka, miisaanka, asalka qaranimo, qabiil, diin, isticmaalka diinta, naafanimada, wacyi galinta galmada, jinsiga (ee la qeexay oo ay kamid atahay kala soocida labka iyo dhaddiga), ama jinsiga (sharciga waxbarashada 12[1]).**

> **Ficillada qalafsan waxaa loo qeexay inay lamid tahay xarraasida ama ficilka qalafsan kaasi oo noqon kara nooc kasta xidhiidhka korontada ah. (Sharciga Waxbarashada11[8]).**

9. In ay awoodaan habka cadaalada ah ee:
   - iyadoo lagu fidiyay xeerka iyo nidaamyada iyo xeerarka dagmada dugsiga, dugsiyadu waxay hubin doonaan in dhammaan ardeyda iyo shaqaalaha dugsiga ay yihiin ku ogsoon iyo kuwo helay macluumaadka qayaxan ee ku saabsan xeerarka, hadafyada, iyo wadiiqooyinka la maro ee dugsiga iyo sharciyada deegaanka iyo ka gobalka ee damaanad qaadaya ama hirgalinaya xuquuqda ardeyda ee ka qabqaadashada;
   - iyadoo la xusay waxa ay tahay dabeecadda habboon iyo waxa dhaqanadu keeni karaan ficillada anshaxa dhexdeedo;
   - iyadoo laga talo bixiyay lagana garsooray oo ay sameeyeen xubanaha shaqaalaha u tababaran arrimaha la xidhiidha dabeecadahooda sida ay ula falgasho waxabrashada iyo ku fiicnaanta dugsiga dhexdiisa;
   - iyadoo la bixiyay fursad lagu dhagaysto fallalka anshax ee keena xadgudubyada xeerka oo iyaga markaas ay noqonayaan kuwo la eryo ama fasalka ay ka saaraan macallimintoodu;
   - iyadoo la xusay wadiiqo loomarayo dacwadd geynta ficilada iyo go'aamada saraakiisha dugsiga oo leh ixtiraam xuquuqahooda iyo masuuliyadooda sida loogu dhigay dukumintigan;
   - iyadoo uu waalid soo dhaweeyay iyo/ama wakiil marka shirarka iyo dhagaysiga;
   - iyadoo waalid soo dhaweeyay xaaladaha uu booliisku soo faragalinayo haddii ardeygu ka yar yahay 16 jir. Ardey kasta oo ka yar 16 jir waxaa wax waydiiya booliiska xaqna way u leeyihiin iney helaan waalidkooda goob joog noqdo;
   - iyadoo la haysto shaqaalaha taageerada ardeyga ama wacyi galin joogta ah xaaladaha ay tahay in booliis faragalin sameeyo;
   - in si buuxda looga warqabo cawaaqibyada anshaxa ee la qaadaayo, nooca talaabada, xadiga/mudada cayrinta marka la amro.
10. In la boorriyo fursadaha dhallinyarada awoodsiinaya in:
    - ay noqdaan kuwo bartayaal ah mudadda waxbarashada lagu jiro taas oo qaadanaysa fikradaha ardeygu qabo, baraysa ardeyda hoggaaminta iyo xirfadaha ka qayb qaadashada, iyo u gudbinaysa sharraxaado ardeyda marka go'aanadu kaga baahaan fikradahooda;
    - shaqada golaha ardeyda, xubnaha la talinta, iyo kooxaha dugsiga iyo guddiyada sameeya go'aanada ku saabsan nolosha dugsiga, oo leh taageerooyin muhiim u ah inay ka qayb qaataan;
    - ka qayb qaadashada golayaasha dugsiga ay ardeydu isku dhaafsan karaan codadka fikradahooda ku saabsan go'aanada dugsiga iyo hadafyada;
    - ka qayb qaadahsada hoggaminta fiican iyo dib u haggaajinta dhaqannada;
    - diyaarinta kooxo wakiiil uga ah baahiyahooda iyo danahooda.

# Masuuliyadaha ardayda iyo Dhaqanada la Filayo.

## DHAQANKA SHAKHSIGA & DABEECADA

- U xaadirka dugsiga si caadi ah wakhti buure ah.
- U aqbalaya tilmaanta, codsiyada, faalo celinta, iyo taageerada si ixtiraam leh ee ka timid dadka waa wayn.
- Muujinaya edaab shakhsiyeed iyaddo la samaynayo dhaqan masuulnimo leh iyo doorashooyin tacliimeed.
- Ku ka sheeg oo ku xisaabtama kelmadaahaaga iyo falalkaaga.
- Raacaya sharciyada dugsiga iyo heerarka kullamada ee dhaqanka ee kujira *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*.
- Aqbalaadda tillaabooyinka la xisaabtanka marka la fulin waayo filashada dabeecadda ama xeerarka dugsiga lagu xadgudbo.
- Samaynta dedaalka lagu saxo oo lagu horumariyo dhaqanka iyaddoo la marayo wax ka qabadka dib u hagaajinta.
- U lebiska si habboon.

## LA SHAQAYNTA KUWA KALE IYO ULA DHAQANAKA KUWA KELE SI TIXGELIN LEH

- Ula dhaqanka kuwa kale si ay doonayaan in loola dhaqmo.
- U caddaynta fikradahaaga iyo aragtiyahaaga hab edaab leh, tixgelin leh, oo anshax leh.
- Isticmaalka cod laga fiirsaday iyo luqadda jidhka oo habboon.
- Dhegaysiga marka kuwa kale ay kula hadlayaan adiga.
- Tixgelinta meesha shakhsiyeed ee kuwa kale iyo ku haynta gacmahaaga naftaada.
- La shaqaynta kuwa kale si wada shaqayn u leh kooxo badan iyo kuwo yarba.
- U falka naxariis, daryeel, iyo xasaasi ahaan kuwa kale.

## BARASHADDA

- Dhammaystirka shaqo aad u tayo fiican maado kasta.
- U diyaar ahaanta in wax la barto.
- Miisaamidda naftaada iyo inaad samayso dadaalkaaga ugu fiican.
- Muujinta anshax shaqo oo xoog leh.
- Keenida maskax furan iyo mowqif suuban barshada maalin kasta.
- Raadinta caawimo iyo kaalmo marka loo baahdo.

## HANTIDA KUWA KALE

- Daryeelka hantida ardayda kale leedahay, dadka waa wayn, ama dugsigu.
- U isticmaalka agabka dugsiga ama dadka kale si feejigan ujeedo loogu talo galay.
- Codsashada adeegsiga hantida dadka kale.

## BULSHADDA DUGSI BADBAADO AH

- Caawinta in jaaliyadda dugsiga laga dhigo mid ka madax bannaan xadgudub, xarraasid iyo takoorid.
- Codsashada caawimaadka marka aad u baahato caawimada xalinta khilaafaadka iyo faraqyada.
- Ka qayb galka badbaadada iyo fayo qabka bulshadayada.
- U Isticmaalka dhammaan qalabka dugsiga iyo basadka hab badbaado leh.
- Soo hormarinta badbaada qof kasta:
  - INAAN la boorrinin xadgudub ama ficil qalafsan kaas oo waxyeelayn kara kuw akale iyo jaaliyadda.
  - INAAN la samaynin dhaqanno ku saabsan isticmaalidda halbeegyada khatarta ah ama ku saabsan waxyeelaynta kuwa kale.

## Waalidiinta/Masuulada/Daryeelayaasha

Erayga "waalid" waa waalidka ardeyda, ilaaliyaha, ama daryeelaha (waana qof kasta oo ah waalidka ama xidhiidh laleh ardeyga) ama ardeygu, haddii isagu/iyadu uu yahay/tahay mid aan waxba kala garanaynin ama da'diisu tahay 18 sano jir.

Waalidiinta, ilaaliyayaasha iyo daryeelayaasha waxay xaq u leeyihiin inay si muuqata iyo falgalid ah uga qaby qaataan barashada sharaxaadna ka dhiibtaan aragtiyaha ay qabaan, iyo inay soo gudbiyaan go'aano la falgalaya nolosha iyo waxbarashada carruurtooda. Waalidiinta, ilaaliyayaasha iyo daryeelayaasha waxay lama huraan u yihiin guusha dugsiga. Waxay masuuliyad u leeyihiin inay ku khasbaan inay bartaan marka ay joogaan guriga, kuboorriyaan iyo casri dhex dhexaad ah, dabeecad dadnimo, inay ku dhiiri galiyaan carruurtooda inay noqdaan kuwo daneeya dugsiga joogitaankiisa, iyo inay arkaan in carruurtoodu ay si joogta ah u dhigtaan dugsiga. Waa in ay fishaan heerka ugu sareeya ee guul gaadhida ee carruurtoodu ay awoodo, siiba bandhiga macalinka caawin kara carruurtoodu in ay gaadho heerka guul gaadhida. Waxaa lagu soo dhaweynayaa laguna boorrinayaa inay la hadlaan lana kulmaan macallimiinta si u helaan sida carruurtoodu wax u baranayso. Inta badan ee waalidka ka qayb qaato, inta ay tayo sare marto waxbarashada carruurtooda.

**Ardeyda, waalidiinta iyo maamulaha dugsiga dhammaan waxay leeyihiin door ay ugu sameeyaan amni dugsiga iyo wada shaqayn khasab ah inay ka wada shaqeeyaan soo hoynta ahmiyaddan. Waalidiintu waa inay filaan in shaqaalaha dugsigu u sheegi doonaan dabeecadaha ilmahooda kuna darayaan waalidka liiska saaxiibadda marka la muujinayo meelaha ay khusayso. Wacyigelinta waalidiinta way jiri kartaa, laakiin kuma koobna oo kaliya telefoon wicid iyo qoraal lagula xidhiidho. Sidii kuwa lagu daydo, waalidku waa in ay muujiyaan dhaqano ay jeclaan lahaayeen in ay ku arkaan carruurtooda/ardayda.**

In Si loo hubiyo in ay waalidku ku firfircoonaadaan iyo oo la kaashadaayasha ka qayb qaataee horumarinaya deegaan badbaado iyo taageero leh oo dugsi, waa in ay ahaadaan kuwayaqaana *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*. Waalidiintu waxay filayaan in loo sheego sida ay tahay dabeecada ilmahooda iyo inay masuul ka yihiin xirafadaha ardeydu u baahan yihiin inay ku guulaystaan dugsiga iyo bulshada dhexdeedaba. Waalidiinta waxaa lagu booriyay inay wax la falanqeeyaan ilmahooda macallimiintooda iyo shaqaalaha kale ee dugsiga arrimaha waxyeeli kara dabeecadda ardeyga iyo istaraatiijiyadaha la falgalikara la shaqaynta ardeyga.

## Xuquudaha waalidka

### Waalidiinta iyo ilaaliyayaasha waxay xaq u leeyihiin:

1. Si firfircoon uga qayb qaataan waxbarashada carruurtooda.
2. Ula dhaqmaan si anshax leh, xaq ah oo ixtiraamleh dhammaan shaqaalaha dugsgu iyo maamulayaasha.
3. Helaan macmluumaad wakhti habboon oo ku saabsan xeerarka Guddida Waxbarashada Syracuse iyo hababka la xidhiidha waxbarashada carruurta.
4. Ka helaan warbixo caadi ah, qoran ama afka ah, shaqaalaha dugsiga oo ku saabsan horumarka tacliimeed ama dhaqan ee carruurtooda, ay ka mid tahay, laakiin aanay ku xadidnayn, kaadhadhka warbixinta iyo shirarka.
5. Ka heli macluumaad iyo wargelin degdeg ah oo ah dhaqanada aan habboonayn ee wax kharibka ah ee carruurtooda iyo wixii talaabo edaab ah ee uu qaado maamulaayasha ama shaqaalaha dugsigu.
6. Ka heli macluumaad iyo wargelin degdeg ah oo ku saabsan shilalka saamayn kara carruurtooda.
7. Ka hela macluumaad ku saabsan habka cadaalada ah ee hababka arrimaha edaabta khuseeya carruurtooda, ay ka mid yihiin macluumaadka ku saabsan shirarka iyo rafcaanada.
8. Inay macluumad ka helaan shaqaalaha dugsiga waxyaabaha lagu hagaajin karo waxbarashada carruurtooda ama dabeecaddooda, oo ay kamid tahay, laakiin kuma koobna: barnaamijyada tacliinta, adeegyada caafimaadka dhimirka ee Degmo Dugsiyeedka Magaalada Syracuse iyo bulshada.
9. Ka hela macluumaad ku saabsan adeegyada ardayda ee naafada ah iyo Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga ah.
10. Ka hela wargelin maamulaha, wakiilka maamulaha, iyo/ama macalimiinta ilmahooda dhacdada uu ilmahaagu ka qayb qaato mid aan habboonayn, la aqbali karin, oo dhaqan aan xirfad lahayn ah xaga dugsiga.
11. La xiriir sida ugu dhaqsaha badan marka arday la rumeysan yahay inuu dembi galay oo booliska loo yeero.
12. Codso shir la dhex dhexaadiyay oo waalidka ardaydu ku jiro kuwaas oo jidh ahaan waxyeeleeyay carruurtooda.
13. Codso shir la dhex dhexaadiyay oo shaqaalaha dugsigu ku jiro ama shakhsiyaad kale oo waxyeeleeyay carruurtooda.
14. Ka hela wada xidhiidhka turjubaanada la bixinayo.
15. Soo gudbi cabasho marka uu dhacay xad gudub ama si xun u dabaqa shuruud qoran oo xeerka dugsiga ah.

## Masuuliyaddaha waalidka

### Waalidiinta iyo ilaaliyayaasha waxay masuul ka yihiin:

1. Inay mar kasta siiyaan macluumaadka uu kala soo xidhiidhi karo xafiiska xarunta diiwaan galinta ee dagmada dugsiga magaalada syracue iyo carruurta dugsiga u gaarka ah.
2. Inay hubiyaan in carruurtoodu ay si joogto ah u dhigtaan dugsiga wakhtigiisa.
3. In dugsigu ogaado wakhtiga iyo sababta ay carruurtu u maqan yihiin.
4. Inay u sheegaan saraakiisha dugsiga waxkasta oo khuseeya ama cambaarayn ah dhanka xushmada wakhtiga.
5. Inay la shaqeeyaan horjoogayaasha iyo shaqaalaha dugsiga in la muujiyo wixii dhibaato ku ah waxbrashada ama dabeecadaaga ciyaalkooda soo gaadhaya.
6. **Inay taageeraan dugsiga dagmada magaalada Syracuse iyagoo kala hadlaya carruurtooda waxyaabaha ku saabsan dugsiga iyo dabeecadda laga filayo.**
7. Akhri oo baro xeerarka Guddida Waxbarashada, shuruucda maamulka iyo Syracuse *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*.
8. Inay ku boorriyaan carruurtooda inay dhameeyan shaqooyinkooda guri iyagoo waydiinaya shaqada gurigu waxa ay ku saabsan tahay, hubinya shaqada guriga una samayanya goob carruurtoodu ay ku sameeyaan shaqadooda guri iyaddoon laga dhex galayn (tusaale: meel koone ah oo xasillan, meel sarriirta kamid ah; miis nadiif ah oo jikada kuu yaal.
9. Inay noqdaan kuwo xushmeeya shaqaalaha iyo waalidiinta kale iyo ardeyda marka lagu jiro dugsiga.
10. TInay baraan carruurtooda in dhammaan carruuruhu xaq u leeyihiin inay dhigtaan dugsiga iyo inay isula dhaqmaan si xushmad iyo sharaf leh oon ku xidhnayn midabkooda, culayskooda, qaranka ay kasoo jeedaan, qabiilkooda, diintooda, diinta ay isticmaalayaan, naafanimo, jinsi, taasi oo ah mid kalsooni siinaysa ilmaha horumarinaysana barashada sida uu dhigayo qodobka sharafta dhammaan ardeyda.

***Dugsiyadu waa in ay hubiyaan in waalidka ama masuuladu ay xaq u leeyihiin go'aan gaadhida saamaysa xeerarka dugsiga iyo hababka, ay ka mid yihiin, laakiin aanay ku xadidnayn:***

- In loo sheego waalidiinta wakhtiga cad goorta iyo sida ay iyagu u karaan inay uga qayb qaataan, iyo hubinta in dhammaan waalidiintu leeyihiin helitaan siman macluumaadka fursdaha ka qayb qaadashada.
- Helitaanka fursado la taaban karo si aad u soo jeediso talooyin ku saabsan hababka waxtarka leh ee ka qaybgalka.
- In la siiyo waalidiinta qaab dhismeed fursado ah oo waalidiintu ku soo gudbiyaan, helaan macluumaad iyo ay caawiyaan go'aan gaadhista.

***Dugsiyadu waxay hubin doonaan waalidinta inay leeyihiin xaq ay kaga qayb qaataan go'aanadda waxyeealaya waxbarashada shaqsiyadda ilmaha, ooy ku jirto, laakiin aan ku koobnayn:***

- Soo jeedinta macallimiinta, maamulayaasha iyo shaqaalaha kale ee "digniinta wakhtiga hore" hab caddeynaya waxbarashada ama marxaladaha dabeecadda sida ay suurto gal ku tahay iyo la shaqaynta waalidiinta inay caddeeyaan wixii xalin noqonaya.
- Ka qayb qaadashada xallinta iyo dib u hagaajinta anshaxa.
- Inay difaacaan xuquuqaha la xidhiidha anshaxa dugsiga.

Dagemada iyo dugsiyadu waxay abuuri doonaan hadafyo si cad u muujinaya sida waalidku u fayl garaynayaan canbaarayn, iyo wixii la samayn lahaa haddii canbaarayntii waalidka aan waxba laga qabanin.

Marka ardeygu yaallo waadh ama ku tiirsane dawladdeed, oo lagu caddeeyay maritaanka sharciga dawlad deegaanka ama fadaraalka, ogeysiinnada la xidhiidha waxbarashada ama anshaxa go'aamada uu gaadhay ardeyda dugsigoodu waxaa loo gudbinayaa qofkamudan xuquuqaha waxbarasho, loo muujinayaa waalidiinta, lataliyaha ardeyga, iyo shaqaalaha samafalka bulshada ilmaha ardeyga ah ama shaqaalaha kiiskooda iyo, haddii ardeygu leeyahay hal sarkaal oo isaga qaabilsan. Si kastaba ha ahaatee, Xujooyin la'aan ayaa ardeyda yaalla waadhka ama ku tiisran dawladda loogu diidi karaa inay helaan xuquuqahooda waxbarasho oo ay sabab u tahay daryeele qaan gaadh ah ama xuquuq hayaha aan awooddin ama in loo diido inuumatalo ilmaha.

## Maamulaha iyo Shaqaalaha Dugsiga Xuguuqahooda iyo Masuuliydahooda

**Shaqaalaha iyo horjoogayaasha dugsigu waxay xaq u leeyihiin:**

1. Inay helaan deegaan ay ku shaqeeyaan oo amni iyo kala danbayn leh.
2. In shaqaalaha kale dugsiga, ardeyda, waalidiinta ay ula dhaqmaan si haggaagsan, caadi ah iyo ixtiraamleh.
3. Ay kala socdaan waxyaabaha khuseeya, talo jeedinnaha iyo cambaaraynta xafiiska degmada dugsiga magaalada syracuse addeegyada taageeradda ardeyga.
4. Hellida horumarinta xirfad iyo tababar taageero leh.
5. Hellida waxyaabaha ay u baahan yihiin ee muhiimka u ah inay gudbiyaan tilmaamo tayo leh.
6. Habaynta tilmaamo wata hadafyada guddida waxbarashada iyo nidaamyada gobalka iyo fadaraalka.

**Maamulayaasha iyo shaqaalaha dugsiga waxa mas'uuliyad ka saaran inay:**

1. Joogtaynta dugsiyo habbaysan oo badbaado leh iyaddoo la isticmaalayo ka hortaga iyo farsamoyinka wax ka qabadka iyo iyaddoo la raacayo Syracuse *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada*.
2. Inay ixtraamaan oo ay edeb ula daqmaan ardeyda, waalidiinta, uguna adeegaan ardeyda door casri ah.
3. Inay ogsoonaadaan hadafyada guddida waxbarashada iyo xeerarka iyo nidaamyada maamulka, iyo inay ku khasbaan caadi ahaansho dhexdhexaad ah.
4. Inay ogsoonaadaan sharciyada iyo nidaamyada gobalka iyo fadaraalka eek u saabsan anshaxa ardeyda naafadda ah.
5. Inay soo gudbiyaan hadafyada, himilooyinka iyo danaha, iyo inay ka jawaabaan cabashada ama waxyabaaha kala khuseeya ardeyda iyo waaliddinta wakhtiga ku habboon luuqad la fahmi karo.
6. Inay u gudbiyaan ardeyda guddida, waaxaha, xafiisyada, qaybaha, wakaaladaha ama ururada marka taageero dibada ah ay noqoto muhiim.
7. Inay ku wargeliyaan waalidiinta hannaan socodka dabeecadda iyo waxbarashada ardeyga, ay abuuraan fursado macno u leh ka qaybqaadashadooda, ayna u fidiyaan wada xidhiidh joogto ah luuqad ay iyagu fahmayaan.
8. Inay u fidiyaan ardeyda waxbarasho iyo shaqo kale ka maqnaanshahooda sharciga ah, oo ay ku jiraan ardeyda u maqnaa sababo anshax awgeed.
9. Inay kala qayb qaataan fursadaha horumarinta xirfadda.
10. Inay hagaajiyaan kuna boorriyaan jawi dhexe oo ixtiraam iyo sharaf leh dhammaan ardeyda oo aan salna ku lahayn, midab, culays, asalka qaranimo, qabiil, diin, isticmaalida diin, naafanimo, wacyigalinta galmada, lab iyo dhaddig, jinsiga, oo ay ku dheehan tahay fahmid habboon, luuqadda, iyo dabeecadda gudaha dugsiga, taasi oo ardeyda tusinaysa shaqsinimadooda iyo horumarinta kalsooni ay wax kubartaan.
11. Ayna ogolaanin arrimaha takooridda iyo xarraasida ah gudaha xaalad kasta oo lagu dhaqmayo ama xafiiska muuqaalka ama amniga ardeyda, shaqaalaha dugsiga ama qof kasta oo sharci ahaan kamid ah dugsiga ama dugsiga shaqo ka haya iyo soo gudbinta falalka takoorka ah iyo xarraasida laga markhaati furay ama la horkeenay macalinka, qunsulka dugsiga, maamulaha adeegga taageerada ardeyga, ama shaqaale kale, loona gudbiyo maamulaha leh shaqada tallaabo ka qaadista, wakhti ku habboon.
12. Muujinta arrimaha shaqsinimo ee xakamayn kara ula dhaqmida si siman dhammaan ardeyda dugsiga dhexdiisa ama fasallada dhexdooda.
13. Maamulayaasha: Inay la socdaan wixii falal takoorid iyo xarraasid ah ee marag leh ama la horkeenay horjoogaha wakhti ku habboon iyagoo kala shaqaynaya maamulaha isagu ah kormeeraha shaqada heeganta.
14. Ururi oo ka warbixi xogta warbixina ee hirgelinta degmada *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* ay ka mid tahay, laakiin aanayku xadidnayn, xogta isticmaalka ka joojinta gudaha dusgiga iyo dibadiisa sifooyinka mujtamaceed ee ardayaga.
15. Qaado dhammaan tillaabooyinka macquulka ah si aad u xalliso khilaafaadka qoysaska.

## Waajibaadka Maamulka Degmada

**Maamulayaasha Degmo Dugsiyedka Magaalada Syracuse waxay leeyihiin waajibaadka ah:**

1. Abuuridda iyo fulinta hadafyada iyo hannaanka lagu boorrinayo amni iyo kala danbayn dhammaan ardeyda, shaqaalaha dugsiga iyo horjoogayaasha.
2. Ilaalinta xuquuqaha sharciga ah ee shaqaalaha dugsiga, horjoogayaasha, ardeyda iyo waalidiinta ama masuulada.
3. Ay noqdaan dhexdhexaad, ixtiraamaan si caadi ahna ula dhaqmaan ardeyda, waalidiinta, shaqaalaha dugsiga iyo horjoogayaasha.
4. Inay la yeeshaan kulamo ay kula kulmayaan shaqsiga u baahan manhajka dugsiga.
5. Ku wargeliyaan jaaliyadda, ardeyda, waalidiinta, shaqaalaha dugsiga iyo horjoogayaasha waxyaabaha ku saabsan hadafyada guddida waxbarashada.
6. Hubinta ilaalinta xuquuqda sharciga ah ee ardeyda naafada ah.
7. Fidinta shaqaale u tababaran daboolida baahiyaha ardeyda.
8. Fidinta taageero iyo tababar xirfad horumarineed loo fidinayo horjoogayaasha iyo shaqaalaha dugsiga si ay u caawiyaan taageerada ardeyda.
9. Ku taageer maamulaha iyo shaqaalaha dugsiga dhammaystirka maduuliyadooda edaabeed sidala lagu qeexay Syracuse *Xeerka Anshaxa, Dabeecad iyo Taageerada*.
10. La xidhiidhida iyo kala qayb qaadashada waalidiinta arrimaha anshaxa.
11. Ka war hay oo baadh xogta ku saabsan hirgelinta degmadda *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* ay ka mid tahay, laakiin aanay ku xadidnayn, taariikhda isticmaalka ee ka joojinta gudaha ama ka baxsan dugsiga ee sifooyinka qaab dhismeedka bulsho.

**Sidoo kale Kormeeraha Guud ee Gegmo Dugsiyedka Magaalada Syracuse ayay saaran tahay waajibadka ah:**

12. Horumarinta amniga, kala danbaynta, ixtiraamka iyo hagaajinka deegaanka, xorna ka ah, takoorid iyo xarraasid, barasho iyo waxbarasho firfircoon oo taageero leh.
13. Inuu dib ula eego maamulayaasha degmada hadafyada guddida waxbarasho iyo sharciyada gobalka iyo fadaraalka ee la xidhiidha hawlaha dugsiga iyo maaraynta.

14. Ku wargelilnta jaaliyadda, ardeyda, waalidiinta, shaqaalaha dugsiga, horjoogayaasha iyo guddida dugsiga hadafyada ku saabsan guddida waxbarashada, oo ay ku jirto anshaxa ardey.
15. Ka shaqeeya si loo sameeyo barnaamijyo waxbarasho oo yareeya dhibaatooyinka dhaqan xumada oo xasaasi ku ah ardayga iyo baahiayaha macalinka.
16. Kala shaqee maamulayaasha degmada fulinta Syracuse *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo Taageerada* iyo hubinta in dhammaan xaaladuhu loo xaliyo si degdeg ah oo xaq ah.
17. Muujinta dhammaan meelaha dugsiga ee la xidhiidha wixii khuseeya amniga.
18. Dib u eeg xogta hirgelinta ee *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* oo samee talooyin ku saabsan horumarinta marka loo baahdo in la yareeyo isticmaalka ka joojinta.
19. Qaad tallaabooyinka habboon meesha xad gudubyadu *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* ay ka dhacaan.
20. Dooro Sarkaalka U Doodadaha u Sareeye kaas oo hubin doono u hogaansanka sharciyada federaaliga iyo gobolka ee ku saabsan edaabta dugsiga, hubso in hirgelinta xeerarka dehmadda ee ku saabsan edaabtu ay xaq tahay, loo simanayahay, oo ay u hogaansanto Ballanka, oo lala xidhiidho ardayda, waalidka iyo shaqaalaha waxa ku saabsan arrrimaha la xidhiidha xeerarka edaabta iyo hirgelinta Ballankan.

## Masuuliyaddaha guddida waxbarashada

**Guddida waxbarashadu waxay masuulka yihiin:**

1. La shaqee ardayda, macalimiinta, maamulayaasha, waalidka ururadooda, shaqaalaha badbaadada dugsiga, shaqaalaha kale ee dugsiga iyo bulshada si loo horumariyo *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* kaas oo si cad u qeexa rajooyinka anshaxa ardayda, Shaqaalaha Degmadda iyo dadka kale ee dhismaha dugsiga iyo shaqada dugsiga.
2. Si sanad leh ah u qaado oo u qiimee Degmadda keeda *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* si aad u qiimayso wax qabadka Xeerka iyo xaqa iyo joogtaynta hirgelinyeeda.
3. Magacaabidda Isuduwaha Xeerka Sharafta dhisma kasta oo dugsi. Guddidu waxay hubin doonaan in kormeeruhu u tababaran yahay inuu hanto kana soo bixi karo arrimaha bani aadanimo ee la xidhiidha midabka, miisaanka, asalka qaranimo, qabiilka, diinta, isticmaalka diinta, naafanimo, wacyi gelinta galmada, lab iyo dhaddig, jinsiga. Isuduwaha Xeerka Sharaftu wuxuu awood u yeelan doonaa la talinta iyo waanada ardeyda iyo xubnaha shaqaalaha kale markii loo baahdo Xeerka Sharafta.
4. Tusaale ku hoggaami qabo shirar xirfad iyo ixtiraam leh kala danbayn leh.
5. Xogta qiimaynta iyo tallooyinka ee agaasimaha hirgelinta *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada*, ay ka mid tahay laakiin aanay ku xadidnayn istimaalka ka joojinta gudaha dugsiga iyo dibada ardayga hab dhaqanka bulsho iyo hirgelinta dib u habaynaha haddii loo baahdo.

## Soo-booqdayaasha Dugsiyada

Waxaanu soo dhawaynaynaa oo aanu u aqoonsanaa waalidiinta, masuulada, iyo xubnaha bulshada inay yihiin shuraako muhiim u ah waxbarashada ardaydeena iyo qaabaynta bulshada dugsigeena. Sidan oo kale waa rabitaankeena in dhammaan booqashooyinka dugsiyadeena ay noqdaan kuwo soo jiidasho leh oo wax soo saar leh oo iskaashi ah.

Waxaan filaynaa in booqashooyinkan ay u hoggaansamaan habraacyada soo-booqdaha ee la aasaasay si aan u ilaalinno waxbarasho badbaado leh iyo jawi shaqo ardaydeena iyo shaqaalaheena. Waxaan fileynaa in sirta la ilaaliyo iyo in booqasho kasta aysan carqaladeyn nidaamka waxbarashada arday kasta ama waxqabadyada fasalka. Maadaama ay jiraan hawlo badan oo gudaha ah oo ka socda dugsiyadeena maalin kasta, waxaanu kugula talineynaa inaad horay u wacdo xafiiska dugsiga weyn si aad u hubiso booqasho waxtar leh oo aad u xaqiijiso helitaanka shaqaale si ay kula kulmaan. Waxaan kor u qaadeynaa hababkan si aan uga caawinno waalidiinteena in ay dhex maraan dugsiyadeena oo aan abuurno faham weyn in ammaanka dugsigu u baahan yahay rabitaanka dhinaca dhammaan daneeyayaasha si ay u wada shaqeeyaan.

***Sidaas awgeed, waxaanu codsanaynaa in nidaamka soo socda la raaco mar kasta oo la soo booqdo xarunta dugsigeena:***

Dhammaan dadka soo booqda dugsiga waa in ay ka warbixiyaan calaamadda loo qoondeeyay ee aagga waxaana laga rabaa in ay bixiyaan nooc la aqbali karo oo aqoonsi sawir ah marka ay yimaadaan dhismaha.

Dhammaan dadka soo booqda waa inay shaqaalaheenna siiyaan qaab la aqbali karo oo aqoonsi sawir ah oo ay isu diiwaangeliyaan booqde dugsi ahaan.

Marka la isku diiwaan geliyo booqde ahaan waxaa lagu siin doonaa warqad ku meel gaar ah oo soo booqata dugsiga, kaas oo la rabo in si muuqata loo muujiyo markaad ku jirto dugsiga, ama gudaha xerada.

Dhammaan booqdayaasha waa inay ka warbixiyaan xafiiska weyn oo ay sheegaan nooca booqashadaada, wakhtigaas waxaa lagaa codsan doonaa inaad ku sugto gudaha xafiiska marka codsigaaga la habeeyo.

Waalidiinta ama muwaadiniinta doonaya inay kormeeraan fasalka marka dugsigu ku jiro waxaa looga baahan yahay inay hore u sii qorsheeyaan booqashooyinka noocaas ah macalinka fasalka, si carqaladaynta fasalka loo ilaaliyo ugu yaraan. Macallimiinta waxaa laga filayaa inaysan qaadan waqti fasalka si ay ugala hadlaan arrimaha gaarka ah booqdayaasha. Macallinna waa in aan la joojin muddada waxbarashada si joogto ah loo qorsheeyay si uu ula hadlo waalidka ama booqde kasta, marka laga reebo xaalado aan caadi ahayn ama xaalad degdeg ah oo ka dibna kaliya ogolaanshaha maamulaha.

Marna lama aqbali karo aflagaadada dadweynaha, carqalad kasta oo ula kac ah, aflagaado iyo/ama hanjabaad rabshado ah oo loo geysto shaqaalaha, ardayda ama dadka kale ee laga yaabo inay joogaan, la aqbalo.

Dhammaan booqdayaasha waxa laga filayaa inay u hoggaansamaan xeerarka anshaxa guud ee hantida dugsiga ee ka kooban Xeerkan Anshaxa. Haddii aad soo bandhigto mid ka mid ah dhaqamada mamnuuca ah ee aan soo sheegnay waxaa lagaa codsan doonaa in aad si degdeg ah uga baxdo dhismaha dugsiga waxaana lala xiriiri doonaa Waaxda Badbaadada Dadweynaha.

Intaa ka dib, waxa kale oo aad ka heli kartaa ogaysiiska xannibaadda waalidka ee Dugsiga Degmada Syracuse kaas oo kugula talinaya inaad u baahan tahay inaad la xidhiidho maamulaha dugsiga 24 saacadood ka hor si aad u hesho ogolaanshaha inaad dugsiga soo booqato.

# XAL U HELITAANKA DHIBAATO

## U xoog sheegasho, ugu xoog sheegasho internetka, baqdin gelin, hadoodilid, Faquuqid, & dhaqan eex ah

U xoog sheegashada, ugu xoog sheegashada internatke, dhibaataynta iyo baqdin gelinta, hadoodilka, Faquuqid, iyo dhaqanada eexda ah waa kuwa aan badbaado hayn in la sameeyo oo ma muujiyaan tixgelinta kuwa kale sida u qeexay *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada*. Haddii adiga ama qof aad garanayso uu yahay bartilmaameed dabeecadahan midkood, waxaad u gudbin kartaa adigoo isticmaalaya *foomka gudbinta u xoog sheegasahda, Dhibaataynta, ama baqdin gelinta,* lagana heli karo websaytka dugsiga ama xafiiska weyn ama xafiiska qunsulka dugsigaaga. Waxaad u sheegi kartaa xubin kamid ah shaqaalaha, oo ka bixin kara jawaab deg ah iyo ficilba, iyo ku gudbinta meel ammaan ah.

Haddii maamule go'aamiyo in dabeecaddahan mid kamid ah ay dhaceen, ardeyda ka qayb qaatay waxay taageero ka helayaan qunsulka dugsiga, saykoolajiistaha dugsiga, shaqaalaha arrimaha bulshada ee dugsiga, shaqaalaha ardeyda, ama shaqaalaha caafimaadka dugsiga si loo hubiyo in qof kasta uu uga qaby qaatay si ammaan ah, taageerid leh, iyo fahmida joojinta xaaladahan oo kale mustaqbalka.

### Haddii Laguu Xoog Sheegtay...

- **U sheeg qof — waalid, macallin, la taliyaha**
- **Si deggen ugu sheeg ardeyga inuu joojiyo…. Ama ka aamus oo iskaga tag**
- **Wac (315) 435-6350**
- **Dir foomka DASA oo laga heli karo barta syracusecityschools.com/support**
- **Ka fiiri liiska iskuduweyaasha DASA ee dugsi kasta barta: syracusecityschools.com/dasa**

### Haddaad Ogtahay Qof loo Xoog Sheegtay...

- **Haddii aad dareemayso ammaan, noqo *"qof isu taaga"* oo**
  - U sheeg kan murminaya adigoo odhanaya "waxaas dugsiga dhexdiisa kuma samayno". Ama "sidaasi sax maaha in sidaas qof loo galo"
  - Waxaad tidhaahdaa erayo taageero u ah ardeyga la muransiiyay saaxiib u noqo!
  - Ha dhiirri galinin Xoog Sheegashada adigoo ku qoslaya ama ka qaybqaadanaya
  - U sheeg kuwa ***goob joogayasha*** ay u caawin karaan inay joojiyaan xoog sheegashada
- **Hadii ayna amaan ahayn…**
  - U sheeg qaan gaadhe
  - Dhiirri gali ardeyga la muransiiyay inuu la hadlo qof

# Xeerka Sharafta Dhamaan Ardayda (DASA)

### Soo Sheegista shuruudaha looga baahan yahay ee Mucayinka u ah Faquuqista, Waxyeelleynta, Aflagaadada, Aflaagada Waaweyn iyo Aarsiga

1. Degmada ayaa si dhakhsa leh baadhitaan ugu sameyn doonta dhammaan wixii cabashooyin ah, af ahaan ama qoraal ahaan, dhammaan wixii eedeymo faquuqis ah, waxyeelleyn ah, aflagaado gadaal ka hadal ah iyo aarsiba ah, isla markaana degmada ayaa si dhakhsa leh ficil uga qaadi doonta si looga ilaaliyo shakhsiyaadkaas inay ku sii dhaqaaqaan tacaddiyo dheeraad ah, waxyeelleyn, u xoog sheegashada
2. Waxaa lagama maarmaan ah in arday kasta oo aaminsan in lagula kacay tacaddi, waxyeelleyn, aflagaado gadaal ka hadal ah ama fal aar goosi, iyo sidoo kale shakhsi kastoo ka war qaba iyo/ama ogsoon, ama markhaati ka ah dhacdo suurta gal noqon karta, inuu si dhakhsa leh ugu soo sheego xubin kastoo shaqaale ama maamulaha. Xubinta shaqaale/maamule ee warbixinta loo geeyo (ama xubin shaqaalaha/maamulaha markhaati u ah ama shaki ka muujiya tacaddi, waxyeelleyn, aflagaado gadaal ka hadal ah ama fal aar goosi) ayaa dacwo ka qori doona isla markaan tillaabo ku habboon ka qaadaya loona wacyi geliyo xaaladda si dhakhsa leh isla markaana si deg ah uga warbixinya sida ku xusan sadarrada soo socda.
   a. <u>Maamulha dhismuhu waa shaqaalaha u xil saaran inuu qabto dhamman wixii warbixino waxyeelleynta, aflagaadada gadaal ka hadalka ah, ama faquuqista ama aargoosiga;</u> hase yeeshee, ardayda iyo waallidiintu way sameyn karaan cabshooyin waxyeeleyn afka ah ama qoraal ah, aflagaadada gadaal ka hadalka ah ama faquuqista ah una geyn karaan macallinka, maamulaha ama shaqaalaha iskuulka. Haddiiba ay dhacdo in Maamulaha iskuulku uu ahaa dembiilaha la eedeynayo, warbixinta waxaa toos loogu dirayaa Taliyaha Sare.
   b. Dhammaan cabashooyinka ku saleysan faquuqidda, waxyeelleynta, aflagaadada gadaal ka hadalka ah ama dabeecadda aargoosi leh si:
      - Si degdeg ah loo baadho si waafaqsan shuruudaha tan *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada*;
      - Loona Gudbin doonaa Isku-duwaha Xeerka Sharafta dhismaha si loo kormeero; iyo
      - In loola dhaqmo si qarsoodi ah isla markaana khaas ah lahanka macquulka ah ee sharci ahaan caqabadda ku ah.
3. Markii cabashada la helo (xitaa cabashada qarsoodiga ah), ama haddii shaqaale Degmada ka tirsani uu ogaado wixii dhacdo ah oo anshaxa la xiriira oo mamnuuc uu ka dhigayo Xeerku, Shaqaalaha Degmadu si dhakhsa leh oo afka ah ayuu u ogeysiin doonaa Maamulaha dhismaha ee ku habboon wax aan ka dambaynin hal maalin iskuul ka dib markii shaqaalkaasi uu arko ama soo gaadho cabashadu ama uu ogaado dhaqanka noocaas ah. Shaqaalahaas ayaa sidoo kale qoraal fayl gareysan u geyn doona Isku-duwaha Xeerka Karaamada muddo aan ka dambaynin labo maalmood oo iskuul ka dib markii la sameeyo warbixintaas oraahda ah.
4. Ka dib markii la helo cabashada noocaas ah, maamulaha dhismaha eek u habboon, ama shaqaalaha uu u xilsaaro, ayaa horaamin doona ama kormeeri doona dhammaan baadhitaanka faquuqidda eedeynta ah, waxyeelleynta, aflagaadada gadaal ka hadalka ah, ama dabeecadda aar goosiga ah. Maamulaha dhismaha eek u habboon ama qofkaasi qofkuu u xil saaro ayaa hubin doona in baadhitaankaanka noocaas ah si dhakhsa leh loo dhammeystiro

isla markaana la waafajiyo qawaaniinta u taal Xeerka. Dhammaan cabashooyinka waa in loola dhaqamaa si kalsooni leh oo gaar ah ilaa xadka suuragalka ah ee ku jira xadadka sharciga.

5. Saleynayo natiijooyinka ka soo baxa baadhitaanka, haddii Degmadu go'aantasato in Sarkaal Degmada ah, shaqaale, mutaddawac, ganacsade, booqde iyo/ama arday uu xadgud ku sameeyay Xeerkaan, ama dhibaateyn dhacdo xagga qalabka ah, aflagaado gadaal ka hadal ah, faquuqis iyo/ama dabeecad aar goosi ay dhacdo, ficil sixitaan deg-deg ah ayaa lga qaadi doonaa sida la wada qabo. Degmadu waxay u qaadi doontaa si dhakhsa leh si macquul ahna loogu xallinayo dhammeystirka xadgudubka, kana takhaluseysaa wixii saaxad colaadeed ah, abuuraysaa dhaqan wanaagsan oo wanaagsan inuu iskuulku yeesho iyo jawi deggan in lagana hortago dib u soo noqosho dabeecaddaas ah, iyo hubinta nabadgelyada ardayga iyo ardayda lagu eedeynayo xadgudubkaas.
6. Maamuleyaasha dhismaha ayaa keeni doona warbixin joogto ah, ugu yaraan hal mar inta lagu jiro sanad dugsiyeeed kasta, xog iyo tafaasiil la xiriidha waxyeelleynta, aflagaadada gadaal ka hadalka ah iyo/ama faquuqidda loona geynyaa Taliyaha Sare ee Iskuullada.

## Hababka Dhaqangelinta Jawaabaha Anshaxa

Kiisaska oo dhan, iyadoo aan loo eegaynin cawaaqibyada loo baahan yahay, Shaqaalaha iskuulka hawl gala ee loo igmaday inay ku hawl galaan cawaaqibyada waa inay ku war geliyaan dabeecad xumada lagu soo eedeeyay isla markaana inay baadhaan xaqiiqada ka jirta akhlaaq xumada la isku eedeynayo. Dhammaan ardayda oo dhan fursad ayey u heli doonaan ay ku soo gudbiyaan sida ay wax uga dhaceen dhinacooda ka hor intaan waqti looga qaban) Xarunta Faragelinta Dabeecadda, b) Xannibaadda iskuulka dhexdiisa ah, c) xannibaadaha iskuulka dibedda ka ah, d) Latashiyada ka hor waxa loo yaqaan Pre-K-2, ama e) dhageysiga kiiska ee Degmada.

## U-gudbinta Wakaaladaha iyo Hay'adaha Dibadda Wakaaladaha La-talinta iyo Adeegyada Aadanaha:

Shaqaalaha "SCSD" waxy u noqon karaan imakaaniyaad ardayda, waalidiinta iyo qoysaska wixii tixraacyo ah oo ku saabsan ardayda latalintooda iyo hay'adaha adeegyada bini-aadami

## Kooxda ACCESS:

Mid kasta oo kamid ah dugsiyadeena waxaa loo sameeyay dhexdhexaadiyaha dugsiga oo ka socda Kooxda ACCESS. Haddii aad u baahan tahay in laga caawiyo cunugaaga/kuraygaaga caqabadaha dareenka ama dhaqanka, ka wac Kooxda ACCESS lambarka 463-1100 24 saac maalintii, todobo maalmood asbuucii ama la hadal shaqaalaha bulshada ee dugsigaaga. Xubin kamid ah shaqaalaha oo tababaraha ayaa kugu xiri doona taageerooyinka iyo adeegyada sida ugu haboon u daboolaaya baahiyaha qoyskaaga iyo cunugaaga. Kooxda shaqaalaha waxaa ku jira waalidiin koriyay ama korinaaya ilmo u baahan adeegyada caafimaadka dhimirka, daryeelka ilmaha ama cadaalada ubadka. Kooxda ACCESS sidoo kale waa talaabada koobaad oo aad ka bilaabayso shaqada PINS ee ilmaha ka yar 18 sano oo dabeecad ka dhigtay inuu kasoo daaho dugsiga iyo/ama aan





## Shaqaalaha Ku Taageeraya Ardayda Dugsiga Dhismaha Kasta

**Maamuleyaasha:** Maamulaha iyo hawl wadeennadu iyagaa ka hawlan oo ah horyaalka dhammaan dhaqanka oo dhan iyo nashaadaadka lagu taageerayo ardayga isla markaana dusha kala socda shaqada ay qabtaan kooxaha lama huraanka u ah nidaamka is dhexgalka akhlaaqda guud ee iskuulka iyo taageerista ardayga.

Maamulaha dhismuhu waxa uu guddoomin doonaa Kooxda Cimilada ee Sinnaanta iyo Dugsiga oo waa in uu kala shaqeeyo Sarkaalka Dhexdhexaadinta si uu u hubiyo u hoggaansanaanta dugsigiisa ama keeda xeerarka degmada. Isuduwaha waxaa loo heli si uu ula shaqeeyo shaqaalaha dugsigiisa ama keeda si uu u go'aamiyo edaabta habboon xalado gaar ah oo sidoo kale waxa uu u shaqayn doonaa si xidhiidh la leh oo waxa uu ka raadin doonaa hagitaan Madaxa Sarkaalka u doodaha dadka.

**Shaqaalaha Bulshada:** Shaqaalaha bulshadu waxay isku dubbaridaan shaqaalaha taageerada, gudaha iyo dibaddaba, waxayna hoggaamiyaan shaqada hubinta in dhammaan ardaydu helaan adeegyo iyo waxqabadyo ay u baahan yihiin. Shaqaalka Arrimaha Bulshadu wuxuu sidoo kale u fududeeyaa kooxda dhexgalka shaqadan isla iyada ah.

**Tababaraha Taageerada Ardayga:** Xubinta kooxda taageerada ardayga (la taliyaha, shaqaalaha bulshada, dhakhtarka cilmi nafsiga, khabiirka dhaqanka ardayga, u doodaha dhalin yarada, khabiirka horumarinta dhalin yarada, maareeyaha kiiska, ama waxarashada gaarka ah, macalin la shaqeeya) ama macalin dadka iskii u caawiya kaas oo bixiya tababar, tilmaamaha xirfada, oo taageera arday gaar ah oo u baahan wax ka qabad joogta ah iyo horumarka ka warhaynta dhow ama ardayda ka soo noqonayda xili gaaban ama xili dheer ka joojinteeda, barnaamij kale, xarunta dhalinyarada, ama xabsiga.

**Isuduwaha Xeerka Sharafta:** Sidii Maamul dugsi iyo xunbo shaqaale u adeega sida DAC (Xeerka Sharafta) Isu duwahaha in la baadho oo la habbeyo dhammaan ta laga warbixiyo ee xoog sheegashada ah iyo shilalka dhibaataynta oo uu hubiyo in dhammaan DASA hawlaha ka hortaga iyo DASA wax ka qabadka ardayga loo gudbiyo si wakhti habboon ah.

### Doorarka Muhiimka ah ee Kooxaha Dugsiga iyo Shakhsiyaadka

Si loo taageero wax u sheegista rajo soo celinta iyo la xisaabtanka leh iyo hirgelinta wax ku ool ah ee Xeerka Akhlaaqda Suubban ee Syracuse , Taageerada iyo Hab dhaqanka, iskuul kastaa wuxuu hirgelinayaa kooxaha soo socda.

**KOOXDA HOGAANKA DUGSIGA**

**MACALIMIINTA IYO TABABAREYAASHA**

**EDEBTA, BADQABKA, IYO SHAQAALAHA TAAGEERADA ARDAYGA:**

**SINAANTA IYO KOOXDA CIMILADA DUGSIGA**

Kooxda Dugsiga waxay ka kooban yihiin maamuleyaal, xubno ka tirsan koox taageerada ardayga, shaqaalaha waxbarashada khaaska ah, macallimiin, waalidiinta, ardayda iyo xubno shaqaale oo aan-la xaqiijin kuwaas oo dusha kala socda muuqaalka guud ee xagga nabadgelyada, bulsho ahaanta, iyo jawi ixtiraam dhaqan suuban in la helo, qiimeynna ku sameeya xaaladda guud iyo hor u socodnimada qorsheyaasha waaweyn ee jawiga iskuulka, uma soo bandhigayaan xogtaas shaqaalaha oo dhan, isla markaana isku dheelli tiraan oo isku dubba ridayaan nashaadaadka iyo dhacdooyinka taageeraya jawi wanaagsan oo iskuulku yeesho iyo dabeecad wanaagsan oo ardaygu ku dhaqmo. Kooxda Jawiga Iskuulka/Akhlaaqda Suubban waxay ka doodaan isla markaana xaqiijiyaan akhlaaqda guud ee iskuulka iyo qorshaha taageerada ardayga isla markaa iyagaa mas'uuliyad ka saaran tahay dib u eegista iyo joogteynta xogta akhlaaqda suubban, sameynta sixitaannada qorshaha xagga akhlaaqda ee iskuulka oo dhan, iyo soo jeedinta khuseymaha xagga akhlaaqda guud ah.

PRE-K – 5

6 – 8

9 – 12

**KOOXDA DHEXDHEXGALKA ARDAYGA**

Waa koox iskuulka ka tirsan oo ula socota kiisaska ardayga toddobaad kasta si ay u hubiyaan in dhammaan ardayda oo dhami uhu helaan adeegsi siman adeegyada iyo dhexgalka ay u baahan yihiin. Kooxda Faragelinnada Iskuulku waxay isticmaalaan xog ardayga ku saabsan "digniin hore" qaab ah oo lagu ogaanayo ardayga ku jira halista ugu weyn si loogu fuliyo habdhaqan beegsi ah iyo dhexgal xagga caafimaadka dhimirka ah oo waqtigaas ah isla markaana la saadaalin karo.

la xakamayn karin markuu joogo guriga, dugsiga, ama bulshada dhexdeeda. Dabeecadaha guud waxaa ku jiri kara dabeecada cararida, caasinimo badan, cayda ama nabar ku dhufashada waalidiinta iyo kasoo dahaida dugsiga. Kooxda ACCESS ee Degmada Onondaga, oo ah koox ka kooban shaqaalaha xirfadaha kaladuwan, waxaa ku jira iskaashatada Adeegyada Bulshada, Dhaqan celinta, Taageerada Waalidka iyo xirfadleyaasha caafimaadka, waa wakaalada hormuudka u ah marka laga hadlaayo waalidiinta iyo dugsiyada ciladuhu ka haystaan ilmahooda. Waxaan ku boorinaynaa waalidiinta inay toos ula xariiraan Kooxda ACCESS si ay u bilaabaan codsashada adeegyada.

## Qarsoodiga Latalinta

Marka ardey tilmaamayo in isaga/iyada ku fikirayo inuu waxyeeleeyo naftiisa ama nafteeda ama ardey kale, maamulaha dugsiga ayaa looga baahan yahay inuu tallaabo qaado si uu u hubiyo amaanka aredyga ama ardeyda kale. Tallaabadan waxaa kamid ah wadaaga macluumaadka lala wadaagayo horjoogaha dugsiga iyo waalidiinta, iyo wakaaldaha kale ee dibadda ah. Faallo ma leh, hadal ama qoran, ardey sameeyay doonaya talobixin la xidhiidha nooc kasta oo daroogo kamid ah waxaa loo isticmaalayaa caddeyn in lagu caddeeyo isaga/iyada.

## Dhibaatooyinka Dugsiga

Haddii ardeydu tabayaan dhibaato la xidhiidha anshaxa, ammaanka, amniga shaqsinimo ama samafal, waa in ardeygu:

5. U sheegaa macallinka ugu dhaw ama xubin kamid ah shaqaalaha qaan gaadhka ah. U sheegaa isaga/iyada xaqiiqada sida ay wax ugu dhaceen ardeyga ama waxa ardeyga uu ku samaynayay ardey kale. Dhibaatooyinka anshaxa, ammaanka, amniga shaqsinimo waa kuwo leh tixgelin khatar ah.
6. La hadal horjoogaha ama kalkaaliyaha horjoogaha isla markaaba.
7. U sharrax dareenkaaga. Waa wax dabiici ah in la dareemo walwal iyo maqnaansho La hadal qof dhagaysanaya fahmayana shaki la'aan caawiye, dhexdhexaadiye, macalin, qunsulka dugsiga, saykoolajiistaha dugsiga, shaqaalaha arrimaha bulshada, ama qaangaadhe. Waa muhiim in lala hadlo qaan gaadhe lagu kalsoon yahay.
8. Waydii inaad la hadasho qunsulka dugsiga, saykoolajiistaha dugsiga, ama shaqaalaha arrimaha bulshada ee ardeyda ka caawin kara barashada wadiiqooyinka xallinta dhibaatooyinka si ay markaa u dareemaan ammaan iyo kalsooni ku filan marka ay soo food saarto dhibaato mustaqbalka.
9. Waxaa intaa dheer, in loo sheego maamulaha dugsiga, ardeygu waa inuu u sheegaa waalidkiisa dhibaatadu waxay ahayd. Waxay dooni doonaan inay ogaadaan.

Muhiim ayay u tahay ardeyda inay ogaadaan marka warbixin loo gudbiyay dugsiga oo ku saabsan arrin dhacday, dadaal kasta ayaa loo samaynayaa in la xafido macluumaadka iyo shaqsigaba.

## Dhibaatooyinka Shaqsinimo.

Caawinta dhibaatooyinka shaqsinimo taasi oo waxyeelayn karta nolosha dugsiga ama hawlaha:

1. Hadday suurto gal tahay, kala xaajood dhibka waalidka.
2. Haddii ardeyga iyo waalidiintu ayna xallin Karin dhibaatada, waxaa jiro dad kale oo jooga dugsiga oo awoodda inay caawin ka gaystaan. Ardeygu wuxuu la hadli karaa macallinka uu dareemayo inuu ku kalsoon yahay.
3. Lataliyeyaasha dugsiga, saykoolajiistayaasha iyo shaqaalaha arrimaha bulshada ee dugsiga waxaa loo tababaray inay caawiyaan dhibaatooyinka shaqsinimo. Waxay kale oo ay ku hoggaamin karaan ardeyga waxyaabe kale oo uuna ka warqabin.
4. Maamulaha iyo maamule ku xigeenku waxay sidoo kale awood u yeelanayaan in adhibaatada kala hadlaan ardayga oo isku dayaan in ay xal ka shaqeeyaan. Haddii ayna awooddin inay sameeyaan sidaas, waxay dalbanayaan kaalmo.

## Dhibaatooyinka Tacliimeed

Caawinta dhibaatada tacliinta, ardaygu waa inuu:

1. Arkaa macallinka bara maadada. Ardeydu way raadsanayaan macallimiinta si shaqsi ah. Ardeydu way raadsanayaan macallimiinta si shaqsi ah. Macallimiintu waxay la shaqaynayaan ardeyda leh dhibaato shaqsinimo oo waxbarasho ah. Macallinku wuxuu dalban shir uu la yeesho ardeyga iyo waalidiintiisa.
2. Haddii macallinka awoodi waayo inuu caawiyo ardeyga xalliyana dhibaatada si ardeygu ku qanacsan yahay, ardeygu wuxuu u tagikaraa maamulaha.
3. Caawimaad intaas ka badan waxaa laga heli karaa la taliyaha dugsiga.
4. **Dhibaatooyinka aan wali la xallin kaddib marka uu ardeygu kala hadlay la taliyaha dugsiga, ardeygu wuxuu dhibaatada kala hadli karaa waalidiintiisa ama horjoogaha iyo horjooge ku xigeenka. Waalidiintu waxay dooni karaan inay ardeyga kala qayb qaataan wata tashiga maamulaha.**
5. Xallinta dhibaato waxbarasho waxay ubaahan tahay in ardeygu caawiyo, iyo caawinta macallinka, iyo wakhtiyada qaar caawinta waalidiinta/masuuliyiinta, la taliyaha dugsiga, iyo xirfadlayaasha kale ee dugsiga.
6. Dugsigaagu wuxuu yeelan karaa lambar joogto ah oo kaa caawinaya shaqada guriga.

## Hawlaha manhajka ka baxsan

Caawinta la xidhiidha dhibaatooyinka ka qayb qaadashada hawlaha ka baxsan manhajka, ardeygu waa inuu:

1. Arkaa la taliyaha ku qoran hawshaas wakhti uu isagu/iyadu ku siin karo feejignaan aan kala qaybsanayn. Isku day inaadan falanqaynin dhibaatada muddada lagu jiro xiisadda hawsha lafteeda.
2. Haddii hawsha ka qayb qaadanayso ciyaaraha atleetikida, arag agaasimaha ciyaaraha atleetikida dugsigaaga.
3. Haddii ardeygu uuna aqoonin lataliyaha hawsha, ardeygu waa inuu arkaa maamulaha.
4. Haddii ardeygu waayo wax caawin ah oo xallinaya dhibaatada kaddib markii la sameeyay arrimaha kor ku xusan, kala xaajood dhibka waalidiinta iyo horjoogaha. Waalidiintu waxay dooni karaan inay ardeyga kala qayb qaataan wata tashiga maamulaha.

## Dhibaatooyinka Kooxda

Caawinta dhibaato koox oo la xidhiidha anshaxa, ammaanka, amniga shaqsinimo, ama samafal: Haddii koox ardey ah dareemayaan inay wadaagayaan dhibaato isku mid ah, wadada ugu fiican waa inay laba ama saddex wakiilo ka ah u dirsadaan macallinka ama maamulaha ka qayb qaadan kara eegi kara soo jeedin karana dhibta kooxda. La xidhiidhidda u dhaxaysa mid ama laba iyo koox ballaadhan waa mid aad u adag xallinteedu. Hannaanka ugu fiican waa midka ka qayb qaadashada la xidhiidhidda wakiilada kooxda dhexdooda.

# Hannaanka Racfaannada

Haddii, ka dib Dhegaysiga kormeeraha, arday lagu helo in uu yahay dambiile ama ku xad gudbayo dugsiga *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada*, qof la leh xidhiidh waalidnimo ardayaga ayaa rafcaan ka qaadan kara go'aankaas siiba ciqaabta lagu soo rogay.

Si rafcaan looga qaato Dhegaysiga Agaasimaha ee Guddida Waxbrasahda, tallaabooyinka soo socda waa in lagu dabaqaa:

- Waalidka/masuulka waxa uu haystaa 10 maalmood a dib helida go'aanka qoran ee Agaasimaha si rafcaan looga qaato Guddida Waxbarasahda.
- Rafcaanku waa in uu qornaadaa (warqad waa la aqbali karaa).
- Warqadda waa in loo gudbiyaa Karaaniga Dugsiga Degmada ee Syracuse City.

Haddii rafcaanka loo diray Guddida Waxbarashadda la diido, codsaduhu waxa uu rafcaan u diri karaa Guddomiyaha Waxbarashada Gobolka New york. Si sidaa loo sameeyo waa in la raacaa tallaabooyinka soo socda:

- Codsaduhu waxa uu haystaa 30 maalmood laga bilaabo wakhtiga codsiga la helay.
- Cosaduhu waa in uu soo gudbiyaa Ogaysiiska Codsiga, Codsi iyo warqaddaha dhaarta ah taageeraya.

Haddii codsiga la diido, go'aanka Guddoomiyha Gobolka Waxbarashada New York waxaa dib u eegi karta Maxkamadda gobolka New York.

# Habraacayada Cabashada

Ardayda iyo waalidku waxay leeyihiin xaqa ay ku soo gudbiyaan cabasho haddii ay rumaysanyihiin in uu dhacay xad gudub ama si xun u dabaq shuruuda qoran ee xeerka dugsiga ama habkooda cadaalada ah ee xaquuqda lagu xad gudbay.

## Hanaanka loo Sameeyo Cabasho

Arday ama waalid ka walaacsan wax ku saabsan go'aanka la xidhiidha edaaba ama falka ugu horayn waa in uu kala hadlaa walaaca qofka go'aanka gaadhay.

Haddii ardaygu ama waalidku aanu ku qanacsanayn sida arrinta wax looga qabtay, ardayga ama waalidku waa in uu usoo gudbiyaa cabasho afka ah ama mid qoran maamulaha dugsiga.

Haddii ardayga ama waalidku aanu ku weli ku qanasanayn, waxay kala soo xidhiidhi karaan Sarkaalka U doodaha Sare ombuds@scsd.us ama iyagoo soo wacaya (315) 435-6472. Ardayda iyo waalidku sidoo kale waxa uu lkaa soo xidhiidhi karaa Qareenka ardayga (315) 435-6472.

Waa muhiim in la ogaado in ardayda iyo waalidku ay leeyihiin xaqa ay ku soo gudbiyaan cabasho afka ah ama mid qoran oo midna Guddida, midna wax xubin maamulka ka mid ah ama qaynta, aanu samayn doonin wax aargoosi ah oo saameeya qofna maxayeelay isaga ama iyaddu waxa uu sameeyay cabasho.



Syracuse City Schools
Let's Talk!

## Aanu Wada Hadalno!

Cabashooyinka waxaa lagu samayn karaa iyaddoo la isticmaalayo nidaamka wada xidhiidhka "Let's Talka" ee laga soo geli karo barta internetka degmadda.

Si aad u soo gasho "Let's Talk" fadlan booqo **www.syracusecityschools.com**.



# HEERARKA WALAACYADA DHAQANADA, XAD GUDUBYADA IYO JAWAABAHA:

## Go'aan Qaadashada Jawaabaha Anshaxa—

Saraakiisha dugsigu waa inay kala tashadaan dukumeentigan marka ay go'aamiyaan faragelinta edbinta ee lagu soo rogayo. Marka la go'aaminayo sida ugu wanaagsan ee wax looga qabto dabeecadaha ka fogeynaya jawi ammaan ah oo soo dhaweyn leh, waa lagama maarmaan in la qiimeeyo wadarta xaaladaha ku xeeran dhaqanka. Xaqiiqooyinka soo socda waa in la tixgeliyo ka hor inta aan la go'aamin hawsha ku habboon ee faragelinta iyo jawaabaha edbinta:

- da'da ardeyda iyo horumarka korriinkooda
- xogta anshaxa ardeyga (oo ay ku jirto wax dhab ah dhaqan xumo hore, tirada oo hadda kahor dhaqan xumo sameeyay)
- Tallaabooyinka edbinta iyo faragelinta lagu dabaqay xadgudubyadii hore ee dhaqanka
- xaqiiqda, iyo jawiga dabeecadda
- marxaladaha uu dhaqanku fulay/dhacay
- wakhtiyada iyo muddooyinka dabeecadda
- tirada dadka ka qayb qaatay dabeecadda
- qorshaha dabeecada ardeyga IEP, BIP (qorshaha faragalinta dabeecadda) iyo 504 qorshaha hoyga, haddii uu jiro haddii la heli karo
- jawaabta ardeyga ee faraglinta

Jawaabooyin oo kala duwan ee dhibaatooyinka anshaxa waxaa lagu qeexay saddex heerar caddaalad iyo sinnaan ah oo dhammaan ardeydu u siman yihiin xurmo iyo sharaf ahaan, iyo inaan lagu soocin koox ardey ah awooddooda, da'dooda, lab/dhaddig, hormarkooda iyo naafanimo, qabiil iyo midab, heerka dhaqaale, diin iyo wacyigalinta ruuxiga ah, asalka waddanka uu qofku kasoo jeedo, afka hooyo, wacyigalinta galmada iyo dhaqanka.

Xaaladaha muuqda, tan macnaheedu waxa weeya in:

- Waxqabadyada iyo la xisaabtanka waa in ay noqdaan kuwo ay heli karaan arday kasta, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah.
- Waxqabadyada iyo la xisaabtanka ee Heerarka 2 iyo Heerka 3 waa in si joogto ah loogu dabaqaa dhammaan kooxaha ardayda daacadda iyo hufnaanta leh.
- Xogtu waa inay noqotaa mid hufan si loo go'aamiyo isticmaalka iyo saamaynta dhammaan waxqabadyada iyo la xisaabtanka, iyadoo fiiro gaar ah loo leeyahay tilmaamayaasha isticmaalka xad-dhaafka ah iyo dheellitirka cayrinta ee kooxaha kala duwan ee ardayda.

## Meesha iyo Wakhtiga Xeerku ku Shaqaynayo

The Syracuse *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* waxa uu ku habboon yahay shilalka u dhaca sida soo socota:

- dugsiga dhexdiisa iyo dugsiga shaqadiisa inta lagu jiro saacadaha dugsiga,
- inta ka horraysa, ka danbaysa dugsiga, iyadoo lagu guda jiro shaqada dugsiga,
- marka lagu safrayo baabuurta ay maalgalisay SCSD,
- inta lagu jiro dhammaan xafladaha dugsigu qabanayo oon lahayn goob u cayiman,
- xafladdo dugsigu uusan shaqo ku lahayn isla markaana dabeecaddaha qaarkood dhici karaan oo waxyeello ku ah wadiiqooyinka waxbarashada ama khatar galiya caafiimaadka, ammaanka, mooraalka, ama samafalka jaaliyadda dugsiga.

Marka ay dhacdo dabeecad xumo, ama sharraxaad dabeecad, xadgudubka dabeecaddu waxay noqonaysaa hadal, qoraal, ama war isgaadhsiin, kumana koobna qoraal, iimayl, ama xidhiidha bulsho.

## Marku Ilmuhu U Dhaqmo Si Qalafsan....

**Dabeecada qalafsan ee carruurta yaryar waa ficil khatar ku ah inay kuwa kale waxyeeleeyaan. Yara, falal dagaal inta badan waxay ku keenaan carruurta isku deyo aan xirfad lahayn, waxay doonayaan, waxay u baahanyihiin iyo waxa ayna jeclayn.** Marka ilmuhu ku kaco fal gardaro ah oo u hanjabaya ama waxyeelo u geysanaya dadka kale ama ka dhigaya jawiga waxbarashada inuu yahay mid aan ammaan ahayn, habab gaar ah ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si labada carruur ah ee ku lug leh dhacdada (ilmaha la handaday ama la dhaawacay iyo ilmaha loo hanjabay ku hawlan fal gardaro ah) hel feejignaan iyo daryeel degdeg ah.

**Waalidku waxay ka fili karaan in falalkan ay dhic doonaan:**

- Qof kamid ah shaqaalaha ayaa si ku meel gaar ah uga saari kara fasalka ilmo dagaal samaynaaya isla markaba asagoon adeegsan ciqaab wadareed ama jajuubin (ilaa jajuubku la xariiro maahee tusmada uu bixinaayo sharcigu). Qof kamid ah shaqaalaha ayaa si ku meel gaar ah u kaxaynaya ilmaha lagu xadgudbay kana saaraya deegaanka si uu ilmaha uga caawiyo inuu isdajiyo oo caadi ku soo noqdo, markaasi xubinka shaqaalaha kamidka ah wuxuu ilmaha kala hadli karaa sida ay wax udhaceen.
- Qof shaqaale ah ayaa la hadli doona ilmaha la waxyeeleeyay isla markiiba si loo hubiyo in ilmuhu leeyahay fursad uu kaga hadlo waxa dhacay iyo caawinta ilmaha inuu dib ugu soo noqdo si caadi ah oo ammaan ah.
- Waalidiinta carruurta ka qayb qaatay dhacdada ayaa lala xidhiidhi doonaa, shaqaalaha dugsiga ayaana u sharrixi doona wixii dhacay dhacdada ka hor, la wadaagi sida qaan gaadhayaashu uga jawaab bixiyeen dhacdada, falanqayn qorshe wakhti gaaban dib loogu celinayo caadi noqoshada iyo ammaanka, iyo qorshe wakhti dheer xakamaynta dhacdooyinka noocan oo kale ah mustaqbalka.
- Waalidiinta uu ilmahoodu ka qayb qaatay dhacdada waxaa laga codsan karaa in loo qabto shir ay ku wada xaajoodaan waalidka kale.

## Ka joojinta Dugsiga Hanaanada ilaa Fasalka 2

**Haddi arday ku jira fasalada K-2 uu ka qayb qaato mid faafa ama fal dagaal oo halis ah taas oo dhaawac ku keenta ama u hanjabta badbaada carruurta ee gudaha fasalka, maamulhu waxa uu go'aamiyaa wax ka qabadka ugu habboon ilaa oo waxaa ku jira ka joojinta dugsiga ka baxda. Ka joojinta kasta ee K-2 waxay u baahan tahay ogolaanshaha Wakiilka Kormeeraha Guud. Maamuluhu sidoo kale waa inuu isla markiiba u bixiyaa ogeysiin qoraal ah Wakiilka Kormeeraha Guud marka la joojiyo. Taa waxaa raaca, qorshe wax ka qabad waa in loo horumariyaa. Dhammaan tillaabooyinka macquulka ah waa in la qaadaa si waalidiinta looga qaybgeliyo horumarinta qorshaha dhexgelinta ee lagu taageerayo guusha ilmahooda.**

**La tashi lala yeesho Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Gaarka ah ama qofka loo igmaday ayaa looga baahan yahay arday kasta oo haysta Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) wixii cayrin ah ee suurtogalka ah ee heerka 2, 3 ama 4. La-talinta lala sameeyo Agaasimaha Caafimaadka Dhimirka ayaa looga baahan yahay arday kasta oo leh Qorshaha 504 ee cayrinta kasta oo suurtogal ah heerka 2, 3, ama 4 ee dembiga.**






## Heerarka Walaacyada dhaqanada, Xad gudubyada iyo Jawaabaha:

**HEERKA 1** wada shaqayn la'aanta dugsiga guud ahaantiisa iyo dhaqangalinta fasallada ee horumarinta iyo dhaqan galilnta dabeecaddaha bulshaawinimo, anshaxa shaqsinimo, amateetka barashada iyo caafimaad qabta. Iyadoo loo marayo tijaabooyin iyo jawaab ka bixin isla markiiba ah, macallimiintu waxay doonayaan inay difaacaan dhibaatooyinka yar yare e anshaxa inay noqdaan dhacdooyin waaweyn oo anshax.

**HEERKA 2** waxay bartilmaameesanaysaa faragalinta iyo natiijooyinka marka dabeecadda ardeyda lagu xadgudbay jawaabka bixinta dabeecadda waxaa gooni loogu eegayaa xaaladda markaas taagan ama dhacdada fasalka dhexdiisa ama meel kale. Waxqabadyada waxaa ka mid noqon kara meelaynta Xarunta Taageerada Ardayga iyo ka joojinta gudaha dugsiga.

**HEERARKA 3** and **4** waxay quseeyaan dhaqanada xad gudubka kuwaas oo si halis ah u khatar geliya dugsiga iyo badbaada fasalka iyo amarka. Ardeyda ay soo wajahayso halis sare ama dabeecad halis ah, waxbarasho, iyo arrimo khuseeya caafimaadka muuqaalka iyo maskaxda waxaa loo xilsaaradaa faragalin shaqsinimo aad u mug weyn.




Hadafyaddani waxay khuseeyaan dhammaan ardeyda, fasalada 3aad-12aad, oo ay ku jiraan dhammaan ardeyda IEP-yada qorshayaasha 504. Dhacdooyin badan ama xadgudubyo dabadheeraad ah oo isla dhaqanka ah ayaa dammaanad qaadi doona faragelin aad u xooggan iyo heer sare oo isla xisaabtan ah. Fadlan eeg Micnaha Erayada wixii faahfaahin dheeradaa ah oo dhaqanka ah.

Wax ka qabadyada iyo jawaabaha edbinta ee la jaan qaadaya heer kasta waxay ka dhigan yihiin liiska jawaabaha. Macallimiinta iyo maamulayaasha waxay dooran karaan mid ama ka badan jawaab bixinno heer walba. Maamulayaasha, macalimiinta, iyo kooxaha taageerada lagama filayo in ay xushaan oo isticmaalaan dhammaan wax qabadyada heer kasta. Maamulayaasha, macalimiinta, iyo kooxaha taageerada waxay sidoo kale isticmaali doonaan heer hoose oo wax ka qabad ah markay habboontahay. Waxay ku hagaysaa inay iyagu isku aadiyaan faragalimaha iyo ardeyda ee is leh, marka ay jirto waxyeelayn badan. Faragellinadu waxay noqonayaan shaqo-la kormeeray iyo aasaas la habeeyay oo ku salaysan jawaab bixinta ardeyga.

## Ardayda Dhibaataysan:

Masiibo ma ahan anshax xumo. Waa calaamad muujinaysa in arday u baahan yahay taageero, maaha ciqaab. Gurmadka Masiibada waa in uu adeegsadaa talaabo dhaqanka ilaalinaysa uuna adeegsadaa qaabka xogta fahansan jugta maskaxda si loo xaliyo baahiyaha ardayda inta lagu jiro dhibaatada. Jawaabta shaqaaluhu waa inay muhiimada saartaa daryeelka fahansan jugta maskaxda, dejinta xaalada, iyo ku xirista khayraadka caafimaadka dhimirka.

La talinta lala yeesho Madaxa Adeegyada Taageerada Ardayga ama wakiilkiisa ayaa la doonayaa haddii ay jirto hakin kasta oo suuro gar ah khaladka heerka 2, 3, ana 4 haddii arday waajahaayo dhibaatada caafimaadka dhimirka IYO u baahan yahay caawimaad caafimaad (tusaale, dejinta dhibaatada ama isbitaal dhigis), ay ku jirto khataraha waxyeelada naftiisa, ama ay muhiim tahay in la adeegsado kooxda gurmadka xaalada degdega ah ee caafimaadka dhimirka.

Haddii hakin la amro ama aan la amrin, dhacdooyinka keenaaya caawimaada caafimaadka, adeegsiga kooxaha gurmadka xaalada degdega ah ee caafimaadka dhimirka, ama quseeya khataraha waxyeelada naftiisa ayaa u baahan abuurista qorshaha badqabka ee ardayga

.

## Ka Joojinta Fasalada3 ilaa 5

**Haddi arday ku jira fasalada 3-5 uu ka wayb qaato mid faafa ama fal dagaal oo halis ah taas oo dhaawac ku keenta ama u hanjabta badbaada carruurta ee gudaha fasalka, maamulhu waxa uu go'aamiyaa wax ka qabadka ugu habboon ilaa oo waxaa ku jira ka joojinta dugsiga ka baxda. Maamulahu waa in uu isla markaaa siiyaa wareglin qoran agaasimaha wakiilkiisa oo ku saabsan ka joojinta. Ka joojinta ka badan labba maalmood waxay u baahanahay la tashiga degmadda. Taa waxaa raaca, qorshe wax ka qabad waa in loo horumariyaa. Dhammaan tillaabooyinka macquulka ah waa in la qaadaa si waalidiinta si toos ah looga qaybgeliyo horumarinta qorshaha dhexgelinta ee lagu taageerayo guusha ilmahooda.**

## Ka Joojinta Fasalada3 ilaa 12 (Waxbarashada khaaska ah & Qorshaha 504)

**La tashi lala yeesho Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Gaarka ah ama qofka loo igmaday ayaa looga baahan yahay arday kasta oo haysta Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) wixii cayritaan ah ee suurtogalka ah ee heerka 2, 3 ama 4. La-talinta lala sameeyo Agaasimaha Caafimaadka Dhimirka ayaa looga baahan yahay arday kasta oo leh Qorshaha 504 ee cayrinta kasta oo suurtogal ah heerka 2, 3, ama 4 ee dembiga.**



# WAXKAQABADKA IYO JAWAABAHA

**FASALADA 3 ILAA 12**

## DHAQANKA HEERKA 1AAD

**Waxkaqabashada Fasalka iyo Jawaabah** Waxqabadyadan waxay ujeedadoodu tahay in la joojiyo dhaqamada aan guulaysan oo la baro xirfado si ardaydu u bartaan oo ay u muujiyaan dhaqan ammaan iyo ixtiraam leh. Macalimiinta waxaa lagu dhiirigelinayaan in ay isku deyaan wax dhigis kala duwan iyo farsamooyinka maaraynta fasalka. Macalimiinta waxaa laga filayaa in ay si wax ku ool ah uga qayb qaataan oo uga warbixiyaan walaaca shaqaalaha taageerada.

- Talooyin wanaagsan oo sheega rajooyinka
- Faalo celin wanaagsan oo gaar ah
- Dib u barid iyo dib u laylyin xirfadaha ama habka
- Fursada la kordhiyay ee jawaabta muddada tilmaanta
- Kordhi ku dhowaanta macalinka
- Dhiirigelin afka ah, din u jihayn iyo/ama sixitaan
- Xusuusiyayaasa iyo dib u jiheeyayaasha
- Shirka Ardayga/Macalinka
- Isticmaalka su'aalaha dib u soo celinta
- Shirka dib u soo celinta
- La horumari xidhiidh qoysaska
- Shirka Qoyska
- Xaashiyaha horumarka dhaqanka maalin kasta
- Abuur qorshe diiwaangelin fasalka ah
- Milicsiga howsha
- Dib u samaynta gudbida
- Caddaynta kale ee ku salaysan farsamooyinka ardayga
- Farsamooyinka sib u soo celinta/Dib u hagaajinta
- Wac Waalidka/Masuulka

**Waxkaqabashada iyo jawaabaha Kooxda Taageerada Ardayda** Waxkaqabashadan waxa hadafkoodu yahay in laga shaqeeyo nidaamka taageerada ee dugsiga iyo guriga si loo hubiyo guusha iyaddoo laga shaqaynayo in la beddelo xaaladaha ka qayb qaadanaya dhaqanada aan guusha lahayn ee ardayga. Waxay ku lug lahaan karaan sahqaalaha dugsiga iyo lo shaqeeyaha iyo shaqaalaha wakaalada bulshadda.

- Milicsiga howsha
- Iska diwaangelinta dhismaha shaqaalaha dugsiga
- Kormeerka
- Dhexdhexaadinta Isku filka
- Shirka xalinta khilaafaadka ee la dhexdhexaadiyay
- U gudbinta caafimaadka ku salaysan dugsiga ama adeeg bixiyayaasha
- Adeega dugsiga bushadda
- Qorshaha dib u soo celinta
- U gudbinta ururka bulshadda
- Adeegso taageerada shaqaalaha

## DHAQANKA HEERKA 2AAD

**Waxkaqabyada Fasalka iyo Jawaabaha** Waxkaqabadyadan waxay ku habboonaan karaan marka la diyaariyo taageerada gudaha fasalka si looga hadlo dhaqanka, laakiin dhaqanka waxa uu noqday mid joogto ah oo waxa uu ku sii socdaa in uu si xun u saameeyo waxbarasahda ardayga iyo kuwa kale.

- Talooyin wanaagsan oo sheega rajooyinka
- Faalo celin wanaagsan oo gaar ah
- Dib u barid iyo dib u laylyin xirfadaha ama habka
- Fursada la kordhiyay ee jawaabta muddada tilmaanta
- Kordhi ku dhowaanta macalinka
- Dhiirigelin afka ah, din u jihayn iyo/ama sixitaan
- Xusuusiyayaasa iyo dib u jiheeyayaasha
- Shirka Ardayga/Macalinka
- Isticmaalka su'aalaha dib u soo celinta
- Shirka dib u soo celinta
- La horumari xidhiidh qoysaska
- Shirka Qoyska
- Xaashiyaha horumarka dhaqanka maalin kasta
- Abuur qorshe diiwaangelin fasalka ah
- Milicsiga howsha
- Dib u samaynta gudbida
- Caddaynta kale ee ku salaysan farsamooyinka ardayga
- Farsamooyinka sib u soo celinta/Dib u hagaajinta
- La shaqee qoyska
- Ururi xogta ka warhaynta horumarka ee ku saabsan dhaqanka iyo wax ka qabadka la isku deyay
- Shirka Ardayga/Macalinka
- Gudbinta isu duwaha DASA
- Dib u eeg faylka waraaqaha lagu ururiyo iyohorumarka tacliimeed. Abuur hirgelin oo ka war hay qorshaha waxbarashada
- La shaqee tababaraha tacliimeed si loo dhiso awoodaha ardayga
- Abuur farsamo qorshe ku salaysan wax akhriska
- Ka war hay dhammaan qorshayaasha oo dib u qiimee labba wiig oo kasta
- Dhaqanka farsamooyinka dib u soo celinta
- Dhexdhexaadinta Isku filka
- Shirka Iskaashiga Qoyska
- Shirka Bulshadda
- Xalinta khilaafaadka

**Waxqabadyada iyo Jawaabaha Kooxda Taageerada Ardayga iyo Heerka Maamulka** Waxkaqabadyadan waxa uu ku lug leeyahay taageerada shaqaalaha ama maamulka shaqaalaha marka loo baahdo oo waxaa loogu baahanyahay oo loo qorsheeyaa si loo saxo dhaqanka iyaddoo laga hadlayo halista dhaqanka marka lagu hayo ardayga dugsiga.

- Milicsiga howsha
- Iska diwaangelinta dhismaha shaqaalaha dugsiga
- Kormeerka
- U gudbinta caafimaadka ku salaysan dugsiga ama adeeg bixiyayaasha
- Adeega dugsiga bushadda
- Qorshaha dib u soo celinta
- U gudbinta ururka bulshadda
- Adeegso taageerada shaqaalaha qimaynta Asalka sababta/qiimaynta naxdinta
- Dhexdhexaadinta khilaafka
- Maamul iyo/ama kooxda taageerada shirka
- Waxbarista/tababarka
- Maaraynta kiiska la gaaryeelay ee qorshayaasha ardayda 504 ama IEPs
- Gudbinta iyo isku duba ridka taageerada bulshadda ku salaysan wata
- Ku meelaynta Xarunta Taageerada Ardayga ee waxqabadyada dhisa xirfada eedaabta
- Ka joojinta dugsiga Gudahiisa ah ilaa 2 maalmood

## DHAQANKA HEERKA 3AAD

**Waxqabadyada iyo Jawaabaha Fasalka iyo Kooxda Taageerada** Haddii ardayga laga saaro deegaanka waxbarashada, macalimiinta/shaqaalaha waxaa laga filayaa in:

- Shirka Ardayga/Macalinka
- Shirka dib u soo celinta
- La horumari xidhiidh qoysaska
- Xaashiyaha horumarka dhaqanka maalin kasta
- Abuur qorshe diiwaangelin fasalka ah
- Farsamooyinka sib u soo celinta/ Dib u hagaajinta
- Ururo xogta horumarka ka warhaynta ee ku saabsan dhaqanka iyo wax ka qabadka ka isku deyay
- Gudbinta isu duwaha DASA
- Dib u eeg faylka waraaqaha lagu ururiyo iyohorumarka tacliimeed. Abuur hirgelin oo ka war hay qorshaha waxbarashada
- La shaqee tababaraha tacliimeed si loo dhiso awoodaha ardayga
- Abuur farsamo qorshe oo ku salaysan wax akhriska
- Ka war hay dhammaan qorshayaasha oo dib u qiimee labba wiig oo kasta
- Bilow falanqayn xudun u ah ardayga oo ku saabsan shilka (oo Dib u hagaaji, dib u soo celinaya iyo rajooyinka dib wax u barka .)
- Abuur, oo hirgeli oo ka warhay qorshe xili kala guur ee ardayga ku soo noqonaya fasalka, wareega dib u soo celinta
- Qorshee saaxiibada fasalka marka ardaygu soo noqdo

**Waxqabadyada iyo Jawaabaha Heerka Maamulka Xoogan iyo Kooxda Taageerada** Wax ka qabadkan iyo jawaabaha waxaa ka mid ahaan kara ka saarida ardaya ama deegaanka dugsiga sababtoo ah halista dhaqankala muujiyay. Muddada ka saarida ee deegaanka waxbarasho waxaa lagu xadidayaa sida suuragala ah marka si ku filan looga hadlo halista dhaqanka.

- Shirka xalinta khilaafaadka ee la dhexdhexaadiyay
- U gudbinta caafimaadka ku salaysan dugsiga ama adeeg bixiyayaasha
- Qorshaha dib u soo celinta
- Adeegso taageerada shaqaalaha qimaynta Asalka sababta/ qiimaynta naxdinta
- Maamul iyo/ama kooxda taageerada shirka
- Waxbarista/tababarka
- Maaraynta kiiska la gaaryeelay ee qorshayaasha ardayda 504 ama IEPs
- Gudbinta iyo isku duba ridka taageerada bulshadda ku salaysan wata
- Ku meelaynta Xarunta Taageerada Ardayga ee waxqabadyada dhisa xirfada eedaabta
- Ka joojinta dugsiga Gudahiisa ah ilaa 3 maalmood Qoyka/ masuulka wargelinta habka xuquuqda cadaalada ah
- Shirka aan rasmiga ahayn ee lala yeesho maamulaha iyo ardayag
- Qoyska/masuulka/ardayga/ Kooxda shirka Dugsiga
- U gudbinta kooxda taageerada ardayga ee qiimayntadhaqanka
- Codso la talinta Kooxda Takhasuska leh ee taageerada Dhaqanka ee qaraxa/dagaalka shilalka ah
- Horumari qiimaynta shaqada dhaqanka iyo Qorshaha dhaqanka Wax ka qabadka
- Ilaa 3 maalmood Ka joojin Dugsiga
- Fasalada 3-5, maamuluhu waa inuu isla markiiba u bixiyaa ogeysiin qoraal ah Wakiilka Kormeeraha Guud marka la joojiyo
- Ilaa saddex maalmood ka joojin gaadiid raaca
- Ogeysiiska iyo dukuumintiyada SRO – marka la sheego

## DHAQANKA HEERKA 4AAD

**Waxqabadyada iyo Jawaabaha Fasalka iyo Kooxda Taageerada** Haddii ardayga laga saaro deegaanka waxbarashada, macalimiinta/shaqaalaha waxaa laga filayaa in:

- Bilow falanqayn xudun u ah ardayga oo ku saabsan shilka (oo Dib u hagaaji, dib u soo celi iyo rajooyinka dib wax u barka.)
- Abuur, oo hirgeli oo ka warhay qorshe xili kala guur ee ardayga ku soo noqonaya fasalka, wareega dib u soo celinta
- Qorshee saaxiibada fasalka marka ardaygu soo noqdo

**Waxqabadyada iyo Jawaabaha Heerka Maamulka Xoogan iyo Kooxda Taageerada** Wax ka qabadkan iyo jawaabaha waxaa ka mid ahaan kara ka saarida ardaya ama deegaanka dugsiga sababtoo ah halista dhaqankala muujiyay. Muddada ka saarida ee deegaanka waxbarasho waxaa lagu xadidayaa sida suuragala ah marka si ku filan looga hadlo halista dhaqanka.

- Shirka xalinta khilaafaadka ee la dhexdhexaadiyay
- Qorshaha dib u soo celinta
- Wargelinta Qoyska/Masuulka ee xuquuqda habka cadaalada iyo shirka aan rasmiga aayn iyo ardayga
- U gudbinta caafimaadka ku salaysan dugsiga ama adeeg bixiyayaasha
- Codso la talinta Kooxda Takhasuska leh ee taageerada Dhaqanka ee qaraxa/dagaalka shilalka ah
- Horumari qiimaynta shaqada dhaqanka iyo Qorshaha dhaqanka Wax ka qabadka
- Maaraynta kiiska la gaaryeelay ee qorshayaasha ardayda 504 ama IEPs
- Gudbinta iyo isku duba ridka taageerada bulshadda ku salaysan wata
- Ganaaxa Dugsiga ee dhan illa 5 ee wata codsiga dhegaysiga Degmadda lagu codsanayo ka joojin muddo dheer ah/ meelayn kale
- Horumari, hirgeli oo ka warhay Qorshaha Xiliga kala guurka
- Fasalada 3-5, maamulahu waa in uu isla markaaba siiyaa wargelin qoran agaasimaha loo magacaabay marka ka joojinta
- Ilaa ka joojin xili dheer ah oo ka bilaabma gaadiid raaca
- Guusha dhammayska tiran ee ardayga qorshahiisa kullanka
- Ogeysiiska iyo dukuumintiyada SRO – marka la sheego

# HEERARKA WALAACYADA DHAQANADA, XAD-GUDUBYADA IYO JAWAABAHA
## FASALADA 3 ILAA 12

### HEERKA 1
***Taageerada fasalka iyo kooxda taageerada ardayga***

Laga yaabaa marka dhaqanku yahay xad gudub yar, ardaygu aanu lahay shil hore, iyo/ama wax ka qabadka lama diyaarin

### HEERKA 2
***Taageero xoogan oo shaqaalaha ah iyo maamul habboon***

Waxa ay habboonaan karaa marka taageerada la diyaariyay gudaha fasalka si looga hadlo dhaqanka, laakiin dhaqanku uu noqday mid joogto ah oo uu ku sii socday in uu si aan wanaagsanayn u saameeyo waxbarasahda ardayga iyo kuwa kale

### HEERKA 3
***Ka joojinta xiliga gaaban***

Waxaa laga yaabaa inay ku habboon tahay marka la eego halista dembiga iyo saamaynta uu ku leeyahay bulshada dugsiga, iyo/ama marka la diiwaangeliyay faragelin iyo taageerooyin la meel mariyey laakiin dhaqanka sii kordhaya ka joojinta ka baxsan dugsiga waxa la isticmaali karaa ilaa 3 maalmood

### HEERKA 4
***Codso xiliga dheer ama ka joojinta ku meel gaadhka ah***

Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanku yahay sharci-darro, uu soo bandhigo khatar soo socota oo waxyeello weyn u geysanaysa bulshada dugsiga, ama marka hab-dhaqanka ardayga si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga iyo/ama habka waxbarashada ka joojinta dugsiga ka baxsan ayaa la isticmaali karaa ilaa 5 maalmood oo leh codsiga dhageysiga Kormeeraha Guud

**Jawaabaha soo-celinta** waa in loo adeegsadaa dhammaan heerarka dhaqanka. Haddii ardayga laga saaro fasalka ama laga joojiyo dugsiga, nidaamka soo celinta waa in la qabtaa marka la soo laabto.

## XADGUDUBYADA DHAQANKA IYO HEERARKA JAWAABTA

Ka fiiri bogaga 20-21 jawaabaha iyo waxkaqabadyada suurtagalka ah

| KU-XADGUDUBKA DHAQANKA | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | SARKAALKA ISHA DUGSIGA | OGAYSIISYADA |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Maqnaanshaha** | | | | | | |
| Diidmo mar ah si looga qayb galo fasalka | ● | ● | | | | Macalinka fasalka waxa uu ku wargelin doon shaqaalaha bulshadda/soo xaadirka shaqaalaha |
| Diidmada joogtada ah ee ka qaybgalka fasalka | | ● | | | | |
| Maqnaansho joogtaha ama xad dhaaf ah oo dugsiga ah | ● | ● | | | | |
| **Daacad-darrada Tacliinta** | | | | | | |
| Been abuurka, khiyaamada ama wax ka beddelka diiwaannada | ● | ● | | | | Ardaygu waxay heli kartaa fasal dhacaya hawshiisa |
| **Dabka ulakaca wax loogu gubo** | | | | | | |
| Bilaabida dabka | | | ● | ● | ● | NYS Qaybta ka Hortaga Dabka iyo Dhismaha Xeerka 401.3 waxa uu u baahanyahay maamulada dhismayaashu in ay la soo xidhiidhaan waaxda dabka wax kasta iyo wixii dab aan la doonayn ah. Maamulayaashu waa inay buuxiyaan Foomka Warbixinta Dhacdada Dabka ee Dugsiga Dadweynaha |
| Bilaabida dab baabi inaya hanti | | | | ● | ● | |
| **Weerarka Ardayga** | | | | | | |
| Weerarka Ardayga | | | ● | ● | ● | Baaritaanka DASA waa in la tixgeliyaa. Ardayga ayaa raadsaday ama ay kula talisay kalkaalisada dugsiga inuu raadsado daryeel caafimaad oo dibadda ah. Waalidka/masuulka ayaa diidi kara daryeel caafimaad oo ka baxsan ardayga. Dukumeenti ayaa looga baahan yahay gudbinta, daawaynta, iyo/ama diidmada daawaynta. |
| Ku weerarka ardayga dhaawac | | | | ● | ● | |

| HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 |
|---|---|---|---|
| ***Taageerada fasalka iyo kooxda taageerada ardayga*** | ***Taageero xoogan oo shaqaalaha ah iyo maamul habboon*** | ***Ka joojinta xiliga gaaban*** | ***Codso xiliga dheer ama ka joojinta ku meel gaadhka ah*** |
| Laga yaabaa marka dhaqanku yahay xad gudub yar, ardaygu aanu lahay shil hore, iyo/ama wax ka qabadka lama diyaarin | Waxa ay habboonaan karaa marka taageerada la diyaariyay gudaha fasalka si looga hadlo dhaqanka, laakiin dhaqanku uu noqday mid joogto ah oo uu ku sii socday in uu si aan wanaagsanayn u saameeyo waxbarasahda ardayga iyo kuwa kale | Waxaa laga yaabaa inay ku habboon tahay marka la eego halista dembiga iyo saamaynta uu ku leeyahay bulshada dugsiga, iyo/ama marka la diiwaangeliyay faragelin iyo taageerooyin la meel mariyey laakiin dhaqanka sii kordhaya ka joojinta ka baxsan dugsiga waxa la isticmaali karaa ilaa 3 maalmood | Waxa laga yaabaa inay ku habboonaato marka dhaqanku yahay sharci-darro, uu soo bandhigo khatar soo socota oo waxyeello weyn u geysanaysa bulshada dugsiga, ama marka hab-dhaqanka ardayga si dhab ah u saameeyo badbaadada dadka kale ee dugsiga iyo/ama habka waxbarashada ka joojinta dugsiga ka baxsan ayaa la isticmaali karaa ilaa 5 maalmood oo leh codsiga dhageysiga Kormeeraha Guud |

**Jawaabaha soo-celinta** waa in loo adeegsadaa dhammaan heerarka dhaqanka. Haddii ardayga laga saaro fasalka ama laga joojiyo dugsiga, nidaamka soo celinta waa in la qabtaa marka la soo laabto.

## XADGUDUBYADA DHAQANKA IYO HEERARKA JAWAABTA

Ka fiiri bogaga 20-21 jawaabaha iyo waxkaqabadyada suurtagalka ah

| KU-XADGUDUBKA DHAQANKA | HEERKA 1 | HEERKA 2 | HEERKA 3 | HEERKA 4 | SARKAALKA ISHA DUGSIGA | OGAYSIISYADA |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **Ku-hajabaada Bambaano** | | | | | | |
| Ka samaynta hanjabaadaha ku saabsan walxaha qarxa ee dugsiga | | | ● | ● | 🔴 | |
| **U xoog sheegasho – Hadal ah, jireed iyo elektarooni** | | | | | | |
| U-xoog-sheegasho yar oo hadal ah, mid jireed ama elektaroonig ah | ● | ● | | | | |
| U-xoog-sheegashada- ku celceli beegsiga isla shaqsiga | | ● | ● | | | Baadhitaanka DASA ayaa loo baahanyahay |
| U-xoog-sheegasho halis ah-wax u dhimaysa dhibbanaha | | | | ● | 🔴 | |
| **Dareen jeedinta Fasalka** | | | | | | |
| Uma shaqeeyo si madax banaan u saameeya dadka kale | ● | ● | | | | |
| Ku tuurid walaxaha kuwa kale iyaddon dhaawac jidhka ah gaadho | ● | ● | | | | |
| Ku tuuraa waxyaabo isagoo jidh ahaan kuwa kale dhaawacayn | ● | ● | | | | |
| Wuxuu sameeyaa dhaqdhaqaaqyo/qaqalo wax ka jeediya ama carqaladeeya | ● | ● | | | | |
| **Waxyeelaynta Hantida Shakhsiyeed ama ta Dugsiga** | | | | | | |
| Waxyeelo yar(ka yar $50) | ● | ● | | | | Magdhowga waa la ogolyahay beddelka ka joojinta; magdhowga waxa uu noqon karaa qaabka mag dhow lacageed ama hawsha ardayaga ee mashruuca shaqada dugsiga |
| Waxyeellada dugsiga ama hantida qofka ($50-500) | | ● | ● | | ● | |
| Burbur hanti kasta ah (in ka badan $500) | | | ● | ● | ● | |

● SRO AYA LOO YEERI KARAA 🔴 SRO WAA LAAZIM IN LOO YEERA

# HEERARKA WALAACYADA DHAQANADA, XAD-GUDUBYADA IYO JAWAABAHA

## FASALADA 3 ILAA 12

### HEERKA 1

***Taageerada fasalka iyo kooxda taageerada ardayga***

Laga yaabaa marka dhaqanku yahay xad gudub yar, ardaygu aanu lahay shil hore, iyo/ama wax ka qabadka lama diyaarin

### HEERKA 2

***Taageero xoogan oo shaqaalaha ah iyo maamul habboon***

**Mas'uuliyadda Ka warbixinta Shaqaalaha:** Dhammaan Shaqaalaha Degmada ee awoodda u leh inay soo saaraan xayiraadahaha edaabta ah waxaa laga rajeynayaa in u qabtaan hawshaas si waafi ah, caddaalad ku dheehan tahay isla markaana sharci ahaan munaasib ah. Shaqaalaha degmaddu looma ogola in ay ku soo rogaan cunaqabatayno edaab ah oo waxaa laga rabaa in ay degdeg uga warbixiyaan xad gudubyada *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* horjoogahooda, kaas oo kolkaa ku soo rogi doona cunaqabataynta edaabta ee ku habboon, haddii sidaa la ogolaado, ama u gudbin doona arrinta xubin shaqaale kaas oo loo ogolyahay cunaqabatayn habboon.

**Saqajaannimada Dhalinyaronimo iyo Dembiileyaasha Dhalinyarada ah:**

Sida ku xusan Qaybta Xeerka Waxbarashada ee ah 3214(3)(d), oo ah haddii arday iskuulka la yimaado hub (sida ku qeexan Xeerka Waxbarashada), Taliyaha ayaa looga baahan yahay inuu u gudbiyo ardaygaas da'diisu ka hooseyso 16 jirka Garyaqaanka Xaafadda, wixii aan ka hayn ardayda da' ahaan jira 14 iyo 15 sanadood ee buuxiya dembiilenimada dhalinyaro xaaladda ah sida ku qoran Habraaca Xeerka Dembi Falka §1.20 (42). Taliyaha ayaa looga baahan yahay inuu u gudbiyo ardayda da'doody tahay 16 jirka iyo ka weyn ama arday kastoo 14 iyo 15 sanadood ee buuxiya dembiilenimada dhalinyaro xaaladda ah in loo gudbiyo hay'adaha xoojinta sharciga ee ku habboon.




## Akhlaaqda Ardayda Naafada ah

### A. Xannibaadaha la Oggol Yahay ama Iskuul Ka Saarista Ardayda Naafada ah

1. Ujeedooyinka qaybtan *Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada* qeexitaanada soo socdaa waxaa lagu dabaqaa.
   a. A "xayiraad" macnaheedu waa xayiraad waafaqsan Xeerka Waxbarashada § 3214.
   b. Ka "saarista" macnaheedu waa ka saaris sababo edaabta ah oo ku sugan meelaynta xilligaan ee ardayga waxbarashadiisa halkii ay ka ahaan lahayd isbedel meelaynta ah oo loo gudbayo Qaab Waxbarasho Kale oo Ku-meel gaar ah (IAES) oo uu amray sarkaal caddaalad ah oo dacwad dhageysi maxaa yeelay ardaygu dhibaato ayuu ku yahay naftiisa ama nafteeda ama tan kuwa kale.
   c. B. Macnaha "IAES" waxaa weeye meel waxbarasho ku meel gaar ah oo ah muddo gaareysa ilaa iyo 45 maalmood, oo aan ka ahayn meeleynta waqti xaadirkan ee ardayga waqtiga dabeecad eegista meeleynta IAES dhacday, taas oo u suura gelinaysa ardayga inuu sii wato horumarka manaahijta guud, inkastoo qaabka kale ee degsan, si loo sii wado helitaanka adeegyadaas iyo wax ka beddelistaas, oo ay ka mid yihiin kuwa lagu qeexay Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiga ah ee xilligan (IEP), kaas oo u suura gelin doona ardayga inuu gaadho ujeeddooyinka ku bayaansan Barnaamijka IEP, iyo adeegyada ku jira iyo wax ka beddelistooda si loo wacyi geliyo dhaqanka laga soo sheego barnaamijka meeleynta IAES kuwaas oo loogu talo galay inay ka hor tagaan habdhaqan xumadu inay dhacdo.
2. Shaqaalaha iskuulku wuu amri karaa xannibaadda ama ka saarista iskuulka arday itaal darri haysato meelayntiisa waxbarasho ee xilligan sida soo socota:
   a. Guddiga iskuulka, Taliyaha Sare ee (BOCES) iskuullada Degmada, Taliyaha ama maamulaha dhismaha ayaa amri karaya meelayn arday itaal darri hayso kuna dari kara barnaamijka IAES, Qaabab kale oo deggan ama xannibaad muddo aan ka badnayn shan maalmood oo xiriir iskuulka loo dhigto hadana waa inaysan ka badan inta waqti ah ee arday aan itaal darreyn la marin lahaa xannibaad la mid ah tan kan itaalka leh.
   b. Taliyaha Guud wuu amri karaa meelaynta in arday itaal darri hayso uu ku daro barnaamijka "IAES, qaab kaloo degsan ama xannibaad gaareysa ilaa 10 maalmood oo iskuul dhigasho, oo ay ku jirto muddo kastoo ardayga la soo xannibay ama iskuulka laga joojiyay sida ku xusan sadarka baaragaraafka hoose (a) kan sare dabeecad la mid ah, haddii Taliyuhu go'aan ku gaadho in aradyga ku dhaqma dabeecad keeni kareysa xannibaad iskuul isla markaana xannibaaddu ama iskuul ka saaristu aysan dhaafsaneyn inta waqti ah ee ardayda aan itaal darradu haysan loo marin lahaa isla dabeecad la mid ah.

c. Agaasimaha ama kormeerahu wuu amri karaa xayiraado dheeraad ah oo aan ka badnayn 10 maalmood oo iskuul dhigasho isla sanadkaas dhacdooyin kale oo akhlaaq xumo tan ka duwan, haddiiba aanay iskuul ka cayrintaasi aanay faxaynin isbedel meeleynta ah.

d. Taliyaha Guud wuu amri karaa meelaynta in arday itaal darri hayso uu ku daro barnaamijka IAES, oo ay go'aaminayaan Guddiga Waxbarashada Khaaska ah (CSE), isla waqti la mid ah ardayga aan itaal darridu haynin uu edaab ahaan u mari lahaa, laakiin aan ka badnayn 45 maalmood, haddii (**i**) ardaygu ku qaato ama ku haysto iskuulka hub, dhismaha iskuulka dhexdiisa ama hawl iskuulku leeyahay, am (**ii**) ardaygu si ula kac ah u haysto ama ugu isticmaalayo mukhaadaraad sharci darro ah ama iibinaya ama ku shuqlan iibinta maaddooyinka la ilaaliyo inta iskuulak la joogo, iyo dhismaha iskuulka, ama hawlaha iskuulku dhigo, ama (**iii**) markii ardaygu uu gaarsiiyo dhaawac culus oo jidhk ah qof kale inta iskuulka la joogo, ama iskuulka ku sameeyo, ama hawlaha iskuulku wado.

i. "Hubka" macnihiisu waxa uu la mid yahay sida "hubka halista ah" hoosta 18 U.S.C. § 930(g)(w) kaas oo uu ku jiro "hubka, qalab, agab, walax ama shay, mid dhaqaaqaya ama mid aan dhaqaaqayn, oo loo isticmaalo, ama si diyaar ah awood ugu leh in uu dhimasho keeno ama dhaawac jidhka oo halis ah, laga reebo...[ee] midada jeebka oo leh af aan ka yarayn 2 1/2 hiish dhererkeedu."

ii. "Maandooriyaha la xakameeyo" macnaheedu waxa weeye maandooriyaha ama walax kale oo lagu aqoonsaday shuruudo gaar ah oo Xeerka Maandooriyaha la Xakameeyo ah oo lagu caddeeyay labbadaba sharciga federaaliga iyo gobolka iyo shuruucda lagu dabaqo xeerkan.

"Maandooriyaha aan Sharciga ahayn" macnaheedu waa maandooriyaha la xakameeyo laga reebo kuwas sharci loo hayso ama lagu istcimaalo hoosta kormeerka xirfadyaqaanka daryeelka caafimaad ee ruqsada haysta ama si sharci ah loo haysto ama la isticmaalo hoose masuuliyad kale oo hoos tagta Xeerka Maandooriyaha la Xakameeyo ama sharci kale oo federaali.

iii. "Dhaawac daran oo jirka ah" waxaa laga wadaa dhaawac daran oo jirka ku dhaca kaasoo u baahan in qofka isbitaal la geeyo ama lagu daaweeyo qolka xaalada degdega ah ama xafiiska dhakhtarka waxaana ku jira, laakiin kuma koobna, dhaawaca daran ee tooreeyda ama jabka, jabka ama dilaaca lafaha ama ilkaha, jugta madaxa, jeexdin u baahan in qofka la tolo iyo dhaawac kasta oo kale oo la xariira khatarta dhimasho ama naafo.

iv. Hoos taga xaalado la cadeeyay oo looga baahanyahay sharciga federaalka iyo gobolka iyo xeerarka, iyo sarkaalka dhegaysiga aan eexda ahayn waxa uu dalban karaan meelaynta ardayga naafada ah ee goobta IAES ilaa 45 maalmood wakhtigiiba, haddii lagu joogtaynayo ardayga kiisa ama keeda meelaynta waxbarashada hadda ay si muuqata suuragal u tahay in ay ardayga ku keento dhaawac ama kuwa kale.

## B. Beddelista Go'aanka Meelaynta

1. Isbadelka meelaynta ee edbinta la xariira waxaa laga wadaa cayrinta ama ka saarida ardayda goobtiisa waxbarashada ee markaas taasoo ah midkood:

   a. a. in ka badan 10 maalmood iskuul oo xiriir ah; ama

   b. b. muddo 10 maalmood iskuul ama in ka yar haddii ardayga muteystay xayiraado is daba joog ah ama iskuul ka joojin suura gal ka dhigaysa u barasho maxaa yeelay waxay gaari karayaan in ka badan 10 maalmood oo iskuul dhigasho oo sanad dugsiyeed hadana taa la ajligeed asbaab ahaan muddad dheer ee xayiraadda ama iskuul ka joojinta kasta, isu geynta waqtiga ardayga iskuulka laga joojinayo iyo lahanka ay u leeyihiin xayiraadaha iyo iskluul ka joojinta midba kan kale kaga duwan yahay.

2. Shaqaalaha iskuulku kama xayiri karaan ama saari karaan araday itaal darri hayso haddii meel ka wareejinta xayiraadda ah ama iskuul ka joojinta ah ay natiijadeedu noqonayso isbeddal edaabta ah oo meelaynta la xiriira iyadoo lagu saleynayo jaangoynayo qaab xayiraad ah iyo iskuul ka joojin.

Hase yeeshee, tdegmadu waa ku soo rogi kartaa xayiraad ama iskuul ka joojin, taas oo si kale markii loo eego sababi kareysa isbeddal edaabta oo meelaynta ah, haddii uu go'aamiyo "CSE-gu" in hab dhaqanku aanu sal iyo raad ku lahayn itaal darrida ardayga, ama aradayga lagu meeleeyo barnaamij "IAES" ah habdhaqan ku lug leh hub, maandooriye sharci darro ah ama maaddooyinka la ilaaliyo, ama dhawaac jirka ah oo culus.

## C. Qawaaniinta Gaarka ah ee Khuseeya Xayiraadda ama Iskuul Ka Joojinta Ardayda Itaalka daran

1. Guddiga Degmada ee Waxbarashada Gaarka ah waxay:

   a. A. Qaban doonaan qiimeynno hawl xagga dhaqanka ah oo go'aan looga gaadhayo sababta ardaygu u sameynayo dhaqanka noocaas ah, iyo in lagu hagaajiyo ama dib loogu eego faragelinta dhaqanka qorsheyaasha u yaal mar alla markii degmadu ugu horreyntaba xayirayso ama ka joojinayso ardayga itaal darridu hayso iskuulka in ka badan 10 maalmood oo iskuul dhigasho sanad dugsiyeedkii ama ay ku soo rogto xayiraad ama iskuul ka baajin keenaysa isbeddal edaabta oo meelaynta ah, oo uu ka mid yahay isbeddal meeleynta ah oo la geynayo ardayga barnaamijka IAES lana xiriidha dabeecad dhaqan xumo ah oo ku leh hub, maandooriye sharci darro ah ama maaddooyinka la ilaaliyo.

   Haddiiba ay dhacdo, in arday naafada ah hayso oo ku jira qorshaha faragelinta dhaqan dabeecadeedka isla markaana uu ahaa mid laga xayiray ama laga joojiyay meeleyntiisa waxbarasho ee xilliga lagu jiro in ka badan 10 maalmood oo iskuul sanad dugsiyeedkii uu muteysto xayiraad ama iskuul ka baajin aan ku keenaynin isbeddal xagga edaabta ah meelayntiisa, xubnaha ka tirsan guddiga CSE ayaa dib u egis ku sameyn doona qorshaha faragelinta dhaqanka iyo fulintiisa si go'aan looga gaadho in wax ku kordhin ama ka dhimis ay lagama maarmaan tahay.

   Haddii ha lama xubno ka badan oo ka tirsan barnaamijka CSE uu aaminsan yahay in wax ka bedelis ama ku kordhin loo baahan yahay, iskuulka degmadu wuxuu qaban doonaa kulan guddiga CSE si wax looga beddalo ama looga dhimo

iyo fulintiisa, lana gaadhsiiyo xadka guddigu go'aamiyo inaan laga fursan karin.

b. Inay qabtaan qoraal Hadhaqanka go'aan looga qaadanayo dibna loogu eegayo kaas oo ah xiriirka u dhexeeya itaal darrida ardayga iyo dhaqanka iyadoo la waafajinayo ficilka edaabta mar alla markii ay noqoto in go'aan la gaadho si ardayga loogu meeleeyo barnaamijka IAES ha noqoto habdhaqan dabeecadeed oo la xiriira hub, maandooriye sharci darro ah ama maaddooyinka la ilaaliyo ama sababtu tahay in ardayga ku hayntiisa/teeda meesha uu kaga jiro xilligaaan waxbarashada oo halis kaga imaanayso ardayga ama ardada kale; ama go'aan laga gaadho in lagu soo rogo xannibaad kasbaysa isbeddal edaab oo meelaynta ah.

2. Waaliddiinta ardayga wajahaya in la mariyo fal edaabeed, laakiin aan lagu go'aamin inuu u qalmo adeegyada sida ku xusan barnaamijka IDEA iyo Qodobka 89 waqtiga habdhaqan xumada la joogo, wuxuu xaq u yeelan doonaa inuu ku biro ilaalinta habraac eek u habboon kuna xusan qawaaniinta iyo sharciga federaalka iyo gobolka haddii, sida uu qorayaan waxyaabaha waajibaadka ah ee xeerka federaalka iyo k an gobolka iyo habraaca jaangoynta ah, iskuulka degmadana loo arko inuu ka war helay in cannugoodu uu ahaa arday itaal darri haysay ka hor intaan lagu soo oogin falka edaabta ee dhaqan xumada ah. Haddii degmada loo arko inay ka war hayso arinkaas, ardayga waxaa loo tixgelin doonaa arday loo maleeyay inay hayso itaal darri ujeedooyin edaab leh.

a. Taliyaha, maamulaha dhismaha ama saraakiisha kale ee iskuulka ee soo roga xannibaadda ama iskuul ka baajinta ayaa mas'uul ka noqon doona go'aanka ah in ardaygu yahay arday loo maleeyay inuu yahay mid itaal daran iyo in kale.

b. Arday looma tixgelin doono arday loo maleeyay inay hayso itaal darri ujeedooyin edaabeed dartood haddii, markii la helo macluumaadka taageeraya dacwadda ah in degmadu ogeyd in aradaygu uu arday itaal darri hayso, degmadu waxay kala dooranaysa labo arimood midkood:

i. sameeyay qiimayn shakhsiyeed oo go'aansaday in ardaygu aanu ahayn ardayga leh naafanimp, ama

ii. waalidka ardayagu waxa uu diiday adeegyada; ama

iii. waalidka ardayga ma ogolaan qiimaynta ardayga si waafaqsan Qaybta 200.4 ee Xeerarka Hogaanka.

Haddii aysan wax sal iyo raad ah oo sheegaya in aradaygu uu yahay arday itaal darri hayso ka hor intaan la qaadin tillaabooyinka dishibiliin ee looga hor jeedo ardayga, ardaygu waa lagu qaadi karaa isla tilaabooyinka edaabta oo la mid ah sida loogu qaado kuwii kale oo aan ahayn arday itaal daran oo iyagu galay hadhaqan xun oo u dhigmi kara.

Hase yeeshee, haddii codsi qiimeyn shakhsi ah la sameeyo inta ardaygaas aan itaal darridu haynin lagu hayo iskuul k a sarista dishibiliinka ah, qiimeyn qoto dheer ayaa laga sameyn doonaa isla markaana loo soo gunaanadi doonaa hab raaca ku qeexan kuna habboon qawaaniinta iyo sharciga federaalka iyo kan gobolka. Ilaa laga soo gunaanado qiimeynta heerka sare ah, aradayga aan itaal-darridu haysanin ee aan ahayn arday loo maleeyay inuu qabo itaal darri ujeedooyin la xiriira edaabta awgood wuxuu ku sii jiri doonaa meeleynta waxbarasho ee ay u qoondeysay degmadu, waxaana ka mid ahaan kara xayiraad.




3. Degmadu waxay ugu geyn doontaa waalidka ogeysiisi baajinta edbinta ah muddo aan ka dambaynin taariikhda go'aanka la qaaday si wax looga beddalo meelaynta aradayga itaal darridu hayso looguna daro barnaamijka IAES ha noqoto habdhaqan dabeecadeed oo la xiriira hub, maandooriye sharci darro ah ama maaddooyinka la ilaaliyo ama sababtu tahay in ardayga ku hayntiisa/teeda meesha uu kaga jiro xilligaaan waxbarashada oo halis kaga imaanayso ardayga ama ardada kale; ama go'aan laga gaadho in lagu soo rogo xannibaad kasbaysa isbeddal edbineed oo meelaynta ah.

Ogeysiiska ilaalinta habraac ee uu qeexayo Guddoomiyuhu ayaa la socon doona ogeysiin dishibiliinka lagu joojinayo.

4. Waaliddiinta ardayga itaal daridu hayso ee muteysta xayiraadda ah shan maalmood oo xiriir ah oo iskuul ama ka yar waxaa la siin doonaa isla fursad la mid ah oo ah kulan aan rasmi ahayn oo lala yeelanayo waaliddiinta dhalay aradayda aan itaal darridu haysan sida ku taal Sharciga.

5. Dhageysiga Taliyaha ee dacwadaha ku saabsan edaabta ee lagu soo oogayo ardayda itaal darridu hayso una loona haysto xayiraad ka badan shan maalmood oo iskuul in lagu qaado waxaa lagu dabbaqi doonaa habba kala ah weji dambiilenimo iyo mid ganaax sida ku xusan habraacyada ku qoran qawaaniinta Guddoonka ee lana hal maala xeerkan.

6. Iskuul ka joojinta arday itaal darrooyin hayaan halkii laga xannibi lahaa ama loogu meelayn lahaa barnaamij IAES ah waxaa lagu fali karaa oo keliya habraaca ku habboon ee loo maro iskuul ka joojinta noocaas ah ee lagu sameynayo ardayda aan itaal darridu haysan, wixii aan ka ahayn haddaii aan shaqaalaha iskuulku ku soo rogi kareynin iskuul ka baajintaas muddo ka badan 10 maalmood oo xiriir ah oo iskuul dhigasho ama muddo sababi karta isbeddal dishibiliin oo meelaynta ah, haddii aan guddiga CSE uusan go'aansan in habdhaqanku uusan ahayn qoraal laga soo gudbiyay ardayga itaal darridiisa.

7. Inta lagu muddo kastoo xannibaad ah ama iskuul ka baajin ah, oo ay ka mid tahay meeleynta barnaamij IAES ah, ardayda qaba itaal darrooyinka waxaa la siin doonaa adeegyo sida ay qabaan qawaaniinta Guddoon ee la hal maala xeerkan.

### D. Dhegeysiga Habraaca Xaqa ah ee la Dedejiyey

1. Dhageysi dacwadda jirta ah yaa loo qaban doonaa sida ugu habboon ee uu lagu qeexay qawaaniinta Guddoonka ee la hal maala xeerkan haddii:

a. Codsiyada degmada ee ah dhageysiga si lagu helo amar ka imaanaya sarkaal xaq soor inuu ku meeleeyo arday itaal darri hayso barnaamij IAES ah halkaas oo shaqaalaha iskuulku ku andacoonayaan in ay khatar sare tahay in lagu

hayo meeleyntiisa xilligan ee waxbarasho, ama inta lagu jiro dhageysiyada dawadeed ee soo socda ee shaqaalaha iskuulku ku andacoonayaan in ay khatar sare ku tahay arday in lagu sii hayo meeleyntiisa waxbarasho ee xilligaan inta dacwadda lagu guda jiro.

**b.** Codsiyada waalidddiinta ah sida tan dhageysi go'aankii lagu sheegay qoraalka in dhaqanka ardayga itaal darrooyinkiisa, ama lala xiriirinayo wixii go'aan ah oo la xiriira meeleynta, oo ay ka mid tahay, laakiin aan ku xaddidnayn, wixii go'aan ah oo lagu meelaynayo ardayga barnaamij IAESah.

**i.** Muddada wakhtiga hakinta ee habka dacwada sharci ee la kordhiyay ama rafcaanka ku saabsan meelaynta ardayga ku jira IAES ee dhaqanka ku lugta leh hubka, maandooriye aan sharci ahayn ama maandooriyaha la xakameeyo, ama sababah halista, ama ku saabsan go'aanka in dhaqanku aanu ahayn muuqaalka naafanimada ardayga kaas lagu meelayay IAESm ardaygu waxa uu ku sii jiri doonaa IAES go'aanka hakisan ee sarkaalka dhegaysiga aan eexda ahayn ama ilaa wakhtigu ka dhaco meelaynta IAES, ilaa waalidku iyo degmaddu ay aqbalaan haddii kale.

**ii.** Haddii shaqaalaha dugsigu ku talo bixiyo in uu beddelo meelaynta ardayga ka dib wakhtiga dhacaay ee meelaynta IAES, muddada wakhti hakinta dacwad kasta oo la loolama isbeddelka lagu talo bixiyay ee meelaynta, ardaygu waxa uu ku sii jiri doonaa meelaynta ka hor ka saarda IAES, laga reebo halka ardaygu mar labbaad lagu meelaynayo gudaha IAES.

## Maxay yihiin Haraacyada Guud ee Dhageysiga Rasmiga ah ee Ardayda Qabta Itaal Darrida ama Itaal Darri Loo Maleeyay?

201.9(c) Habraacyada xayiraadaha ka badan shan maalmood oo iskuul (dhageysiga Taliyaha Sare). Dhageysiga Taliyaha Sare ee ku saabsan dacwada anshaxa ee lagu soo oogo ardayda itaal darridu hayso iyo ardayda loo maleeyo inay itaal darriyi hayso ujeedooyin la xiriira anshaxa dartood waxaa loo kala saari doonaa kuwa weji dembi yeesha kuwaa aan weji ganaax yeesha.

**GO'AAN KA QAADASHADA WEJIGA DEMBI FAL EE DHAGEYSIGA TALIYAHA SARE**

Wuxuu go'aamiyaa in ardaygu dembiile yahay laguna eedayo akhlaaq xumi

**ARDAY GO'AAN ISKA QAATAA WAA DEMBI HABDHAQAN LA ISKU EEDEYN KARO AH**

**MQORAAL KA KEENISTA KULANKA**

**OO AAN AHAYN DHOODHOOBIS**

Ardayga waxaa loo anshax marin doonaa si la mid ah sida kan aan itaal darridu haynin laakiin wxuu sii wadan doonaa inuu helo adeegyada IEP

**WEJIGA GANAAX EE DHAGEYSIGA TALIYAHA SARE**

**SARKAAL DHAGEYSI WXUU KU TALO BIXIYAA ISBEDDAL MEELAYNTA AH INUU KA SAMEEYO BARNAAMIJKA IAES**

**SARKAALKA DHAGEYSI WUXUU KU TALO BIXINAYAA IN ISKUULKA LAGU SOO LAABTO**

**QORAAL KA KEENISTA**

Dhageysiga Taliyaha sare baajintiisa

Dacwooyinka hubka wax ka dhaafistooda, maandooriyeyaasha ama dhaawaca culus ee jirka la gaarsiiyo kaas oo ku darsamaya Wejiga Ganaaxa

**KULANKA CSE AYAA LA QABTAA SI LOO QIIMEEYO IEP DA IYO BARNAAMIJKA ARDAYGA**

**ARDAY GO'AAN ISKA QAATAA DEMBI FAL HABDHAQAN LA ISKU EEDEYN KARO MAAHAN**

**KULANKA CSE AYAA LA QABTAA SI LOO QIIMEEYO IEP DA IYO BARNAAMIJKA ARDAYGA**

2. Dhegeysiga nidaamka xuquuq dhowrka leh ee la dedejiyey waa in lagu dhammeeyaa 15 maalmood oo shaqo gudahooda laga bilaabo maalinta la helo codsiga dhegeysiga. In kastoo sarkaalka dhageysigu uu dhiibi karo ballaadhin mucayin ah oo waqtigaas ah, isaga ama iyadu waa inay u soo diraan qoraal boosto go'aan ah degmada iyo waalidiinta ardayga muddo ku siman shan maalmoodoo shaqo ka dib taariikhda dhageysigii u dambeeyay, hadana waa inaan waxba dhicin wixii ka dambeeya 45 maalmood ka dib helitaanka codsiga dhageysi, iyo aan waxna lagu darin waxna laga dhimin.

## Xeerarka Ka Yaal ka saarida iyo ka joojinta

### Ardayga Markii Macallinku Ka-Saarayo Fasalka

Dhaqanka ardaygu saameyn way ku yeelan kartaa awoodda macallinku u leeyahay inuu wax dhigo isla markaana ku adkayn kartaa ardayda kale ee fasalka iyana dhigta inay wax bartaan. Badanaa sidaa markii wax u dhacaan macallinka fasalku wuu isticmaali karaa isku day dib u toosin ah iyo xusuusinno ama kulan deg ah oo wax lagu hubinayo si loo taageero araday dib u soo nooleyntiisa. Farsamooyinka kale waxaa ka mid in la siiyo arday waqti gaaban oo fasalka dibedda laga dhigo ama qaaab kale ama in la siiyo ardayga 'Dib-u-habeyn Kaar Maritaan ah' una sahlaya inuu si kooban ula hadlo xubin kooxda taageerada ardayga ah. Labadaas xaaladoodba ujeedku waa in la siiyo ardayga fursad uu dib ugu hanto isku kalsoonidiisa/kalsoonideeda iyo is-xakameyntiisa/teeda si loogu laabto fasalka iyadoo diyaar barasho loo yahay. Ficillada noocaan ahi ma keenayaan wareejin xagga dishibiliinka ah oo saameynaya ujeedooyinka xeerkaan.

Marka shaqanka ardayga ee aan haboonayn, la aqbali karin, ama aan xirfada lahayn loo aqoonsado sidii heerka 2, 3 ama 4 xad gudubka oo si halis ah u halis geliya badbaadada ardayda kale ee fasalka ama si halis ah I farageliya waxbarashada wakhti muddo la kordhiyay ka dib wax ka qabadyada kale marka la isku deyay, macalinku waa uu ka saari karaa ardayga fasalka.

**Ka hor intaan ardayga la saarin, macallinku waa inuu u sharraxaa sababta fasalka looga saarayo isla markaana u sharraxaa in ardaygu uu haysto fursad uu ku soo bandhigayo qaybta kaga aaddan baadhitaanna lagu sameeyo dhacdada 24 saac gudahood. Macallinka wax gudbinayaa wuxuu u gudbinyaa Xafiiska Tixraacyda Edaabta ardaygaas la saarayo isla markaana wuxuu haystaa ilaa maalintu ka dhammaaneyso inuu ku soo gunaanado tafaasiisha tixraaca ku xusan oo wadata dukumiintiyo wixii dhacay ah ka hor iyo ka dib markii wax dhaceen iyo sidoo kale haddii ay jiraan jawaab celinno hordhac ah ama faragelinno ah ee macallinku isku dayey ka hor intaan waxaasi dhicin. Macallin kastaa waa inuu meel dhigaa tax (ah foomka degmadu dhiibto) wixii dhammaan kiisaska ardayga looga saarayo fasalkiisa. Macallinka gudbinaya tixraaca waxaa laga sugayaa inuu sameeyo ugu yaraan labo isku day oo uu kula xiriirayo waalidka isla markaana uu gudbiyaa taariikho ama waqtiyo lagu qoray taxa xiriirka waalidka ee degmadu bixiso.**

Ardayga waxaa looga sii galbiyaa fasalka qaadashada waxaan sii galbiya shaqaalaha badbaadada, shaqaalaha dugsiga ama maamulka. Ardayga waxaa la siiyaa fursada uu ku dhammaysto Warbixinta Muujinta iyo hawlo kale oo waxbarasho muddada wakhtigiisa ama keeda gudaha Xarunta Waxka qabadka Dhaqanka. Fasalada Dugsiga Barbaarinta ilaa 5 Maamulku waxa uu go'aamiyaa wakhtiga Xarunta Waxka qabadka Dhaqanka, aan lagu talin in uu ka bato 45 miridh ilaa maamulku uu kordhiyo ka saarida fasalka caadiga ah sababtoo ah halista shilka.



Fasallada 6 ilaa 12, iskuul ka xayirriddu waa gunaanadka fasalka haddii aan maamule kordhin iskuul ka joojinta fasallada joogtada ah maxaa yeelay cuslaanta dhacdada awgeed. Dhammaan xaaladahaas oo idil, iskuul ka saarista fasallada joogtada ah waxay dhammaataa xiritaanka maalinta iskuulka. Maamulku kaas oo baadha shilka waxa uu go'aamin karaa in cawaaqibka kale loo cudur daaro (ay ka mid tahay wakhtiga loo qoondeeyay gudaha Xarunta Waxka qabadka Dhaqanka ee wax ka qabadka habboon marka wax ka qabadka la soo gabagabaynayo, ka joojinta fasalka, ama ka joojinta ka baxsan dugsiga).

**Maamuluhu waa inuu si buuxda u baadhaa dhacdada muddo 24 saacadood gudahood ah, waxaana ka mid ah dhageysiga labada dhinac oo kala ah macallinka iyo ardayga qaybta ay ku leeyihiin dhacdada. Haddii xayiraadda iskuulka dhexdiisa ah ama gudihiisa ah amar lagu bixiyo, maamuluhu waa inuu soo dhammeytiraa dukumiinti xayiraadda ku saabsan. Haddii waqti dheeraad ah Xarunta Faragelinta dhaqanka dhexdeeda looga baahdo faragelin dheeraad ah, maamuluhu waa inuu soo dhammeystiraa dukumiinti ku habboon, laga falanqoodo sababaha loogu qaadayo faragelin dheeri ah aradayga, isla markaana loo diraa waqti jadwal gareysan ardaygu inuu ku qaato Xarunta Faragelinta dhaqanka. Maamulaha iskuulku waa inuu dhigaa tixis ah dhammaan wixii iskuul ka saarisyo ah oo ardaygu soo maro. Ma jirto in arday fasalka uu ka saaro macallin fasal, waana loo fasixi doonaa inuu ku soo laabto fasalka ilaa maamulaha iskuulka ka go'aaminayo in loo baahan yahay cawaaqib marin dheeraad ah in la amro. Haddii ardayga loo diro Xarunta Faragelinta dhaqanka xiisooyin fasal oo dheeraad ah markii ardaygu si kale ahaan ugala qayb gelayo macallinka tixraaca wata, macallinka tixraaca wataa ayaa keeni doona hawlaha waxbarasho ee ardayga loo dirayo ilaa iyo inta ardayga looga oggolaanayo inuu ku noqdo fasalka.**

24 Saacadood gudahood ka dib ardayga markii la saaro, maamulaha iskuulka ama maamule kale oo degmo oo uu u xilsaaray maaluhu iskuulku waa inuu ku ogeysiiyaa waalidka ardayga/ilaaliyaha, taleefan ahaan iyo qoraal ahaan, in ardayga laga saaray fasalka iyo sababta ama sababaha ay ku dhacday. Ogeysiisku waa inuu sidoo kale ku war gelinayaa waalidka/ilaaliyaha in isaga ama iyadu ay xaq u leedahay, markii laga codsado, inay si aan rasmi ahayn ula kulmaan maamulaha iskuulka ama maamule si looga wada xaajoodo sababaha keenay iskuul ka joojinta. Ogeysiiska qoraalka ah waa in lagu soo boosto gareeyaa muddo ku siman 24 saacadood gudahood markii ardayga laga saaro iskuulka loona diraa cinwaankii ugu dambeeyay ee laga hayo waaliddiinta/ilaaliyeyaasha. Halkii macquul ah, ogeysiiska waa

in lagu bixiyaa sidoo kale taleefan ahaan haddii iskuulka horay loo siiyay taleefan qoyska ardayga ah ujeedaduna tahay si loola xiriiro waaliddiinta/ilaaliyaasha. Xiriirka la sameynayaa waa inuu ku wargeliyaa waalidka in isagu/iyadu ay codsan karaan kulan ay la yeeshaan maamulaha iyo/ama macallinka si looga falanqoodo sababaha ardayga fasalka looga joojiyay. Afar iyo labaatan (24) saacadood gudahood markii dhacdadu tahay (ilaa Isniinta xiritaanka iskuulka, haddii dhacdadu dhacdo Jimcaha), waalidka ardaygu wuu codsan karaa kulan taleefan ah ama qof ahaan ah lana yeelanayo maamulaha iskuulka iyo/ama macallin si looga xaajoodo sababaha keenay fasal ka saarista iyo tilaabooyinka xiga ee lagu xallinayo dhibaatada.

Maamulha iskuulku waa u baahan karaa in macallinkii ka eryay ardayga fasalku uu ka soo qayb galo kulanka aan caadiga ahayn ee lala yeelanayo ardayga iyo waalidka. Ujeedada laga leeyahay kulanka aan caadiga ahayn waa in sharraxaad laga bixiyo sababta ardayga loo eryay, lana hubiyo in ardayga iyo macallinka labadooduba soo bandhigaan midba dhiniciisa dhacdadu siday tahay, kana jawaabaan su'aalaha waalidka, isla markaana isku waafaqaan tillaabooyinka xiga ee ah in ardayga iyo macallinku wada xallin doonaan dhibaatada. Kulanka aan caadiga ahayn waa in lagu qabtaa 48 saacadood gudahood ardayga saaritaankiisa. Waqtiga kulanka aan caadiga ahayn waa la sii kordhin karayaa muwaafiqo ahaan waalidka/ilaaliyaha iyo maamulaha iskuulku.

Haddii kulan aan caadi ahayn lala yeesho maamule, arday, oo aan waalidku ka qayb gelin, macallinku waa inuu sahlaa kulan ah weji-ka weji uu la yeelanayo ardayga muddo ku siman 48 saacadood gudahood ardayga ku soo noqoshadiisa fasalka AMA uu diyaariyaa xubin taageerada ardayga ah inuu sahlo kulan dhex mara ardayga iyo macallinka si looga xaajoodo sababaha eryista keenay isla markaana loo sameeyo qorshe lagu hagaajinayo dhaqanka ardayga iyo dhexgelitaanka fasalka. Macallinka waxaa laga rajeynayaa inuu dhammeystiro tixista dukumiintiga kulankii dhacay isla markaana waxaa laga rajeynayaa inuu la socdo horu kaca ardayga iyadoo af haan si waqtiyeysan ah iyo jawaab celin qoraal ah.

Saarista arday itaal darri hayso, xaaladaha qaarkood sida ku xusan, waa lagu dhaqaaqi karaa isbeddal meeleynta ardayga ah. Sida la wada waafqsan yahayna, ma jiro macallin ka saari kara araday itaal darri hayso fasalkiisa ilaa u macallinku ka soo xaqiijiyo maamulaha iskuulka ma maamule kale oo iskuul in iskuul ka saaristu aanay xadgudub ku ahayn xuquuqaha uu leeyahay ardaygu sida ku xusan sharciga federaalka iyo kan gobolka ma qawaaniintaba. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka tixraac 'Ardayga Itaal Darridu Haysato" (bogagga 35-38.)



# KA JOOJINTA

**ka joojinta laga saarayo ka qayb qaadashada ciyaaraha atleetig, nashaadaadka dheeriga ah ee manhaj iyo waxyaabaha kale ee mudnaanta leh**

- Ardaygii laga saaro xayiraad ka qayb qaadashada ciyaaraha atleetigga, nashaadaadka dheeriga ah ee manhaj ama waxyaabaha kale ee mudnaanta leh xaq uma laha dhageysi buuxa in lala yeesho sida uu dhigayo Sharciga Waxbarashadu ee farqaddiisu tahay §3214. Hase yeeshee, ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha ardayga ayaa bixin doona fursad macquul ah oo lagu qabto kulan aan caadi ahayn lana yeelanaya sarkaalka degmada ee isagu soo rogaya xayiraadda si looga falanqoodo akhlaaqda iyo cawaaqibyada la marsiinayo waxay yihiin.

**Ka joojinta Gaadiid raaca**

- Maamulka dhismaha waxaa loo xilsaaray in uu ka joojiyo ardayga gaadiid raaca. Ka hor ka joojintu inta aanay dhicin, maamulku waa in uu siiyaa ardayga iyo waalidka.masuulka fursada ugu soo baxayo si aan rasmi ahayn horta maamulka si uu uga hadlo xaalada dhabta ah ee hoos taala tallaabada edaabeed ee lagu hanjabay. Marka ka joojinta gaadiid raaca ay keento ka joojinta soo xaadirka sababtoo ah fogaanta u dhexaysa guriga iyo dugsiga iyo maqnaanta kalee gaadiid raaca, dugsiga degmaddawaa in ay sameeyaan qaban qaabada si loo bixiyo waxbarashadda ardayag.

## Sababtee ayaa Ardayga loga Saarayaa Fasalka?

Haddii dhaqanka ardayga ee aan la aqbali karin ama aan xirfada lahayn loo aqoonsaday Heerka 2 xadgudubka iyo halis gelinta ardayda badbaadadooda gudaha fasalka ama si halis ah u farogeliyo muddo la kordhiyay ka dib farogelinta kale marka la isku deyay, macalinku waa uu ka saari karaa ardayga fasalka. Haddii dhaqanka ardayga ee aan la aqbali karin ama aan xirfada lahay loo aqoonsaday Heerka 3 ama 4, classroom ardayga waa in laga saaraa fasalka.

### SI DHAKHSA LEH — Dhacdada Dhacda

- Macallinku wuxuu gudbinayaa TIXRAACYAD wuxuuna haystaa ilaa dhammaadka maalinta inuu ku soo dhammeeyo tafaasiisha tixraaca.
- Ardayga waxaa laga sii gudbyaa fasalka ilaa Xarunta Waxka qabadka Dhaqanka QAADASAHADA, tababaraha taageerada, shaqaalaha badbaadada ama maamulka.
- Fasalada 3 ilaa 5, maamulka waxa uu go'aamiyaa wakhtiga Xarunta Wax kaqabadka Dhaqanka, lagu taliyay in aanay ka badan 45 miridh.
- Fasallada 6 ilaa 12, ka saaristu waa inta ka harsan xiisadda fasalka haddii aan maamule kordhin ka saarista maxaa yeelay cuslaanta dhacdada awgeed.
- Ardayga waxaa la siiyaa fursada uu ku dhamaysto WARBIXINTA MUUJINTA iyo hawlaha kale ee waxbarasho muddada wakhtiga ee Xarunta Waxka qabadka Dhaqanka.

### DHAMMAADKA MAALINTA — Go'aan Gaadhista Maamul

- Maamulaha yaa baadhitaan ku sameynaya dhacdada, waxaana ka mid ah la hadlidda ardayga, isla mrkaana wuxuu go'aamiyaa haddii cawaaqib marin dheeraad ah loo baahan yahay, oo ay ka mid tahay xayiraaddeg deg ah , oo la amri karo.
- Haddii xayiraadda iskuulka dhexdiisa ama tan iskuulka dibeddiisa ah amar lagu bixiyo, maamuluhu waa inuu soo dhammeystiraa dukumiinti xayiraadda khuseeya.
- Haddii ka cayrinta fasalka ama dugsiga oo dhan la doonaayo in lagu sameeyo arday dhigta fasalka Pre-5aad, maamuluhu wa ainuu la tashtaa Kormeeraha ama Wakiilkiisa, uuna sameeyaa diiwaanka loo baahan yahay.
- Haddii wakhti dheeraad aha Xarunta Wax ka qabadka loo qorsheeyo wax ka qabad dheeraad ah, maamulka waa in uu buuxiyaa warqaddaha habboon.

### 24 SAACADOOD GUDAHOOD — Ogeysiinta waalidiinta

- Waalidka waxaa ogeysiinaya maamulaha fasalka ka saaristana loogu sheegayaa taleefan ahaan ama qoraal ahaan. Wada xiriirka waa in lagu ogeysiiyaa waalidka in isaga/iyadu ay dalban karto kulan maamulaha ay la qaataan iyo/ama macallinka si looga falanqoodo sababaha fasalka looga saaray ardayga.
- Macallinka gudbinaya tixraaca waxaa laga rajeynayaa inuu sameeyo ugu yaraan labo isku day oo uu kula xiriirayo waalidka.

**Codsiga waalidka ee Shirka**

24 saacadood gudahood xiliga shilka (ilaa Isniinta xiliga dugsiga la xiraayo, haddii shilku u dhaco Jimcihii), waalidku waxa uu codsan karaa telefoon ama shir shakhsi ah oo lala yeesho maamulaha iyo/ama macalinka si ay ugala hadlaan sababaha fasalka looga saarayo iyo tallaabooyinka xiga ee lagu xallinayo dhibaatada.

### 48 SAACADOOD GUDAHOOD SOO NOQOSHADA ARDAYGA EE FASALKA — Kulanka Rajo Soo Celinta ee Macallinka

- 48 saacadood gudahood fasalka ardaygu markuu ku soo noqdo, macallinku waa inuu fududeeyaa kulam mid-mid ah oo uu la yeelanayo ardayga AMA uu u habeeyaa ardayga xubin taageerada ardayga ah si loo sahlo kulanka dhex maraya ardayga iyo macallinka si looga xaajoodo sababaha ardayga iskuulka looga baajinayo loona sameyn lhaa qorshe lagu hagaajinayo akhlaaqda ardayga iyo dhexgalka fasalka.
- Macallinka ayaa dhammeystiraya taxa dukumiinti.
- Macallinku wuxuu dusha kala socdaa horukaca ardayga si waqtiyaysan oraah ahaan iyo jawaab celin qoraal ah



## Ka joojista iskuulka dhexdiisa ah

- Guddiga iskuulku wuxuu aqoonsan yahay in iskuulku isku dheelli tiro baahida ardaydu ay u qabaan iskuulka inay dhigtaan iyo baahida kala dambeynta fasalka dhexdiisa ah si loo unko saaxad dhaqan suuban oo barasho. Sidaasna, Guddidu waxay ogolaadaan masuulada ardayda, xirfad bartayaal maamul, maamule ku xigeeno, maamuleyaasha, agaasimayasha fulinta iyo caawiyayaasha Kormeerayaasha iyo Agaasimaha in meeleeyaan ardayda kuwaas oo haddii kale laga joojin lahaa dugsiga iyaddoo ay natiijadu tahay Xeerka Anshaxa, Dabeecadda iyo taageerada xad gudubka "ka joojinta gudaha dugsiga." Barnaamijka xayiraadda iskuulka dhexdiisa ah waxaa dusha kala socon doona xubin shaqaale uu u xilsaaray maamulaha iskuulku.
- Ardayga lagu soo rogay ka joojinta dugsiga dhexdiisa malahan dhegeysi buuxa sida uu qabo sharciga waxbarashada §3214. Hase yeeshee, ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha ardayga ayaa bixin doona fursad macquul ah oo lagu qabto kulan aan caadi ahayn lana yeelanaya sarkaalka degmada ee isagu soo rogaya xayiraadda si looga falanqoodo akhlaaqda iyo cawaaqibyada la marsiinayo waxay yihiin.

## Ka-joojinta dugsiga

- Xayiraadda iskuulka waxaa la soo rogi doonaa iyadoo la waafajinayo loo marayo sharciga ku habboon iyo Xerkaan.
- Xayiraadda iskuulka la iska saaraa waa cawaaqib adag oo la is marsiiyo, kaas oo lagu soo rogi karo oo keliya ardayda iyagu kharbudaadda keena ama anshaxoodu uu dhinaca kale khatar ku yahay nabadgelyada, mooralka akhlaaqda, caafimaad jirka iyo maskaxda, ama daryeelka kuwa kale. Guddiga ayaa leh awoodda arday lagu xayirayo, laakiin wuxuu u xilsaaray mas'uuliyadda koowaad ee la xayiri karo ardayda Taliyaha Sare iyo maamuleyaasha iskuullada.
- Xubin kastoo shaqaale wuu ku booriyi karaa Taliyaha Sare ama maaulaha in arday la xayiro. Dhammaan wixii talo soo jeedinno ah iyo tixraacyaba ah waxaa lagu sameyn doonaa qoraal ahaan haddii aan xaaladaha hoos yaalla talo soo jeedina ama tixraacyadu amraynin digtooni dhakhso leh. Xaaladaha noocaas ah oo kale, warbixin qoraal ah waa inuu diyaariyaa dhammaadka maalinta xubinta shaqaale ee talo soo jeedinta ka dhiibaya xayiraadda.
- Taliyaha Sare ama maamuluhu, markiiay soo gaadho talo soo jeedintu ama tixraaca xayiraadda ah ama markii la habeynayo kiis xayiraad ah, ayuu isku soo aruurin doonaa xaqiiqooyinka la xiriira arrinka isla markaan ku rikoor gareynaya xaqiiqooyinkaas soo bandhigis markiiba ah, haddii laga fursan waayo.

## Muddada-gaaban (5 maalmood ama ka yar) ka-joojinta dugsiga

Haddi arday ku jira fasalada 3-5 uu ka wayb qaato mid faafa ama fal dagaal oo halis ah taas oo dhaawac ku keenta ama u hanjabta badbaada carruurta ee gudaha fasalka, maamulhu waxa uu go'aamiyaa wax ka qabadka ugu habboon ilaa oo waxaa ku jira ka joojinta dugsiga ka baxda. Maamulahu waa in uu isla markaaa siiyaa wareglin qoran agaasimaha wakiilkiisa oo ku saabsan ka joojinta. Taa waxaa raaca, qorshe wax ka qabad waa in loo horumariyaa. Waalidku waa in lagu marti geliyaa in uu si toos ah ugu lug yeesho qorshaha horumarinta wax ka qabadka si loo taageero guusha ilmahooda.

**Fasallada 6-12, markii Taliyaha ama maamulaha dugsiga oo loo tixraaco ("guddiga xayiraadda") uu soo jeediyo in xayiro ardaygii anshax xumo lagu helo shan maalmood ama ka yar sida ku xusan Xeerka Waxbarashada ee farqadiisu tahay §3214(3), guddiga xayiraaddu waa inay si dhakhsa leh u ogeysiiyaan ardayga si oraah ahaan ah Haddii ardaygu beeniyo akhlaaq xumada, guddiga xayiraaddu waa inay keenaan qeexitaan ku saleysan wixii xayiraadda loo cuskaday. Guddiga xayiraaddu waa inay sidoo kale ku ogeysiiyaan waalidka/ilaaliyeyaasha ardayga qoraal ahaan in ardayga laga yaabo in laga xayirayo iskuulka. Ogeysiinta waa in sidoo kale lagu dhiibaa taleefan ahaan haddii iskuulka horay loo siiyay taleefan lambar ujeeddo ah la xiriirista waalidka/ilaaliyaha.**

Ogeysiisku wuxuu bixin doonaa qeexitaan ku saabsan dacwada loo haysto ardayga iyo dhacdada laga keenay in xayiraad la saaro isla markaana ku war geliyaa waaliddiinta/ilaaliyeyaasha, markii la codsadana, loo oggolaan doonaa in la weydiiyo su'aalo markhaatiyaha cabanaya ee loo marayo habraaca noocan ah sida guddiga xayiraaddu u dhigaan. Ogeysiisku fursad shir aan caadi ahayn ayaa la dhigi doonaa ka hor xayiraadda haddii aan joogitaanka sii socda ee ardaygu fasalka aanu lahayn khatar ku taagan ardayda kale ama agabka, ama qas iyo lab haddidaad ah oo iska socota. Marka joogitanka sii socee ardaygu iskuul dhiganayo ay khatar socota ku tahay ardayda kale ama agabka, ama qas iyo lab socda oo haddidaad iska socota, ardayga waxaa laga yaaba in si dhakhsa leh loo xayiro isla markaana ogeysiiska iyo kulanka aan caadiga ahayn loo taabba gelin doono sida ugu macquulsan ee loo waafajin karo. Kulanka aan caadiga ahayn iyo ogeysiiskaba waxaa lagu soo qori doonaa luqadda qofku yaqaan ama qaab wada xiriir oo ay isticmaalaan waaliddiinta/ilaaliyeyaashu. Haddii kulanka aan caadiga ahayn la codsado, waxaa loo ballami doonaa marka ugu horreysa ee ay firaaqo u helaan guddiga xannibaaddu.

**Kulanka ka dib, guddiga ka-joojintu waxy si dhakhsa leh kula talin doonaan waaliddiinta/ilaaliyeyaasha go'aanka uu gaadho, kaas oo noqon kara mid qoraal ah. Guddiga ka joojintu wuxuu kula talin doonaa waaliddiinta/ilaaliyeyaasha in haddii aysan ku qanacsaneyn go'aanka isla markaana ay rajeynayaan inay sii daba galaan arinta, waa inay soo gudbiyaan dacwad qoraal ah oo racfaan Taliyaha Sare kuna soo gaadhsiiyaan shan maalmood oo shaqo, haddii aanay soo bandhigi kareyn duruufo aan caadi ahayn o ku kalifaya iyaga inay ku sii socdaan. Taliyha ayaa bixin doona go'aan qoraal ah oo khuseeya racfaanka 10 maalmood oo shaqo gudahood marka uu helo racfaanka ka dib. Haddii waaliddiinta/ilaaliyeyaashu aanay ku qanacsaneyn go'aanka Taliyaha, waa inay qoraal racfaan ah u geystaa Guddiga Waxbarashada Degmada Karaanigooda 10 maalmood oo shaqo gudahood taariikhda Taliyuhu go'aanka gaadho, haddii aanay soo bandhigaynin duruufo aan caadi ahayn oo ku kallifaya inay ku sii socdaan. Go'aanka ugu dambeeya ee uu gaadho Guddiga Waxbarashada waa laga racfaan qaadan karaa waxaana loo geysanayaa Guddoonka Waxbarashada ee Gobolka New York 30 maalmood gudahood markii go'aanku dhaco.**

# Waa maxay haraacyada iyo jadwalka ka joojinta Xiliga gaaban ama Ka joojinta Hal ilaa Saddex Maalmood ee Dibada-Dugsiga?

Haddii dhaqanka ardayga ee aan la aqbali karin ama aan xirfada lahay loo aqoonsaday Heerka 2 xad gudubka, waxay u cudur daari kartaa ha joojin xili gaaban oo dugsiga ah. Haddii dhaqanka ardayga ee aan la aqbali karin ama aan xirfada lahay loo aqoonsaday Heerka 2 ama 3 xad gudubka, waxay u cudur daari kartaa ka joojinta dugisga xiliga gol daloolooyinka ee gudaha dugsiga ama ka baxsan dugsiga.

### DHAMMAADKA MAALINTA DHACDADA

**Go'aan Maamuleed ka dib marka Shilku Dhaco**

- Heerka 3 xad gudubka waxa uu u baahanyahay in ardayga laga saaro fasalka ama goob kale.
- Maamulku waxa uu baadhaa shilka isagoo soo ururinya qaababka xaqiiqooyinka oo la hadlaaya ardayag si uu u go'aamiyo haddii shilku uu u cudur daaro: Ka joojinya Gudaha Dugsiga AMA Ka joojinta ka Baxsan Dugsiga
- Haddii uu yahay arday dhigta fasalka Pre-5aad, maamuluhu waa inuu la tashtaa Wakiilka Kormeeraha Guud.

### 24 SAACADOOD GUDAHOOD DHACDADA

**Joojinta Caddaymaha iyo Wargelinta Waalidka**

Warqaddaha Joojinta waxaa ku jira:

- Nooca lagu taliyay ee joojinta iyo inta maalmood ee loo magacaabay
- Caddayn kooban oo faahfaahin dhaqan xad gudub ah, warbixin shil, bayaano, fiidyow, sawiro, iyo agab kale oo quseeya ama caddayn
- Faragelinta lagu taliyay muddada ama ka dib joojinta

Waalidka waxaa loogu wargeliyaa telefoon ahaan iyo qoraal. Wada xidhiidh waa in uu ku wargeliyaa waalidka in iyadda/isaga uu codsan karo shir maamulku ku jiro si looga hadlo sababaha dugsi ka joojinta, tallaabooyinka laqaaday joojinta ka hor, faragelinta la magacaabay iyo ka soo noqoqdka joojita.

### 24 SAACADOOD KA DIB WAALID OGEYSIINTA

**Joojintu Waxay bilaabantaa**

Ardaygu waxa uu ka adeegaa maalmaha la magacaabay:

Dugsi ka Joojinta Gudaha Dugsiga ah AMA Ka joojin ka Baxan Dugsiga

**Codsiga waalidka ee Shirka**

Waalidkuw axay codsan karaan shir ay la yeeshaan maamulaha si ay uga la hadlaan sababaha joojinta, qaababka xaqiiqooyinka la qaaday ka hor joojinta, faroelinta ala magacaabay ka hor joojitan iyo ku soo noqodka ardayga ee dugsiga.

### 48 SAACADOOD GUDAHOOD SOO NOQOSHADA ARDAYGA EE FASALKA

**Faragelinta iyo Dib u soo galka**

- Dhammaan dugsiga waay leeyhiin farogelin xoojin ahoo diyaara taas oo ka hadasha dhaqanka keenay ka joojinta.
- Dhammaan dugsigu waa in uu ka soo noqdaa borotakoolka joojinta ee u diyaar ah ardayda ka soo noqotay a dugsiga ka axsan suspension.

**Rafcaaanka ku socda Kormeeraha**

Waalidka ama ardaygu waxa uu usoo gudbin karaa rafcaan qoran kormeeraha shan maalmood oo shaqo gudahood ka joojinta. Agaasimaha waxa uu soo saaraa go'aan qoran oo ku saabsan rafcaanka ku jira ganacsiga helitaanka rafcaanka. Ka eeg habka Rafcaanada Bogga 46.

## Barnaamijyada Beddelka ah

Markii arday ku jira da'da iskuul dhigashada khasabka ah laga xayiro iskuulka sida ku qoran farqadda Xeerka Waxbarashada lifaaqiisu yahay §3214, maamulaha iskuulka ayaa qaadi doona tillaabooyin lagu siinayo ardayga barnaamijyo waxbarasho socota ah iyo nashaadaad, qaabab kale oo wax lagu barayo, ardaygaas. Qaababka kale ee wax lagu barayo waxaa siin karaya shaqaale ka tirsan iskuulka, ama goob kale ayaa lagu siinayaa, daraasad guriga ah, ama barnaamij daraasadeed xayiraad iskuul ah. Qaababka kale daraasaddu waxay u bilaabmi doonaan sida ugu dhakhsaha badan ee lagu qaban karo, laakiin mar aan ka dambeynin maalinta saddexaad ee xayiraadda. Habka daraasadda siinta kale waxay ku habboonaan doontaa duruufta (sida, muddada-dheer, muddada-gaaban, xayiraad iskuulka dhexdiisa ah, ama fasal ka saaris). Si kasta ha noqotee, waxay u taallaa maamulaha iskuulka iyo shaqaalaha dhismaha inay hubiyaan in daraasad siinta kale uu helo arday kastoo u qalma, isla markaa arday walbaa uu yeesho koorso loo qoondeeyo oo hawlqabad una diyaar ah inta uu ka maqan yahay ama xayiraaddu saaran tahay; isla markaana markii uu ugu soo laabto fasalka si joogto ah shaqooyinkaas loo diray in la soo gacan geliyo, laguna soo xareeyo isla waqtigii loo cayimay fursado soo ceshi ahaan marka xaalku yahay maqnaansho loo meel dayayo. Markii arday da'da khasabka ah ku jira laga xayiro iskuulka in ka badan shan maalmood, Taliyaha ayaa ka gaadhi doona go'aan kama dambays ah oo la xiriira in lagu meeleeyo meel kale. Waxaa lagu waajibayay Degmadda in ay bixiso waxbrasho kale ardauda da'da soo xaadirka Waajibka ah. Meelaynada Gaarka ah waxaa la socon doona Gudiga Meelaynta Gaarka ah (APC) kaasoo baaraaya codsiyada Meelaynada Gaarka ah hubiyana in ardayga laga saaro waqtiga saxda ah Meelaynadaas.

### Xayiraadda Ardayga ee ku Aaddan Isbeddal Kaloo Wanaagsan (PASS):

- Barnaamijka PASS waxaa laga heli karaa maalinta saddexaad ee ku xigta taas oo isaga ama iyadda laga joojiyay dugsiga. Ardaydu fursad ayey u haystaan inay isku soo dayaan soona dhammeysitraan shaqada inta ay ku xanniban yihiin barnaamijka. Iskuullada intooda badan, barnaamijka PASS wuxuu ka jiraa maalin walba iskuulka ka dib. Barnaamijka "PASS" waxaa la siiyaa labo saac maalintii ardayda waaweyn iyo hal saac oo la siiyo ardayda iskuulka hoose. Ardayda waxaa la siinayaa fursad ay uga qayb qaataan Barnaamijka "PASS" xilliga ay xayiraadda ku jiraan.

### Ka joojinta dugsiga ee muddada-dheer (in ka badan shan maalmood).

- Marka Kormeeraha Guud, ama wakiilkiisa, uu go'aamyo in xayiraad ka badan shan maalmood la amri karo, isaga ama iyada ayaa bixin doona ogeysiis macquul ah sienna doona ardayga iyo waaliddiinta/ilaaliyeyaasha xaqa ay u leeyihiin dhageysi xaq ah. Xilliga dhageysiga ardaygu xaq wuxuu u yeelan doonaa inuu metelo la taliye, xaqna u yeesho su'aalaha markhaatiga ah ee looga hor jeedo iyo wixii kaloo caddeyn ah oo isagu wakiisho. Haddii Guddigu go'aamiyo in la qabto dhageysiga xaqa ah isla guddigu, waa inuu bixiyaa ogeysiinta loogu baahan yahay dhageysiga.
- Taliyuhu shakhsi ahaan wuu u go'aansan karaa dacwo wadista ama wuu, awoodda uu haysto awgeed, u magacaabi karaa sarkaal dhageysi inuu qabto dhageysiga dacwadda. Sarkaalka dhegaysiga waxaa loo ogolaan doonaa in maamulo dhaaraha oo uu soo saaro yeedhmo maxkamadeed oo a xidhiidha dacwada isaga ama iyada hortiisa. A record of the hearing shall be maintained, but no stenographic transcript shall be required. Cajalad ku duubis ayaa loo arkaa inay tahay duubista habboon. Sarkaalka dhageysi ayaa raadin doona waxa dhabta ah iyo talo soo jeedinnada ku habboon tillaabada la qaadayo ee dishibiliin loona geynayo Taliyaha. Warbixinta sarkaalka dhageysi waxay ahaan doontaa talo bixin keliya, Taliyuhuna wuu aqbali karaa dhammaan ama qayb ka mid ah. Taliyuhu wuxuu qaadan doonaa go'aamin qoraal ah.
- Racfaan go'aanka uu gaaray Taliyuhu laga qaadanayo waxaa loo geysan karaa Guddiga. Guddigu wuxuu ku qaadi doonaa go'aankiisa isagoo ku saleynaya waxyaabaha duuban ee hor yaal. Dhammaan racfaannada ku socda Guddigu waa inay ahaadaan kuwa qoraal ah isla markaana la gaadhsiiyaa Karaaniga Degmada 10 maalmood oo shaqo gudahood taariikhda go'aanka uu gaadhay Taliyaha Sare, haddii aan waaliddiinta/ilaaliyeyaashu aanay muujin duruufaha aan caadiga ahayn ee ku kallifaya inay sii wadaan racfaanka. The Board may adopt in whole or in part the decision of the Superintendent. Go'aammada kama dambaysta ah ee Guddiga waa laga racfaan qaadan karaa loona geyn karaa Guddoomiyaha Waxbarashada ee Gobolka New York muddo ku siman 30 maalmood gudahood markii go'aaku dhaco.



# Waa maxay Haraacyada iyo Jadwalka Ka-joojinta Shanta-Daalmood ah iyo Codsiga Dhageysiga kormeeraha-guud?

Haddii ardaygu ta aan habboonayn, la aqbali karin ama dhaqanka xirfad la'aanta ah loo aqoonsado sidii Xadgudubka Heerka 4aad u cudur daaraya habka ka joojin xili dheer oo ka badan shan maalmood ama cawaaqib ay degmaddu magacowdo, hababka soo socda iyo jadwalka wakhtiga waa in la raacaa.

### SHILKA KADIB

**Xilsaarista Ka joojinta Shan-Maalin ee Bilawga**

Xadgudubka heerka 4aad waxa looga baahan yahay in arday isla markaaba laga saaro fasalka.

Dhammaan qaababka loo baahanyahay hawsha ka joojinta ee muddada gaaban waa in ay raacdaa si loo magacaabo shan maalmood oo ka joojina ka hor habka Dhegaysiga degmaddu intaanu bilaaban. (Jaantuska ka fiiri bogga 43.)

### 5 MAALMOOD GUDAHOOD BILOWGA KA JOOJINTA 5 MAALMOOD

**Codsiga Dhageysiga Kormeeraha Guud ee Dugsiga**

Gudbinta warqaddaha Codsiga Dhegaysiga:

- Foormka Codsiga Dhegaysiga Kormeeraha
- Caddayn kooban oo ay ku jirto faahfaahinta xadgudubka dhaqanka, warbixinta shilka, bayaanka markhaaiga, fiidyow, sawirom iyo wax agab kale oo la xidhiidha ahama markhaati
- Warqadda joojinta oo loo diray waalidka
- Faragelinta lagu taliyay muddada ama ka dib joojinta

Waalidka waxaa loogu wargeliyaa telefoon ahaan iyo qoraal. Wada xidhiidhku waa in uu ku wargeliyaa waalidka in isaga/iyaddu ay codsan karaan shir lala yeesho maamulka si looga hadlo ka joojinta.

### AFARTAN IYO SIDEED 48 SAACADOOD GUDAHOODEE HELIDA CODSIGA DHAGAYSIGA

**Kormeerka Go'aanka iyo Wargelin Waalidka**

- Ka dib qiimaunta macluumaadka Codsiga Dhegaysiga, agaasimaha ama kiisa/keeda wakiilka ka ah waxa uu diidaa ama ogolaadaa Codsiga Dhegaysiga xiliga dheer ee ka joojinta dugsiga.
- Haddii la ogolaado Codsiga Dhagaysiga, ogaysiis qoran oo Dhegaysiga Kormeerka ah ayaa loogu diraa waalidka boos degdega ah 48 saacadood gudahood helitaaka warqaddaha Codsiga Dhegaysiga.
- Ogaysiiska qoran waa in ay ku jiraan wakhtiga, taariikhda, iyo goobta Dhegaysoga Kormeerka; faahfaahinta dhaqanka xad gudbka ah ee lagu eedaynayo, iyo faahfaahinta shilka iyo tallaabooyinka ardayga; waalidka iyo xaqa ardayga in uu ka wakiil noqdo golle, caddayn xaadir ah, iyo markhaatiga su'aasha.

### 5 MAALMOOD GUDAHOOD ARDAYGA WIXII U HORREYAY EE AH XAYIRAADAHA

**Dhageysiga Kormeeraha Guud**

- Ka qayb galayaasha waxaa ku jira: Sarkaalka Dhegaysiga, maamulka dugsiga ardayga, waalidka iyo ardayga, iyo markhaatiga laga codsaday dugsiga ama waalidka.
- Wejiga 1 ee Dhegaysiga, Sarkaalka Dhagaysigu waxa uu go'amiyaa haddii ardaygu uu dambiile yahay ama aanu bari ka yahay dhaqanka xad gudubka.
- Wejiga 2 ee Dhegaysiga, Sarkaalka Dhegaysigu waxa uu ku taliyaa cawaaqibka iyo wax ka qabadka in loo qorsheeyo.
- Agaasimaha waxa uu samayn doonaa go'aanka u dambeeya oo waxa uu ku wargelin doonaa waalida qoraal ahaan.

**Racfaan**

Waalidka ama ardaygu waxa uu u soo gudbin karaa rafcaan qoran 10 maalmood gudahood Guddida Waxbarashadda Gobolka New York Maamulaha Waxbarashadda 30 maalmood oo shaqo gudahood. Ka eeg habka Rafcaanada Bogga 46.

# Waa maxay Hannaanka Racfaanka iyo Jadwalka Go’aanka Dhegeysiga Kormeeraha Guud?

Waalidka, masuulada, ilaaliyayaasha, dadka haysta daryeelka, ilaalinta ama maamulka ilmaha, ama ardayda ka wayn 18 waxa uu noqon karaa codsade. Waa in aad ka fekertaa gudbinta marka aad rumaysantahay in aanad helin ogaysiis sax ah oo dhegaysi edaabeed ah, sharciya ku saabsan habka dhagaysiga oo aan la raacin (tusaale ahaan, laguuma ogolaan in aad wax su’aasho markhaatiga warbixinta kugu lidka ah adiga jeedinaya), ama aad rumaysantahay in go’aanka aanu taageerin caddayn ama ay tahay xad gudub dharciga ah. Laguma ciqaabi karo soo gudbinta rafcaanka. Waxa muhiim ah in la xasuusto inaadan soo gudbin caddayn cusub oo taageeraysa racfaankaaga.

## RACFAAN KA QAADASHADA DHAGEYSIGA KORMEERAHA-GUUD

**10 Maalmood Gudahood Ka dib Helida Ogaysiiska dhagaysiga**

- Rafcaan waa in qoraal lagu soo gudbiyaa (warqad waa la aqbali karaa) waana in loo soo gudbiy Karaaniga Dugsiga Degmadda ee Syracuse.
- Warqada rafcaanka waa in ay ku qornaata sababo gaar ah oo aad ugu malaynayso in go’aanka Kormeerku aanu caddaalad ahayn, aanu taageersanayn caddayna la soo gudbiyay iyo Dhegaysiga Kormeerka, ama aanu sharcigu ogolayn. Guddida waxbarashadu waxay qiimaysaa oo keliya caddaynta la soo gudbiyay dhegaysiga, oo kama fekeri doonto caddayn cusub ama muran.

## RACFAAN KA QAADASHADA GO’AANKA GUDDIGA WAXBARASHADA

**30 Maalmood Gudahood ka dib Helida Go’aanka**

- Codsadahu waa in uu soo gudbiyo oo keeno Ogaysiiska Codsiga, Codsi, iyo wixii Dhaar taageeraysa. Codsadahu waa in uu u yimaado Karaaniga Degmada, Xubin Guddda Waxbarashadda ah, iyo qofka loo magacaabay Xafiiska Kormeerka Syracuse.
- Shan (5) maalmood ka dib codsiga , codsadaha waa in uu diraa ogeysiiska asalka ah, codsi , iyo warqadaha taageerada ee Waaxda waxbarashada ee NYS. Xafiiska la taliyaha wata jeeg $20 oo la siinaayo Waaxda Wasaarada Waxbarashada, Foom ayaa la soo gudbin karaa laga codsanayo Giddoomiyana in uu dhaafk kharashka udbinta.
- Codsiga waxaa ku jira sharax gaar ah oo go’aanka la gaadhay ah iyo sababata loo rumaysanyahay in aanay xaq ahayn, aanay taageerin caddayntu lagu soo bandhigay Dhagaysiga Kormeerka, ama aanay ogolaan sharcigu. Codsaduhu waa in uu sidoo kale sharaxaa waxa debcin ah ee isaga.iyada uu waydiisanayo Guddoomiyaha.

## DIB U EEGIDDA GO’AANKA GUDDOOMIYAHA EE MAXKAMADDA NYS

**120 Maalmood Gudahood ka dib Helida Go’aanka Guddomiyaha**

- Codsaduhu waxa uu waydiisan karaa Maxkamada Sare ee Gobolka New York in ay soo farageliso qodobka 78 ee dacwada (sidoo kale loogu yeedhi “Dacwad Gaar ah”).
- Qodobka dacwada 78 aad buu u murugsanyahay oo caawimo sharci ayaa si aad ah loogu talinaya ka hor noocan habaynta ah.
- Hal dood ah oo la soo qaadi karo waxa weeye in Guddoomiyuhu aanu raacin sharcigeedii marka uu sameeyay go’aanka. Labba ka mid ah doodu waa 1) haddii go’aanka waxa uu ahaa “mid aan laga fiirsan oo la beddelay” iyo 2) haddii go’aanka aanu taageerin “caddayn muuqata.”

# Waa maxay Jadwalka Kala-guurka ee Kusoo laabashada Ardayga ee Dugsigu kadib Ka-Joojin Muddada-Dheer ah ama Wakhtiga Meelaynta Beddelka ama Xarumaha Caruurta?

Si loo hubiyo kala-guurka ugu fican ee ardaygu dib ugu soo noqonayo barnaamijka dugsiga ee caadiga ah, qaab dhismeedyada iyo nidaamyada soo socda waa in la diyaariyaa.

## LABA TODOBAAD KA HOR KALA-GUURKA

### Xiritaanka iyo Hanuuninta ee Ku-helidda Dugsiga

- Tababaraha Kala-guurka waxa uu ardayga kula kulmaa shirka milicsiga/qiimaynta nafsiga.
- Tababaraha Kala-guurka waxa uu la kaulmaa ardayga, waalidka, iyo maamulaha dugsiga qabanaya si looga hadlo hadafyada wareejinta iyo farsamooynka la isaga ilaalinayo duruufaha keenay ka reebida xiliga dheer ee dugsiga.
- Tababaraha Kala-guurka waxa uu la kulmaa ardayag, waalidka, iyo shaqaalaha taageerada ardayga si loo horumariyo qorshe guul dhammaystiran oo ardayga ah oo loo helo waxa warqaddo dusgi oo muhiim ah kuwaas oo caddayn lahaa rajooyinka iyo taageerada wareejin guul leh.

## MAALINTA U HORAYSA EE KU SOO NOQOSHADA U DIRISTA DUSGIGA

### Soo noqoshada Ardayga

- Arday waxaa loo magacaabaa nidaamka xiliga kala guurka habaynta inta uga hadhsan xiliga waxbarasho Nidaamka habaynta ardayga waxa uu u kaxeeyaa ardayga fasaladoo dhan maalinta u horaysa.
- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxa uu fiiriyaa ardayga dhamaadka maalinta si uu u milicsado maalinta ugu horeysa oo uu dejiyo yoolalka toddobaadka.

## LABBA TODOBAAD EE U HOREEYA EE U DIRSTA DUGSIGA

### Horumarka Ardayga

- Macalinka ardaygu waxa ay diiwaan geliyaan diiwaangelinta warbixinta bixida iyo imaanshaha labbada wiig ee u horaysa.
- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxa uu hubiyaa in ardaygu ka qayb galo wax dib u soo gelid ah/hawlo waciy gelin ah oo uu bixiyo dugsigu.
- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxa uu diiwaan geliyaa macalimiinta ardayga maalin kasta si ay uga bixiyaan faalo celin ku saabsan xiliga kala guurka ardayaga.
- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxay ka qayb qaataan diiwaan gelinta Gelinka Hore iyo Gelinka Dambi bixida maalin kasta labbada wiig ee u horaysa.
- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxa uu la xidhaa waalidka ugu yaraan inta lagu jiro mid kastoo ka mid ah labbada wiig ee u horeeya si looga hadlao xiliga kala guurka ee soo noqoshada ardayaga.

## BAADHITAAN TODOBAAD KASTA AH OO U DIRISTA DUGSIGA AH

### Horumarka Ardayga

- Tababaraha Kala-guurka ee ardaygu waxa uu diiwaangeliyaa si wiig kasta ah ardayga inta ka hadahay simistarka oo waxa uu hubiyaa in ardaygu uu helo taageerada adeeg kasta iyo horumarka fursadaha dhalinyarada taas oo taageeri doonta xaga dugsiga.

## Ka-joojinta Joogtada ah

Ka-Joojinta joogta ah ayaa loo hayaa daruufaha gaarka ah oo ay ku jiraan, laakiin aanay ku xadidnayn, halka dhaqanka ardaygu ay halis ku yihiin nafta badbaada iyo fayo qabka ardayda kale, shaqaalaga dugsiga ama qof kale oo si sharci u joogo dugsiga dhismahiisa ama u yimid hawl dugsi.

# QAAMUUSKA EREYADA

**Daacad daro Waxbarasho** waxaa ka mid ah qoraal qofka kale iska sheegasho; naqilashada qof kale shaqadii; beddelka diiwaanka iyo qishka iyaddoo la bixinayo, la helayo ama la eeganayo jawaabaha su'aalaha ama walxaha imtixaankaanka ama shay la diray oo madax banaan, isticmaalaya qoraal, warqaddo, ama buuggaag qoraal ah inta lagu jiro imtixaanka ogolaansho la'aan xubin shaqaalqha ah.

**Arson** Shidista dab ama burburinta hantida ka dhalata dabka la shiday

**Weerar** Arday ama ardayda ugu booday arday kale hab xoog ah, cadaawad ah ama dagaal ku dhisan ayadoon cidna daandaansan.

**Dhaqanka Xadgudubka** Dhaqanka ardayda aan habboonayn (aan ku habboonayn dhismaha dugsiga), aan la aqbali karin (aan laga aqbali karin dhismana), ama aan xirfad lahayn (dhaqan aan weli la baran ama dhaqan loo muujiyay si xirfad la'aana) taas oo u cudur daar samaysa faragolin la saadaalin karo oo wakhti habboon iyo cawaaqib.

**Hanjabaad Bambaano** Halis Qarax Samaynta hanjabaado ama bixinta xog been ah oo ku saabsan jiritaanka walxo qarxaya ama qalab gudaha dugsiga dhismahiisa sabab la'aan qoraal ahaan, qof ahaan ama telefoon, ay ku jirto dirista fariimo.

**Handadaad** Falal lagu soo celceliyay oo ula kac ahaan loo sameeyay. Si loo kasay ama ula kac ah, shakhsiyaad ama shakhsi, beegsada oo u waxyeeleeya qof kale jidh ahaan ama caadifad ahaan. Handadaad waxaa sifo ah isku dheeli tirnaan awoodeed oo u dhexaysa labba arday. Haddii ardaydu ay si siman uga qayb qaataa khilaaf qaylo ah, tani maaha xaalad handadaad ah, laakiin taa bedelkeed waxaa looga fekeraa "khilaaf" u dhexeeya labba arday. Maxaayeelay falka handadaadu waxa uu ku lugyeeshaa falal soo noq noqda oo loola jeedo in lagu beegsado, ama lagu waxyeeleeyo qof, way ka duwantahay hal mar "Weerar gaadhay Arday."

**Goobjooge** Qof la joogay marka la gaysanaayay falka gardarada ah, laakiin aan waxba samayn si uu u joojiyo. Inta badan ilmaha goobjooga u ah falalka xaasidnimo kama ahan ka aamusida dhacdada, laakiin waysan aqoon awooda ay u leeyihiin inay caawiyaan.

**Sawirada Galmada Ilmaha** Sawira Anshaxa xun ee laqaaday carruurta Sawiro muujinaya galmo oo carruurta ah (ka yar 17 sanadood)

**Midabka** Kelmaddu waxay tixraacdaa midab gaar ah oo maqaarku leeyahay, gaar ahaan tilmaan ama tilmaan suuragal ah oo sinjiga.

**Adeega Bulshadda** Adeeg lacag la'aan ah ee dheefta dad waybaga oo lagu soo bandhisgi sidii (ama dhammaan) faragelinta la xidhiidha dhaqan xadgudub oo gaar ah.

**Cawaaqibka** Waa natiijada ka dhalata ficil ama xaalad.

**Dhaqanka dambiilaha ah** Wax dhaqan ah oo looga fekero xad gudub oo ku lid ah demadda, gobolka, ama sharciyadda federaaligu.

**Jairsta Xiisadda** Maqnaansho aan la ogolayn oo fasalka khasabka ah ama hawsha dugsia ama shaqo.

**Waxyeelada Hantida** Waxyeelada, burburinta iyo fool xumaynta hantida uu dugsigu leeyahay ama kuwa kele.

**Qalab halis ah** Qalab kasta oo loo istcimaalay sidii hub in ay jidh waxyeesho, ay ka mid yahay shay kasta ama qalab keeni kara waxyeelo ama loo isticmaalo in wax lahu yeelo ku kale; tan waxaa ka mid ah laakiin aan ku xadidnayn, walxaha laysarka leh, qalin beesalada iyo maqasyada.

**Diidmada Gaadiid Raaca Baska** Ka joojinta ku meel gaadhka ah ama joogtada ah ee gaadiid raaca baska.

**Diidmada Sharafta Darawalnimada** Ka qaadista ogolaanshaha in uu ka xeeyo hantidda dugsiga muddo wakht gaara ah.

**Isku duwaha Xeerka Sharafta** Shaqaale ay magacaabeen Guddida kuwaas oo ku suga u hogaansanaan buuxda sharafta Dhammaan Xeerka Ardayda oo sidoo kale u magacaaba Isuduwaha Xeerka Sharafta dugsi kasta kaas ooisku duwa oo maamula dhammaan xogaha qoran, habbaynta, tallaabooyinka dugsiga iyo faragelinta ku lug leh fulinta sharafta dhammaan Xeerka Ardayda.

**Naafanimo** (a) naafanimo jireed, maskaxeed ama caafimaad oo ka timaadda xaaladaha anatomical, physiological, genetic or neerfaha taas oo ka hortagaysa jimicsiga shaqada jidhka caadiga ah ama ay muujin karto daaweyn caafimaad ahaan la aqbalay farsamooyinka ogaanshaha shaybaarka; ama (b) diiwaanka naafanimadan oo kale; ama (c) xaalad ay dadka kale u arkaan inay tahay naafo.

**Edaabta** Nidaamka ama sharciyada dhaqanka, tababarka, dhaqanka, iyo waxbarashadda taas oo taageerta oo jgtaysa dhaqan suuban iyo edaab shakhsiyeed.

**Edaabta iyo Kooxda Nidaamka Taageerada Ardayaga** Kooxda waxaa ka mid ah dhammaan shaqaalaha taageerada (ku xigeenada, la taliyayaasha, shaqaalaha bulsadda, u doodayaasha dhalinyarada, maareeyayaasha kiisaska, iwm.) kuwaas oo wada jir u wada shaqeeya sidii koox isku dheehan wadaagaya xog, isticmaalaya luqad guud, isku ahdaaf ah iyo isku hab edaabta iyo taageerada ardayda, oo isku qaab u shaqaynaya taas oo taageerta qof ahaan, bulsho ahaan, tacliin waxtar leh iyo dhaqan ardayda oo la horumariyay.

**Takoorka** Takoor ku lidka ah arday kasta oo ka yimid arday ama arday iyo/ama shaqaale ama shaqaaleyaal jooga Hantidda Dugsiga ama Hawsha Dugsiga, ay ku jirto, laakiin aanay ku xadidnayn, takoorka ku salaysan sinjiga dhabta ah ee qofka ama muuqda, midabka, miisaanka, asalka wadanka, kooxda isir, diinta, diinta uu ku jiro, naafanimada, qaabka galma ee qofka, jinsiga, sinjiga ama koox kale oo dhowran.

**Qaybinta** U wareejinta haysashaa khamarada, maandooriyaha ama waxyaabaha la nuugo qof kale iyaddoo lacag lagaga beddelanayo ama aan lagaga beddelanayn.

**Xoog sheegashada Elektarooniga ah iyo Dhibaataynta** Isticmaalka macluumaadka iyoo wada xidhiidhka teknoolajiga ah iimayl, telefoonka gacanta, bayjarada, qololka internetka lagu sheekaysto, fariimaha moobilka lagu diro, fariimaha degdega ah, barta intenetka shakhsiyeed ama wax kastoo kale si loo taageero mid ula kac ah, lagu soo celceliyo iyo dhaqan cadaawad ah uu ku kaco qof ama koox ay tahay ujeedadeedu baqdin gelin jidhka ah ama maskaxda ah iyo/ama waxyeelaynta kuwa kale. Handadda elektarooniga ah ama handadaada waxaa ka mid a, laakiin kuma xaddidnayn, si xun u isticmaalka soo socda ee faramada casriga ah:

- dhibaataynta, ka cadhaysiinta, baqdin gelinta, hanjabaada, ama ka arga gixinta arday kale iyaddoo la isticmaalaya qalab teknoolajiya, sida dirista ama soo gelin internetka qoraal aan habboonayn, ama iimaylo xaqiraad ah, fariima degdeg ah, sawiro dhijitaal ah, ama sawirada, ama bog internet ah soo gelin (ay ka mid tahay bogga internetka gaarka ah);
- diritaanka mid liidata ama ciyaal suuqnimo aha ma afariimo hanjabaad ah ama sawiro;
- soo gelin bogga, xog xasaasi aha, gaar ah oo ku saabsan qof kale;
- iska dhigid qod kale si qof kaa wax xun looga dhigo.

U-xoog-sheegashada ama dhibaataynta elektarooniga ah ee ku lug leh ardayda Degmadda waxay ka dhici kartaa dhismaha dugsiga, ana meel ka baxsan dhismaha dugsiga. Waxay ku lug yeelan kartaa isticmaalka ardayga ee nidaamka internetka degmadda, ama isticmaal arday adeegyada shakhsiyeed ee dhijitaalka oo ay ku jirto, laakiin aanay ku xaddidnayn.

Shilalka looga fekero in ay yihiin handadaad electarooni ama dhibaatayn waxa yeelan karaan wax ka mid ah saamayntan:

- Ku sababaya waxyeelo jidheed, bulsheed/qaraabeed, caadifadeed ama maskaxeed ardayga;
- Dhigista arday baqdin macquul ah, dareeneed ama waxyeelo maskaxeed;
- Placing a student in reasonable fear Dhigista arday baqdin macquul ah oo waxyeelo, ama khasaare, hanti qofeed; iyo/ama
- Faragelinta hawlaha waxbarasho ee ardayga iyo/ama u diidista ama xaddaynta kartidda ardayga in uu ka qayb galo ama helo dheefaha, adeegyada ama fursaddaha barnaamijyada Degmadda.

**Tiknoolajiga Elektarooniga** Qalabka iyo aaladaha sida telefoonka gacanta, kombuyuutarka iyo taableetka.

**Waxyeelada Caadifadeed** Macnaha guud ee handadaada ama dhibaatayntu macnaheedy waa dhibaatayn dareenka fayo qabka caadifadeed ee ardayga iyaddo la abuurayo deegaan colaadeed oo dugsiga ah kaas oo aad u daran ama meel kasta ah taas oo si aan macquul ahayn ama la taaban kar u faragelisa waxbarashada ardayga.

**Shaqaale** Qof kastoo ka helaya magdhow dugsiga degmadda ama shaqaale adeeg bixiye qandaraas haysta ama shaqaale la dhigay dugsiiga hoosta barnaamijka caawinta guud ee shaqaalaha, raacsan sagaalka B ee qodobka shan ee Sharciga Adeega Bulshadda Gobolka New York, oo waafaqsan shurrudaha cinwaanka shuruudaha adeegyada degmo sidan ah, ardaydeeda ama shaqaalaha, si toos ah ama hab qandaraas, halka adeegyadaa lagu soo bandhigo qofkaas ku lugta leh xidhiidhka tooska ah ee ardayga (Sharciga Waxbarashada §11 (4) iyo §1125(3)).

**Kooxda Isir** Koox dad ah isku sooca dhaxal ay wadaagaan oo ay ku jirtoluqada, dhaqan oo inta badan wadaaga diin guu iyo/ama mabda' taas oo adkaysa tafiirta.

**Isirka ama Dhibaataynta Asalka Qaranka** Asalka Qaran fal aan suubanayn ama weedh hadal ah oo ku socota qof ama koox isku isir ah ama isku qaran ah kuwaas oo wadaaga sifooyin isku mid ah, luqaddo, caadooyin iyo dhaqano, ku salaysan isiri, asal wadan, dhaqano iyo caadooyin.

**Maqnaanosho Aad u badan, Goo'goyska, Jaritaanka Xiisada, Habsanla** Dugsi kastaa waxa uu go'aamin doonaa wax ka qabadka ardayda kuwaas oo urursha maqnaansho badan iyo habsan muddada wax la dhiganayo sanadkoo dhan.

**Filashooyinka** Muujinta aaminsanaanta xooggan ee waxa ay dadku awood u leeyihiin inay qabtaan oo ay gaaraan. Filashooyinkau waa kuwo caadhi oo diirigalin ah. Waxay keenan tilmaamo waara oo ku saabsan sida ay tahay inaan isku soo bandhigno oo aan u muujino nafteena, sida ay tahay in aan u dhaqmano, sida aan wax u baranno iyo waxa aan gaadhno. Luqad toosan ayaa had iyo jeer loo adeegsadaa in wax lagu farsameeyo filashooyinka.

**Baad ka qaadis** Tuugo adeegsanaysa cago juglayn ay ka mid tahay lacag a helid ama hanti ardayga iyaddoo loo caga juglaynayo, la baqdin gelinayo ama hanjabaad waxyeelayn jidh ah.

**Dagaalka** Muujinta ama ka qayb galka rabshad, ama dagaal ama guluf.

**Khamaarka** Ka qayb galka fursadda ciyaaraha, ay ka mid tahay, laakiin aan ku xaddinayn, ciyaarta kaadhdhka iyo.ama waxyaabe kale oo qiimo leh.

**Sinjiga** Doorarka bulsho ahaan dhisanm dhaqabadda, hawlaha, iyo nisbooyinka ay bulsho muuqaata uga fekerto in ay ku habboontahay ragga iyo dmarka (lab iyo dhegig muujisa "sinji"); dhab ama loo arko galmo; oo ay ka mdi tahay qofka aqonsigiisa sinji ama muuqa (Sharciga Waxbarashada §11 (6)).

**Caddaynta Sinjiga** Habka kaas oo mid kasta oo inaga mida ahi u caddeyo aqoonsiga sinjiga kuwa kale iyaddoo la marayo dhaqanka, dharka, jarista timaha, codka iyo qaabab kale oo soo bandhigid ah.

**Aqoonsiga Sinjiga** Habka ay dadku naftooda u aqoonsadaaan oo u soo bandhigaan labnimadooda iyo dhegidnimada caalamka. Aqoonsiga sinji waa dareen shakhsi oo noqoshada nin, haweenay, wiil, ama inna, ama mar marka qaar ka baxsan qaybahaas. Aqoonsiga sinji waa mid gudaha ah, oo aan lama huraan ahaan aanu arki karin kuwa kale.

**Dhaqan xumada Hoolka** Fal ulakac ah kaas oo daahiya hawlgalada iyo marintaanka garoonka dugsiga ee dibada ka ah dhismaha iyo goobaha dad waynaha ku jira dhiima kastoo dugsiga ah ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xadidnayn hoolalka, jararnjarooyinka, kaafateeriyada, maktabada, masraxa, dhammaan xafiiska, iyo dhammaan goobaha aan loo qorshayn sidii fasalo. Dhaqan xumadda hoolka waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn:

- Keenista xawayaanka rabaayada ama xoolaha aan la ogolayn
- Dhufashada, ciyaar qalafsan, ciyaar dagaa ah
- Isku xoomid koox ahaan qaab xanibaya dhaqaaqa ardayda meel ilaa mel kale
- Samaynta qaylo xad dhaaf ah oo aan macquul ahayn
- Xanibaada gaadiidka ama dhaqdhaqaaqa dadka jidka maraya
- Dhex ordista hoolalka
- Baxsashada marka shaqaale dugsiga ahi uu ku waydiinayo su'aal toos ah ama codsi toos ah ku socda arday
- Joogitaan aan la ogolayn meel kasta oo macnuuca oo dugsiga ah.

**Dhibaataynta** Abuuritaanka bay'ad colaadeed ee hab dhaqanka ama hanjabaad afka, cabsigelinta ama aflagaadada ee leh ama yeelan lahayd Saamaynta si aan macquul ahayn oo faragelin weyn ee fursadaha waxqabadka waxbarashada ardayga ama faa'iidooyinka, ama fayoobida maskaxeed, dareemed ama jireed; ama dhaqan, hanjabaadaha hadalka, cagajuglaynta ama xadgudub oo si macquul ah u sababi ama si macquul ah loo filaayo inay u sababi doonto in ardaygu u baqo badqab kiis ama keeda jireed. Dhaqanka, hanjabaad afka ah iyo tu aaan ahyn, baqdin gelin ama cayda waxaa looga fekeraa in ay tahay falal dhibaataayn marka ay falalkani ku salaysanyihiin sinjiga dhabta ah ee muuqada ee qofka, midabka, baqada, miisaanka, asalka qaran, kooxda isir, diinta, ku dhaqanka diinta, naafanimada, qaabka galmo, sinjiga ama jinsiga (sharciga Waxbarashada §11(7)). Xeerka lagu dabaqo falalka dhibaataynta:

(a) Hantida dugsiga;

(b) Shaqada dugsiga;

(c) Ka baxsan hantida dugisga halka falalkaas ay abuurto ama si la arki doono ay u abuurto halis kharibaad muuqata gudaha deegaanka dugsiga, halka la saadaalinayo in dhaqanka, hanjabaada, baqdin gelinta ama cayda ay gaadhi karto dugsiga.

**Falka** Aan suubanayn ee qof ku biira koox Qaab gaar ah oo dhibaataynta ardayda dhexdeeda ah loo qeexo sidii hawl dulaysi iyo halis ah laga filayo arday si uu ugu biiro koox ama ay aqbasho koox rasmi ama aan rasmi ahayn, iyaddoon loo eegin u diyaar ahaanshaha ardayagu in uu ka qayb galo. Falka aan suubanayn ee qofka ku biira koox waxa uu keenaa dulaysi guud, raaxa daro jidheed ama caadifadeed, dhaawac jidheed ama xaqiraad guud, ama waxa uu abuuraa xaalad halka dulaysiga guud, raaxa daro jidheed ama caadifadeed, dhaawac jidheed ama xaqiraad guud ay suuragaltahay in ay dhacdo. Dhaqanka falka aan suubanayn ee qofka ku biiraya koox, laakiin aan ku xadidnayn, ta soo socota liisaska guud:

(a) Bulsha ahaan cay ah, faquuqid leh ama dhaqan aan iskaashi lahayn;

(b) Si xun u sticmaalka buurriga, khamradda ama maandooriye aan sharci ahayn/sharci ah;

(c) Waxyeelo leh, dagaal badan, burburin badan oo dhaqano kharibaad badan.

Wax hawl ah taas oo baqdin gelisa ama ugu hanjabta arday fogayn, ama si xun u saamaysa caafimaadka ama badbaadada ardayga; ama hawsha sababta ama uga baahata ardayga in uu soo bandhigo hawl ama fal ah xad gudubka gobolka ama sharci federaali ama siyaasada Degmadda/shuruucda.

**Kicinta ama ka Qayb galka Rabshad** Ku keenaya kharibaad wayn jawiga nidaamka iyo edaabta dugsiga taas oo lama huraan u ah waxbarasho wax tar leh, ka baxsan kharibaada fasalka guud, sida rabshad.

**Dhaawaca** Waxaa la kulantay ama ku talisay kalkaalisada caafimaadka dugsiga, inuu raadsado daryeel caafimaad uuna keeno karo dukumiintiyada.

**Kicinta** Dhaqan ay dhici karto in ay kiciso ama soo saarto khilaaf dagaal ama jidheed oo u dhexeea labba qof ama ka badan.

**Qaadashada** Hababka ardayga waxaa la filayaa in uu raaco marka arday soo gaadho Xarunta Dhaqan toosinta oo laga soo saaro fasal ama goob kale.

**Burburin Ula kac ah Hanti qofeed ama Dugsi ama Burburin** Waxyeelo, burburin ama jaah doorinta hanti dugsigu leeahay ama qof kale.

**Aaladaha interneedka ku shaqeeya** Tan waxaa ku jira taleefannada casriga ah, taableedyada, saacadaha casriga ah, ama aalad kasta oo kale oo awooda in lagu xiriiriyo interneedka.

**Waxkaqabadyada** Barnaamijyo gaar ah, farsamooyin, baratokoolo kullamo xafidaad ah, kullama xirfad dhisid ah, qof ama koox hawlaha la tlinta ah taas oo awood u siisa ardayda muujinta dhaqankooda, jawigooda, aahiyaha iyo dareenada; baro dhaqanada bedelka iyo caadooyinka; ka shaqaynta caqabadaha shakhsiyeed; xalinta khilaafaadka; iyo horumarinta ujeedooyinka iyo aorshaha dib dhabada ugu soo celinta guusha dugsiga.

**Waxqabadyada Heerarka ah iyo Xisaabtanka** Waxqabadyada heerka sare ah iyo isla xisaabtanka waxay u gudbiyaan dareenka sii kordhaya ee degdega ah iyo halista ardayga iyo waalidka iyagoo:

- Kordhinta heerka ku lug lahaanshaha iyo xiriirka ardayga iyo waalidka marka faragelinta iyo tallaabooyinka la xisaabtanka ay sii kordhayaan.
- Ku lug leh macalimiinta kale, kooxda taageerada xubnaha macalimiinta, iyo/ama maamulayaasha shirarka dhaqanka iyo qandaraasyada lala leeyahay ardaya iyo waalidka.
- Kordhinta heerarka kormeerida dadka waa wayn iyo warhaynta ardayda baadhitaanka maalin laha ah , horumarka warbixinaha, iyo faallo celinta macalinka.

Wax ka qabadka iyo edbinta siman waxay ka guuraan jawaabaha macalinka una guuraan welwelka dabeecadda una guuraan faragelin aad u adag oo dhamaystiran iyo la xisaabtanka marka a) isla dhaqankaas uu noqdo mid joogto ah; ama b) xoojinta, soo noqnoqoshada, ama darnaanta dhaqamada isbiirsaday iyo shilalka ayaa ku socda inay sii kordhaan ama c) hal shil ayaa dammaanad qaadaysa jawaabta Heerka 2aad ama Heerka 3aad.

**Habbaynta Shaqo** Marka ardayda la ga saaro fasalka iyaddoo sababtu tahay dhaqan rabsho ama aan habboonayn,shaqaalaha dugsigu waa in ay siiyaan ardayaga hawlihii ama casharadii uu seegay ama fursadda uu ku habbeeya shaqadaas casharada ah iyaddoo aanay ciqaab jirin. Ardayga leh Qorshayaal Waxbarasho oo la gaar yelay (IEPs) iyo qorshayaasha 504 waxay leeyihiin dhowrid dheeraad ah oo u baahan karta fulin buuxda oo IEP, ahayn laylisyo.

**Shil Dhibaatayn Muuqada, U-xoog-sheegasho, iyo/ama Takoorid** Dhacdo keliya oo la xaqiijiyey ama dhacdooyin taxane ah oo la xaqiijiyey halkaasi oo ardaygu uu ku sugan yahay handadaad, xoog-sheegasho iyo/ama takoorid arday iyo/ama shaqaale ka tirsan hantida dugsiga ama goobta dugsiga. Intaa waxaa dheer, ereygan waxaa ku jiri doona dhacdo la xaqiijiyay ama dhacdooyin taxane ah oo la xiriira dhibaatayn ama xoog-sheegasho oo ka dhaca hantida dugsiga.

Shil Dhibaatayn Muuqada, Handadaad, iyo/ama Takoorid waa ka hoos imanayaa cabasho qoran ama afka ah oo ku socota Hojoogaha, maamulaja ama qofka magacaaan, ama shaqaale kale oo dugsiga ah. Dhaqanada waxaa ku jira, laakiin aan ku xadidnayn, khataraha, baqdin gelinta ama caayida isirka qofka ee dhabta ah ama ka la moodayo, midabka miisaanka, asalka qaran, diinta, dhaqanka diinta, naafada, nooca galmo, sinjiga, jinsiga ama nooc kaloo heer sharci oo la dhowro ah.

**Asalka Wadanka** Dalka uu qofku ku dhashay ama dalka awoowayaashiisa ay ku dhasheen.

**Isticmaalka Aan La Fasaxin ama Aan Haboonayn ee Qalabka Dugsiga, Alaabaha Dugsiga, iyo Aaladaha Elektarooniga ah** oo ay ku jirto:

- Si xun u isticmaalka Tignoolajiyada: Xaalad kasta oo arday ama ardeey ay si ula kac ah u farageliyaan, wax u dhimaan, u beddelaan, u galaan, u burburaan, ama u kharribaan kombiyuutarka ama nidaamka isgaarsiinta fasalka, dugsiga, ama degmada, taasoo keentay luminta ama musuqmaasuqa macluumaadka, ama awoodda nidaamka lagu shaqeeyo, ama si kasta u carqaladeeyo ama hoos u dhigo dugsiga ama kaabayaasha tignoolajiyada degmada.
- Si qaldan u isticmaalka Kombuyuutarka: Mid aan la ogolayn ama isticmaal habboon ah oo kombuyuutarada ah, ay ka mid tahay Internetka, barnaamijyada gaarka ah ama gelitaan aan habboonayn oo xogta kombuyuutar ah (taas waxa loola jeedaa wadaaga faaxidho sawiro ah, sawiro galmo ay ka mid yihiin gudbinta sawirada galmada carruurta, sawiro galmo ama sawiro sahrci darro ah ama sawiro, isticmaal aan la ogolaan oo kombuyuutarka ah, barnaamijka kombuyuutarka/shabakad isku xidha kombuyuutaro kootooyinkooda, soo gelida baro internetka oo aan habboonayn.)
- Isticmaalka Aan-La-Fasaxin iyo Si xun u Isticmaalka Elektarooniga ah iyo Aaladaha kale: Qalabka elektarooni ahaan lagu waa xidhiidho, moobilada, laysaro af dhuban, qalabka muusiga shakhsi ahaaneed (Riikoodhka dhegah, MP3 yada, iwm), ciyaaraha elektarooniga ah iyo agab kale ay magacowday shaqaalahu sidii kharibaad ama wax kharibaad laga filan karo. Si xun u isticmaalka waaa ku jira, laakiin aan ku xadidnayn, fariin qoraal ah dirid, dirid sawiro galmo, bolog ku qorid, faalo hadal ah, xidhiidh khariban ama summad ah, xidhiidh la isugu diro iimayl ahaan, fariimo degdega, bolog ku qord, iyo soo gelin bog internetka ah.) Ardaydu kama qayb qaadan karto xidhiidh elektarooni ah kaas oo wax u dhimaya mida ku salaysan dhabta ama sinjiga muuqda, midabka, musaanka, asalka qaranka, kooxda isir, diinta, ku dhaqanka diinta, naafonimada, nooca galmadda, sinjiga, ana heer kale oo sharci ahaan dhowran (handadaada elektarooni ah).

**Waalid** Waalidka asala ahaan dhalay. Korsaday, ama masuulka AMA qofka diiwaan ahaan xidhiidh waalid la leh ardayaga.

**Joogta ah** Soo noq noqota muddo maalin ah ka dib markii dhaqan toosinta la fuliyaya oo la siiyay wakhti ku filan si uu saamayn u yeesho.

**Dagaal jidhka ah** Habdhaqan keenaaya ama ku hanjabaaya inuu abuuraayo waxyeelada jidhka ah oo ku dhacaysa dadka kale, oo ay ka mid tahay laakiin aan ku xadidnayn, garaacis, laadis, qaniinyo, candhuufid iyo dhufasho.

**Walxaha Mamnuuca ah ama Sharci Darada ah** waxaa ku jira, laakiin kuma koobna, khamriga, waxyaabaha la dhuuqo, marijuwaana/xashiishka, kookaynta, LSD, PCP, amphetamines, barbiturates, ecstasy, heroin, steroids, waxyaabaha la xakameeyo, walxo kasta oo caadiyan loogu yeero daroogada la abuuro ama marqaanka, isku ekaysiinada (ayna ku jirto laakiin kuma koobna cannabinoids), daawada dhakhtarku qoro ama daawada meelaha lagasoo gato marka haysashadu sharci daro tahay ama si khaldan loo adeegsado ama loola wadagao dadka kale, iyo maado kasta taasoo, marka si khaldan loo isticmaalo, keeni karta naafo ama maskax waali; walxaha mamnuuca ah ama Sharci Darada ah waxaa sidoo kale ku jira paraphernalia ee la xariira maadooyinkaan. Walxaha si sharci ah loo isticmaalo oo ay haystaan dadka waaweyn ee da'da sharciga ah waa ka mamnuuc ardayda, booqdayaasha iyo shaqaalaha SCSD.

- Qaybinta: Ku wareejinta haysashada walxaha mamnuuca ah ama sharci darrada ah qof kale oo leh ama aan lahayn lacag beddelasho.
- Isticmaalka ama Haysashada: Ku isticmaalka walxaha mamnuuca ah ama sharci darrada ah ama haysashada walxahan ee hantida dugsiga ama hawlaha dugsiga.

**Dhaqan xumada Goobta Dad waynaha** Fal ulakac ah kaas oo daahiya hawlgalada iyo marintaanka garoonka dugsiga ee dibada ka ah dhismaha iyo goobaha dad waynaha ku jira dhisma kastoo dugsiga ah ay ka mid yihiin, laakiin aan ku xadidnayn hoolalka, jararnjarooyinka, kaafateeriyada, maktabada, masraxa, dhammaan xafiiska, iyo dhammaan goobaha aan loo qorshayn sidii fasalo. Dhaqan xumadda waxaa loo kala saaraa sidii mid halis ah oo waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xadidnayn:

- Keenista xawayaan rabaayada ooaan la ogolayn ama xawayaan
- Dhufashada, ciyaar qalafsan, ciyaar dagaa ah
- Isku xoomid koox ahaan qaab xanibaya dhaqaaqa ardayda meel ilaa mel kale
- Samaynta qaylo xad dhaaf ah oo aan macquul ahayn
- Xanibaada gaadiidka ama dhaqdhaqaaqa dadka jidka maraya
- Joogitaan aan la ogolayn meel kasta oo macnuuca oo dugsiga ah.

**Jinsiga** Waa koox dad ah oo isku asaliyad ka soo wada jeeda ama wada dhalasho; Ujeeddooyin la xiriira dad dhigista awgeed, Guddiga Tirokoobka Mareykanka ayaa isticmaala eray bixinnada ah: "Caddaan/Kawkeeshiyaan," "Madoow/Afrikaan Mareeykan/Afrika ka soo jeeda," "Aasiyaan," "Isku-dhaf," "Hisbaanik/Laatiinoos," iwm. Si aad u fahfaahisooo ukala soocdo kuwa dega Maraykanka.

**Dhibaataynta Isireed** Fikrad aan sax ahayn ama weedh afka ah loola jeedo qof ama koox dad ah kuwaas oo leh muqaal guud oo ay wadaagaan (taas waxaa loola jeeda, midabka, indhaha, timaha iyo sifada wejiga hida ahaan uga soo gudubtay tafiirta ama dhaxal) taas ooka soocda qayb gaar ah oo bini aadamka ah, oo ku salaysan muuqaalaadaas jidheedh.

**Diin** Miduun diin ama caqiido ruuxi ah ama doorbidis, iyaddoon loo eegin haddii caqiidadan ay wakiil ka tahay koox abaabulan ama ku xidhnaansho koox abaabulan leh caqiidooyin ruuxi ah ama diineed.

**Dhibaataynta Diinta** Fikarada xun ama weedha afka ah ee loola jeedo shakhsi ama koox dad ah kuwaas oo leh caqiidooyin guud oo diineed oo ku saabsan asalka iyo ujeedada adduunka iyo jiritaana ama jiritaan la'aanta taas oo ku salaysan caqiidooyin diineed.

**Dhaqanka Diinta** Ka qayb galka cibaadadada, tukashada, xidhshada dhar diineed ama summad, muujinta walxo diineed, ku dhegenaana hsarciyo cuntooyinka oo gaar ah, diin ka beddelida ama qaababka caddaynta diimeed, ama ka hor istaaga hawlo gaar ah. Go'aansahada haddii ku dhaqanku yahay doorad diimeed ee hawlaha dabeecada, laakiin ah dhiirigelinta qofka.

**Khatar Aan Laga-fiirsan** Dhaqanka abura khatar muuqada oo dhaawac jidheed oo halisa ah ama dhimasho ku keenta qofka kale.

**Dib U soo Celinta** Bedelida ashyaada la xaday ama waxyeelo loo gaystay iyaddoo a bixinayo qiime xaq oo suuqa ah iyaddoo la magdhabayo ama adeeg.

**Dhaca** Ka qaadashada lacagta ama hantida qof kale si xoog ah.

**Asalka Sababta** Nidaamka Habka Qorshaynta. Hab dhibaato xalin ah waydii 4 su'aalood: ***Hadda halkeen joognaa? Xageen u soconaa? Sideen halkaa ku gaadhi doonaa? Yaa dib noo dhigaya?***

**Sharciyada** Xeerar wada socda oo cad oo la dhaqan gelin karo ama mabaadi' xukunta ama hage dhaqan. Waxay bixiyaan tilmaaml gaar ah oo ku saabsan waxa la yeelayo iyo waxaan la yeelayn macnayaasha guud; sidaasna; sharciyada waa la sheegaa iyadoo la adeegsanayo mid uun luqadan suuban ama aan suubanayn. Sharciyada dugsiga caadi ahi waxay bixiyaan jihooyinka qaabka istaaga qofka: Waxaad xidhataa; waxaad dugsiga keentaa; halka aad tegi kartaa iyo marka aad tegi karto halkaa. Sharciyadu waxay barbaariyaan dareen nidaam, degenaan, ujeedo wanaag, shuruudaha dejin dhaqan waxbarasho xooga saaraya.

**Baska Dugsiga** Gaadhi kastaa waxaa leh dadwaynaha ama wakaalad dowladda ah ama dugsi gaar ah oo waxaana loogu shaqeeyaa is gaadhiinta ardayda, carruurta ardayda ah, macalimiinta ama dadka kale ee metelaya kartida maamul, ku socda ama ka imanaya dugsiga ama hawlaha dugsiga, ama, si gaar ah loo leeyahay oo loogu shaqeeyo magdhowga gaadiidka ardayda, carruurta ardayda ah, macalimiinta dadka kale ee metelaya kartida maamul ku socda ama ka imanaya dugsiga ama hawlaha dugsiga. Sharciga Waxbarashada§(1) iyo Sharciga Jidka iyo Gaadhiga §142.

**Shaqada dugsiga** Dhacdo ka baxsan manhajka oo dugsi kafiisho ama hawl. Tan waxaa ku jira dhacdo kasa, oo ka dhacaysa gudaha ama meel ka baxsan dugsiga, la diido ama ay ogoshahay Degmaddu, ay ku jirto, laakiin aan ku xadidnayn, dhacdo ciyaareed o goobta ka baxsan, ciyaar dugsi, riwaayado, soo saarid muusig, safaro bixintaan aha ama safaro Degmo kale kafiilatay. Sharciga Waxbarashada §11(2).

**Tooxda Dhaqan toositna Dugsiga** Kooxda dugsiga qiimaysa xaaladaha ardayga wiig kasta si ay u hubiyaan helitaan aan eex ahayn oo adeega iyo dhaqan toosinta ay u baahanyiin ah. Koox dhaqan toosinta dugsiga waxay isticmaalaan xogta ardayga "digniin hore" heer qiimaynta si loo caddeeyo ardayda halis xoog ah ugu jira fulinta dhaqan la beegsanayo iyo faragelinta caafimaadka maskaxda ah taas oo wakht habboon la saadaalinayo.

**Hantidda Dugsiga** Ka baxsan garoonada, dhammaan dhismayaasha, iyo wax meel ah oo ku jirta gudaha dhismaha, garoonka ciyaaraha, garoon, meesha gawaadhida la dhigo ama dhul ka kooban gudaha laynka hantida xadka dugsiga hoose ama dugsigs sare.

**Dugsigoo dhan** Sharciyada, xeerarka, hababka, iyo hawlaha maalineed ee ku lug leh arday kasta iyo xubin kastoo shaqaale gudaha muddo kasta oo maalin walba ah.

**Dhaawac Daran oo Jirka ah** A waxaa laga wadaa dhaawac daran oo jirka ku dhaca kaasoo u baahan in qofka isbitaal la geeyo ama lagu daaweeyo qolka xaalada degdega ah ama xafiiska dhakhtarka waxaana ku jira, laakiin kuma koobna, dhaawaca daran ee tooreeyda ama jabka, jabka ama dilaaca lafaha ama ilkaha, jugta madaxa, jeexdin u baahan in qofka la tolo iyo dhaawac kasta oo kale oo la xariira khatarta dhimasho ama naafo.

**Dhaqan Xumada Halistaha ee Goob Dadwayne** Eeg Dhaqan Xumada Joogtada ah ee Goobta Dadwaynaha.

**Dembiyada Galmadda:**

- Weerar Galmo Fal jidheed oo galmo xoog ama hanjabaad ah ku lid ah xubin shaqaale ah ama arday kale, ay ku jirto taabasho aan habboonay.
- Dhibaataynta Galmo Ku dhaqaan galmo oo aan la soo dhowayn, codsiyo feebar galmo, qaadashada ama isku dirida fiidyow galmo ah, sawiro, ama maqak duuban ama mid aan habboonayn oo af ahaaneed, qoraal ama dhaqan jidheed ama dabeecad galmo, kuwa kale lagu jiheeyo. Dambiilaha dhibaataynta galmo waxa uu ku tao bixinayaa, qalqaashada, codsada, amra, dalbada ama haddii kale isku daya in uu kuwa kale ku dhiiri geliya in uu galmo la yeesho ama gaadhsiin galmo sharci darro ah isagoo og in ayku keenayso cadho, dembi ama halis qof kale.
- Dhaqan Xumada Galmada, taas oo ay ku jirto, laakiin aanay ku xadidnayn, taabashada jidheed ee qaybaha dareenka leh ee jidhka ee qof kale ama qof. Falalka la iskaga raalida yahay ee kalgacal kuma habboon goob waxbarasho oo waa mamnuuc.

**Galmo** Sifooyinka bayolojiyeed ama jidheed oo xaddida ragga iyo dumarkai (Lab iyo Dhedig sheega "galmo").

**Hanuuninta Galmada** Sinjiga soo jiidata qofka galmo ahaan. Qof ay aad u soo jeedato ama gaar ahaan xubno la sinji ah waxaa loosifeeyaa sidii khaniis. Qofka labbada sinjiba xoog u soo jiitaan waxaa loo sifeeyaa sinji laawe ama aan ku xadidnayn doorasho galmo. Mid dhab ama galmada toosan ee muuqata, khaniisnimada, sinji la'aanta (Xeerka Waxbarashada §11(5)).

**Dhibaataynta Hanuuninta Galmada** Fikrada khaldan ama jawiga ku aadan qof ama koox dad ah oo ku salaysan soojiidashadooda galmo ee xaga ama ka jawaab celinta xubnaha ku lidka ah ama la sinjiga ah.

**Tababaraha Taageerada Ardayda** Xubin kooxda taageerada ardayda ah (la taliye, shaqaale bulsho, dhakhtar cilmi nafsi, dhakhtar dhaqanka ardayda ku takhasusay, u doodaha dhalinyarada, qof ku takhasusay horumarka dhalinyarada, maareeye kiis, ama macalin la shaqeeya SPED) ama macalin iskii isu diray kuwaas oo bixiya tababarka, xirfad barid, iyo taageero arday gaar ah oo u baahan faragelin socota iyo ka warhayn dhow oo horumarka ah.

**Tababaraha Taageerada Ardayga**

1. SSC waa goob ku haboon xalinta uur kutaalada xun oo la adeegsado inta lagu jiro maalinta casharada. Yoolka SSC waa inay taageero guud u noqoto ardayda ayadoo la siinaayo tusmada qof wayn waxaana heli kara dhammaan ardayda dugsiga.
2. SSC ayaa loo adeegsadaa in ardayda lagu xiro shaqaalaha iyo caawimaadaha ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan, iyo sidoo kale caawimaadaha la qorsheeyay iyo shaqada hormarinta xirfada.

**Habsanka** Imaansha dugsiga goor dambe ama fasalka.

**Tuugnimo** Qaadashada ama isku dayga qaadashada hanti qof kale ama hay'ad ogolaansho la'aan ama aqoonta qofka milkiilaha ah, ay tahay ujeedadu in laga xanibo ka leh isticmaalkiisa: Budhacadnimo, ay ku jirto helitaanka ama isku dayga in la helo lacag, badeeco, deegyo ama xogo qof kale iyaddoo la isticmaalayo awood jidheed ama dagaal, dagaal isku xidhan, ama baqdin gelin iyaddoo la adeegsanayo qalab ama hub; Tuugnimo/haysashi/beddelaada alaab la soo xaday, oo ay ku jirto tallaabada haysashada ama wareejinta hanti qof kale ogolaansho la'aanta qofka leh.

**Maadada Tubaakada** Waxaa laga wadaa nooc kasta oo shiishad ah ama aaladaha ay ku jirto nikootiinta iyo agabka la gasho aaladahaas iyo maadadaas kale ee tubaada ama ay ku jirto nikootiinta nooc kastaba, iyo sidoo kale taraqa, qarxisada iyo agabka kale ee fududeeya ee la xariira. Tan waxaa sidoo kale ku jira maadooyinka tubaakada oo la barxay oo lagu marqaamaayo ama ay ku jirto tubaako, tubaakada aan sigaarka ahayn nooc kasta.

**Xadgudubka** Joogida dhismaha dugsiga ogolaansho la'aan, ay ku jirto marka dugsiga laga joojiyo ama la eryo; ay ku jirto u soo dhaca ama soo gelida.

**Marqaansanaanta** Mid la beddelay oo jidheed iyo/ama xaalad jidhka ah ka dib cabbitaanka khamrada, maandooriyaha ama waxa la nuugo.

**Aan ula kac ahayn** Aan ula kac ahayn ama aan loo kasin; shil ah.

**Taabashada Aan la Doonayn** Fal kas loo sameeyay oo ka dhan ah qof laguna gaysto ku taabashada qayb jidhka ah ama qalab, ay ku jirto, laakiin aanay ku xaddidnayn, dhufashada, riixidda, calyo ku tufidda, iyo wax ku dhufashada, keenaysa cadho, naxdin ama dhaawac jidheed oo yar.

**Goobjooge soo warbixiyay** Waa qof ka hadlay ama talaabo qaaday si uu u taageero qof ama dhacdo, gaar ahaana qofka arinta faragasha asagoo difaacaaya qofka la weeraray ama lagu xad gudbay.

**Isticmaalka ama haysashada** Cabbitaanka khamradda, maandooriyaha ama waxyaabaha la nuugo ama haysashada walxahaas dhismaha dugsiga ama shaqooyinka dugsiga.

**Hub** Hubka waxaa lagu qeexay 18 USC §921 ujeedooyinka Xeerka Dugsiyo ka Xor ah Hubka. Sidoo kale waxaa macnaheedu yahay hub kale, qoriga BB, baastolad, tamuujad, qoriga ugaadhsiga, rayfal, qori culus oo mishiin gan ah, wax qori loo eekaysiiyay, tooray, tooray gaaban, sakiin, mindi booda, mindi xoog ku soo baxda, bir gacant lagu qabto oo lagu dagaalamo, shimbira laaye, mindi wayn. Ta qasacada lagu furo, usha seefta leh, qori la rido oo elektari ah, kiish camuud aha ama bud, rasaas cabbaysan ama madhan, jilaha Kungu Fu, qori elektari ah, baasbaaska buufinta ah ama buufin waxyeelo leh, qarax ama bam dab dhaliya, ama qalab kale, aalad, agab ama shay keenikara dhaawac jidheed ama dhimasho. Wax kasta oo u eg, been abuur ah ama hub ay carruurtu ku ciyaarto ayaa loo tixgaliyaa hub ujeeddooyinka qeexitaankan.

**Miisaan** Waxa kiila jeeda cabbirka qofka.





Syracuse City

School District

Xafiisyada Dhexe: 725 Harrison Street, Syracuse, NY 13210
Cinwaanka Boostada: 1025 Erie Boulevard West, Syracuse, NY 13204
www.syracusecityschools.com